Astaamaha Qofka Hanka Sare leh

Qore

Cabadifatax Maxamuud Ducaale

(Cajab)

Copyright © 2018 by Cabdifataax Maxamuud Ducaale

" Cajab"

All rights

Reserved No part of this book may be reproduced in any form or by any means, eletronic or mechanical, including photocopying, recording, or by any information storage and retrieval system,without written permission from the Copyright owner.

"Buuggan waxbalagama baddali karo, lama badin karo, lamana min guurin karo, iyadoon ogalaanshiyo laga haysan qoraaga buugga".

All questions and comments should be directed to: Author

Garoowe.
cajab2@hotmail.com., cajab100@gmail.com.
Facebook :- cajab2@hotmail.com.
Talefan :+252907061362

daabacaddii: 4aad
bogaga: 135
luuqadda: Somali

Tusmada kitaabka

Mawduucyada buugga

1) Hordhac ……. …….
2) Maxaa loola jeedaa han sare ? …..
3) Hanka sare halkee ayuu ka soo burqada ?
4) Himmada saraysaa ma deeq baa mise waa dadaal?
5) Nooluhu hanka sare maku kala duwan yihiin ?.
6) Xayawaanaadku sida ay u kala han sareeyaan
7) Dadku sida ay u kala han sareeyaan
8) Astaamaha lagu yaqaan qofka hanka sare leh

1- Waa qof leh Yool cad, qorshe degsan, aragti dheer……

☒ Cilmi baaristii jaamacada harvard ……
☒ Abuu bakar alsadiiq iyo hankiisii sare …..
☒ Cumar bin cabdill-casiis ……
☒ Bill clinton ……
☒ Sheekh cabdalle cali basfar
☒ Garahaam
☒ Sheekadii duqdii reer banii israa'iil
☒ Cabdi raxmaan aldaakhil

- **Waa qof hiigsada inuu meel weyn ka gaaro cibaadada Alle**
- Xudeyfa iyo salaadu Nabiga (NNKH) uu la tukaday
- Ibnu mascuud iyo salaadu latukaday Nabiga Tartankii Abuu bakar iyo Cumar bin khadaab… Abuu bakar alsadiiq

2- Abuu dalxa alansaari iyo beertiisii bayruxa. …. . **Wax yaalaha liita ayuu iska koryeelaa, wixii fiicana wuu qaataa.**

- Imaamu ibnu cuqayl
- Imaamu abu qaasim alhudali
- Imaamu ibnu casaakir
- Afartii imaam ee loo yaqaanay maxamadyaashii…

3- **Waqtigiisa ayuu ka faa'iidaystaa**

- ✓ Sheekh shariif Cabdi Nuur Xasan
- ✓ Imaamu Alnawaawi
- ✓ Imaamu yaxya ibnu maciin.
- ✓ Imaamu Maxamed Bin Xasan Alshaybaani……..
- ✓ Imaamu Maxamed Bin Salaam Albikandii……
- ✓ Imaamu Ibnu Abii Xaatim
- ✓ Imaamu Bukhaari
- ✓ Imaamu Saclaba Alnaxwi.65
- ✓ Imaamu Ibnu Jariir Aldabari
- ✓ Imaamu Abuu Qaasim Albaqawi

4- **Bulshadiisa ayuu wax u qabtaa**

- Dhallin yaradii SYL
- Sheekadii Takeo Awsahira
- Mahaatiir maxamed – raysal wasaarihii hore ee wadanka Malaysiya.

5- Waa qof aan dheg u dhigin hadalada ku dhisan hanjabinta.

- Tomas edison .
- Monty roberts .
- Maxamed bin abii caamir.
- Abuu jacfar al-daxaawii .
- Maxamed alkhayaad.
- Sheekh khaalid alazhari.
- Colonel Harland Sanders .
- **Henry Ford** (ninkii iska lahaa fikrada baAbuurta la yiraahdo model ford) .

6- Waa qof aan aqoon quusasho iyo noogidtoona.

- Baqiya bin makhlad.
- Buurta mount Everest.
- Taymuur link.
- Imaamu kisaa'ii.
- Helen adams keller.

9) Siyaaba lagu kobcin karo hanka sare.
10) Faciis is-Beddelka.
11) Magacyada buugaagta aan kasoo minguuriyay.

Ereyada ay ka dheheen akhristayaashu kitaabkan :-

1- Buuga astaamaha hanka sare waa mid ka mid ah buugtii iigu fiicnaa ee noloshayda akhriyo, wuxuu kaaga jawaabayaa buugan , su'aal kasta oo qof yool iyo hiigsi sare leh ku fikiro, Marka aad billaawdid akhrinta buugan waxaad jeclaysanaysaa in aadan dhigin illaa dhammaadka, murtida ku qoran awgeed.

Macallin : - Cumar Nuur Cali (Cumar Qatar) MBA of Financial Management Cairo, Egypt

2- *Buugan markaan akhriyay run ahaantii waxaan arkay inuu u qoran yahay usluub shayyiqa (ku soo jiidanaaya) iyo hadal fudud cidwalbana fahmi karto ayuu uqoran yahay.*

Muscab Cabdi ra'uuf Xaaji Cabdullaahi – Jaamacada Bariga Afrika – Bosaso.

3- walaahi buugaag badan oo aan akhriyayey waxaa ka qiimo badanaa buugan afsomaliga ku qoran, waayo qaabka aad u bilowday aayaa ah qaab maskax aan cajsi gelinayan, waxaad moodaa in cilmu nafsi yaqaan uu qorey, marka aad bilowdo ilaa aad dhamaysid kala goyn kari maysid, runtii waa buug koobsanaya dhan walba oo nolosha ka mid ah, tusaale wax tar leh uu ku qoran yahay, maasha allah waan kuugu hambalyeeynayaa dadaalka aad gelisay

qoritaanka buuuga, waa buug runtii umada anfaci doona insha allah gaar ahan dhallinyarada.

Sadaam Cumar cismaan – ardey dhigta Jaamacada Bethel Medical College - Faculty of medicine – Ethopia.

4- runti waxa farxad ii ah in aan ka mid noqdo dadkii kitaabkan ka faa'idaystay qiimiha badan leh, oo ciwaankisu yahay *"ASTAAMAHA QOFKA HANKA SARE LEH"* Runti Qisooyinka uu qoraagu so qaatay waa kuwa ugu filan tusaale qof han sare leh, Qisooyinkaas oo waliba nooc walba leh, runti waxan oran karaa waa mid tusaale & ku dayashoba ugu filan dhalinyarada manta & akhristahaba, kuwaas oo boorka ka jafaya qofkii hankiisu hooseyo, oo damac galinaya.

Khaliif Farax Maxamed - Master of Public health – JNMC, KLE University,- India

5- Boogan qofka akhriya laba aromoodba waa ka caawinayaa ....in uuu ka helo karaaar ama dhiiiri galin aan xad lahayn ..iyo in qofku maskaxdiiso korto .caqabadahana u dhabar adaygo .

Cabdi casiis Cabdulle Ducaale. Sudan Academy for Banking and Financial Scineis.

6- Ugu Horayn waa buugii ugu horeeyey oo aan filayo in laga qoray Tanmiya Bashariya oo soomali ku qoran ..... waxana dhihi karaa ummadda Soomaliyeed Guud ahaan wax wayn ayuu ka anfacayaa buuggan.

Cabdi qaadir Maxamed Jaamac.

7- Buugani waxa uu kamidyahay buugaagta ay u baahanyhiin dhalinta soomaliyeed, waa buug rajjo u noqonaya qof walba oo han dheer leh, markasta uu raja xumo ama ya'asi dareemo iftiin unoqnaya, runti wax badan ayuu buugani ii iftiimiyay aniga.

Cabdi fataax Daahir cilmi – Azhar Univercity – Cairo – Egypt.

8- Han iyo himilo la’aani waxay qofka dhaxal-siiyaan inuu ku raaxaysan kari waayo nolosha, isla jeerkaana u adkaysan waayo dhirbaaxooyinka waqtiga. Haddaba, Buuggani wuxuu kuu fududaynayaa sidii aad hankaaga kor ugu qaadi lahayd, isla jeerkaana u xaqiijin lahayd himiladaada nololeed.

Axmed Ismaaciil Maxamuud (Axmed Deeq) Jaamacada Caynu Shamsi – Cairo – Egypt.

Habka uu kitaabku u qoran yahay :-

(1) Hor dhac ka kooban sideed su'aalood oo gogol dhig u ah mawduuca uu kitaabku xanbaarsan yahay, kana waacinaaya akhristaha inuu jawaab u helo su'aalo badan oo uu iska waydiin karo mawduucan.

(2) Astaamaha uu leeyahay qofka hanka sare leh, oo ah todoba astaamood, waana qeybta ugu muhiimsan kitaabka uguna dheer.

(3) Talooyin qofka ka caawinaaya siduu hankiisa kor ugu qaadi lahaa.

Hordhac

Alle ayaa mahad ballaaran dhamaanteen leh, Nabi Maxamed Naxariis iyo Nabad gelyo Korkiisa ha Ahaato .

Caawa oo ah habeen Sabti soo gelayso taariikhduna tahay (11/5/2013) ayaan bilaabay qorida kitaabkan aan u bixiyay ((**Astaamaha Qofka Hanka Sare**)

Sheeko gogol xaar ah :-

Qoys ayaa waxaa u dhashay wiil aad iyo aad u qurux badnaa markaas ayay waxay u bixiyeen Caadi, tarbiyad iska caadi ah ayay ku tarbiyeeyeen, markuu lix sano gaaray ayaa waxaa la geeyay iskuul iska caadi ah oo ay dhigaan macallimiin iska caadi ah laguna dhigo manhaj iska caadi ah, markuu dhameeyay iskuulkii hoose wuxuu u gudbay iskuulka dhexe isagoo ku baasay darajooyin iska caadi ah, markuu dhameeyay iskuulkii dhexe wuxuu u gudbay dugsiga sare isagoo kusoo baasay darajooyin iska caadi ah, markuu dhameeyay dugsiga sare wuxuu ku baasay darajo iska caadi ah waayo dhakhtiimin iyo akhris iska caadi ah ayuu wax u akhrisan jirey, wuxuu galay jaamacad iska caadi ah waayo darajooyin sare oo u suurtagelin karta inuu galo jaamacad sare ma haysto, jaamacadii ayuu dhameeyay isagoo ku baasay darajo iska caadi ah 50%, wuxuu helay shaqo iska caadi ah (nolo

maalmeedkiisa uu ka heli karo), markuu damcay inuu guursado wuxuu raadsaday gabar magaceeda la yiraahdo Caadi nolol caadi ahna ku soo barbaartay, markuu guursaday wiilkii 1aad wuxuu u bixiyay Caadi yare, Gabadhii 1aadna wuxuu u bixiyay Caadi yarey (ilayn hooyadeed ayaa caadiya wayn layiraahdaa), nolol iska caadi ah ayuu ku noolaa ilaa ay geeridii u timid, dhimasho caadi ah ayuu iska dhintay, aasitaan iyo duugid caadi ah ayaa la duugay, markii qabriga la dhigay oo ciida lagu malaasay ayaa waxaa lagu qoray " **halkaan waa qabrigii Caadi** " !!! .

Walaal hadii aad i waydiiso oo igu dhahdo maxaa ula jeedaa qof caadi ah ? maxaad ka wadaa nolol caadi ah ? maxaa ula jeedaa iskuul iska caadi ah ? maxaa ula jeedaa tarbiyad iska caadi ah ? maxaa ula jeedaa dhimasho iska caadi ah ayuu dhintay ? su'aalahaas iyo kuwa la mid ah haddii aad i waydiiso oo igu dhahdo maxaa ula jeedaa, jawaabtaydu waxay noqonaysaa inaad su'aalahaas jawaab u hesho ayaan kitaabkan u qoray, inaad kala barato nolosha iska caadiga ah iyo mida aan caadiga ahayn, inay jiraan tarbiyad caadi ah iyo mid aan caadi ahayn.

Walaal waligaa ma'aragtay wiil aan inaba hayaraatee wax han sare lahayn ? waligaa ma'aragtay dhallin yaro fikirkoodu dhaafsiisanayn inay guursadaan oo iska xamaashaan kaliyah ? waligaa ma'aragtay dhallin yaro aan isku dayayn inay adduunkan raad fiican kaga tagaan oo magacooda biyo

dahaba lagu qoro ? waligaa ma'aragtay dhallin yaro derbiyada lugaha ka lulaaya oo shaxaad ku nool wax fikrad hormarineedna aan lahayn ? waligaa ma'aragtay dhallin yaro shaqadoodu tahay inay falanqeeyaan oo wax ka sheegaan qofkii dadka hormar u horseedaaya ? waligaa maaragtay dhallin yaro haddii aad waydiiso oo ku dhahdo, fikirkiinu maxaa weeye ? noloshiina maxaa hiigsanaysaan ? yoolkiina nolushu maxaa weeye ? aan ku siin karin jawaab fiican waayo waxaad waydiinayso iyo waxaad ka hadlaysaba kulama fahansana, isku soo duuduubo waligaa ma'aragtay wiil dhallin yaro ah oo loogu yeeraayo " waxma tare " hadaba caadi waxaan ula jeedaa waxma tare.

Walaal haddii aad isha laraacdo intee waxmatare dhallin yarada qeybaheeda kala duwan ku jira ?.

Akhristaha qiimaha badanoow kitaabkan waxaan u qoray qof kasta oo diyaar u ah inuu ka dhexbaxo nolosha iska caadiga ah, qof kasta oo aan raali ku noqon inuu adduunkan siyaado ku ahaado ee raba inuu raad kaga tago .

Akhristaha qiimaha badanoow soo ila dareemi maysid :-

1. Hoos u dhaca ku yimi hankii sare iyo himmadii saraysay ee lagu aqoon jirey dhallin yarada soomaaliyeed, waxaan aad uga niyad jabsanahay in aad aragto wiil dhallin yaro ah oo inaba ha yaraatee wax han sare ah lahayn mid adduunyo iyo mid aakhiraba, in aad aragto dhallin yaroo waqtigoodii qaaliga ahaa ku bixinaya wax'aan adduunyo iyo aakhiraba faa'iido ula hayn.
2. Inaad arkayso wiil dhallin yaro ah oo aad u firfircoonaan jirey, markuu noqdo qof Ahlu diin ah oo dhaqanka diintu ka muuqato isku badalaya qof hankiisu liito, usoconaya sidii qof jiran oo tabar dari ay hayso, waxaad ka waa yaysaa dhamaan firfircoonidii aad ku aqoon jirtay markii uusan ahayn eheludiin, waxaad moodaa in haddii qofku noqdo eheludiin inay ka dhigan tahay inuu qofku hankiisa hoos u dhigo iwm.
3. Cumar bin khadaab Alle raali haka noqdee ayaa arkay nin madaxa hoos u rogtay oo u soconaya sidii qof jiran oo kale, markaas ayuu kasoo degay daabbadii uu fuushanaa oo ku yiri " war madaxaaga kor uqaadan diinta islaamka maahan shay cudur kugu ridaaya oo hankaaga hoos dhigaaya" .
4. Wuxuu kaloo arkay nin is liidaaya markaasuu intuu kasoo degay daabbdii uu fuushanaa ayuu u shuu watay la dhacay

oo ku yiri " war diintanada hanaga ceebayn Alle haku dilee, dintanadu maahan diin liidnimo iyo han jabin" .

5. Waxaa kaloo i murginaya in aan arko dhallin yaro Alle siiyay caafimaad, xoog, caqli iyo dhamaan wax qof ku hor mari karo haduu ka faa'iidaysto isla markaasna hankoodii hoos dhacay, kaliyah ka fikiraya qof ay shaxaadaan, biibito kuraas cad cad la dhigay ay lugaha ka lulaan oo sheeko aan qiima lahayn waqtigooda iskaga luminayaan, inaba haya raatee wax hindisa ah aan lahayn dadka ay saaxiibada layihiin aysan ahayn dad han sare leh, fikrad fiican aan kugu birin karin, lajoogi taankoodu uu khasaaro yahay.
6. Dhallin yarada qiimaha badaneey, bal aad iila dhuuxa sheekada saxaabiga la yiraahdo (Rabiica Bin Kacab) si aad u fahantaan meesha aan rabo inuu gaaro hankiinu, Rabiica wuxuu dhinac fadhiyay Nabigaρ, iyadoo xaaladu halkaas marayso ayaa waxaa la keenay qaniimo laga helay markii la furtay wadanka loo yaqaan ((Baxrayn), qaniimadaas oo iskugu jirta , lacag, dahab, xoolo nool, iwm, Nabiguρ wuxu bilaabay inuu qaybiyo qaniimooyinkaas qof kasta oo weydiistana uusiinayo, Nabigaρ ayaa jaleecay Rabiica oo ku yiri :- I waydiiso waxaad rabto waan ku siinayaa, markaas ayuu ku yiri :- Nabigii ilaahayoow waxaan ku weydiistay in aan noqdo qofka jannada kugu la rafiiqidoona !! walaalkayga qiimaha badanoow bal ila dhuux rabiica waa wiil dhallin

yaro ah, faqiir ah, meelluu seexdo aan haysan, masjidka ayaa guri u ah, baahi badan ayaa ka muuqata, Nabigunaρ wuxuu qeybinayaa hanti iyo adduunyo, qofkii weydiistana wuu siinayaa, waliba Nabigu wuxuu ku yiri Rabiica i waydiiso waan ku sinayaa, waxaa laga yaabaa dhallin yarada maanta joogta haday soo mari lahayd fursadan oo kale inay Nabigaρ ku dhihila haayeen lacag iyo hanti nasii waanu baahanahaye, laakiin Rabiica hankiisu adduunyo waa ka weynaa wax adduunyo ka qaalisan ayuu hiigsanayaa, meel lagaaro meesha ugu saraysa ee ugu fiican ayuu rabaa inuu helo, jannuu waydiistay !!!, markii aad sheekada rabiica aad dhuuxdo ayaad fahmaysaa dadka hanku inta uu ukala joogo.

7. Han sare waxaan ula jeedaa inay dhallin yaradu hiigsadaan, shay sareeya, qiima badan leh, wax weyn ku fadhiya, dadka la ayniga ah waxay hiigsanayaan ka sareeya, isla markaasna ay ku lamaaniyaan ficil u suurta gelinayaa hankooda ay hiigsanayaan siday uga salgaari lahaayeen, han sare oo ficil u qalma lagu lamaaniyay ayaa guul lagu gaaraa.

Yaa kitaabkan ka faa'iidaysan kara ?

Kitaabkan waxaa ka faa'iidi kara qofkii dhaqan geliya xeerkan soo socda, xeerkaasoo ah :-

(haddii aad 100% aaminsan tahay oo rumaysan tahay inaad yoolkaaga gaari kartid waxaa hubaal ah inaad gaarayso, laakiin haddii aadan aaminsanayn oo rumaysan tahay inaadan gaari karin waxa hubaal ah waligaa inaadan gaarayn kana mira dhallinayn yoolkaad hiigsanayso).

Sheeko gaaban

Waxaa jiray wiil, wiilkaasi wuxuu dhiganaayay jaamacad, maalin maalmaha ka mid ah ayuu wuxuu ku dhex hurdooday xiisad dhexdeed xiisadaasina waxay ahayd xiisad xisaab ah, wuxuu wiilkii ku soo kacay markii xiisadii dhamaatay qayladii iyo buuqii ardayda, markuu indhaha kala qaaday ayu wuxuu arkay laba masalo ama laylis oo uu Macallinku ku qoray sAbuurada, isla markiiba wuxuu la booday qalinka iyo buuga isagoo raba inuu boobsiiyo oo qorto inta aysan ardaydu

sAbuurada tirtirin oo masaxin, wiilkii markuu qortay labadii masalo wuxu la'aaday guriga, markuu damcay inuu ka shaqeeyo wuxuu arkay inay yihiin laba masalo oo aad u adag, wuxuu muda la raftaba wuxuu ku guulaystay inuu ka shaqeeyo hal masalo, maalintii danbe markii lagaaray xiisadii Macallinka ayuu Macallinkii u geeyay masaladii uu ka shaqeeyay isagoo waliba u cududaaranaaya inuu ka shaqayn waayay midii kale, Macallinkii ayaa ku yiri " xiisadii ugu damaysay anigu wax waajibaad ah ama laylis ah idiinma dirin ", markaas ayaa ardaygii ku yiri :- Macallin labadaan masalo waxaan ka qortay sAbuurada markaad noosoo gashay xiisadii ugu damaysay, markaas ayaa Macallinkii ku yri " labadaas masalo waxaan sAbuurada ugu qoray ardaydaan u sheegaayay in aan la xalin karin qof ka shaqayn karana uusan jirin ", markaas ayuu ku yiri ardaygii :- hade Macallin halmid ayaanba ka shaqeeyay tan kalena lagayaabe in aan ka shaqeeyo haddii aan dadaal dheeraada ku bixiyo . markaas ayaa Macallinkii

yaabay oo uu qaadan waayay labadii masalo mid ka mid ah ayaa arday ka shaqeeyay.

Haddii aan fiirino sheekadaan waxaan is waydiin karnaa su'aalahaan soo socda, haddii ardaygaasi iska dhaadhicin lahaa inuusan ka shaqayn karin su'aalahaan maka shaqayn lahaa ? haddii uu maalintaas uu dhagaysan lahaa xiisada Macallinkaas oo uu Macallinka ka maqlilahaa labadaan su'aalood lagama shaqayn karo, maysku dayilahaa inuu ka shaqeeyo ardaygaasi ? maxaa keenay in Macallinkaasi ka shaqayn waayo su'aalahaan waliba uu ardaydiisa ka dhaadhiciyo in aan laga shaqayn karin, soo ma'aysan keenin inuu iska dhaadhiciyay in aan laga shaqayn katrin ? hadduu aaminsan yahay in laga shaqayn karo sookama shaqeeyeen ?

Haddaba walaalayaal waxaad ogaanaysaan xeerkaasi qiimaha uu ku fadhiyo oo ah, wax aadan rumaysnayn in aad ka salgaarayn kama sal gaari kartid.

Sheeko kale oo kooban :-

Taariikhdu markay ahayd 1991 ayaa ciidamada wadanka Ciraaq waxay gubeen ceelashii shidaalka ee dalka kuweyt, markaas waxaa wasiirka naaftada iyo batroolka ahaa ninka la yiraahdo " DR rusheydi alcumayri ", wasiirku wuxuu wada hadal lagalay afartii shirkadood ee markaas ugu waa weynaa shirkadaha qaabilsan daminta ceelasha naaftada ee badda ku yaal ee shidaalka ama naaftada , shirkadihii mid waxay tiri in aan ceelshaan damino waxay nagu qaadanaysaa ilaa 5 sano, midkii kale ayaa tiri haddii aan nafta iska qaadno waxay nagu qadanaysaa 4 sano, wasiirkii ayaa afka qabsaday isagoo yaaban ayaa tii kalena tiri 3 sano ayay nagu qaadan in aan ceelashaas damino, wasiirkii oo yaba iyo ama kaaab kasoo haray ayaa la hadlay shirkadii afraad markaas ayay ku dheheen waxaa macquul ah in aan 2 sano ku soo afjarno, mudadii ugu yarayd ee wasiirku ka maqlay shirkadahaas waxay noqotay 2 sano, bal ila qiyaas laba sano oo ceelshii shidaalku gubanayaan, laba sano oo kumanaan noole ah ku dhimanayaan badda dawlada kuweyd, labasano oo hanti aad u farabadan ay beerdaroobayso, labasano oo hawada dawlada kuweyd qiic iyo naafto gubatay ay isku xirayso halkaas oo ay ka dilaaci karaan cuduro badan.

Wasiirkii iyo shaqaalihii shirkadaha naaftada ee dalka ka shaqaynaayay ayaa bilaabay inay isku dayaan daminta

ceelashaas iyagoo aan sugin shirkadahaas mudada dheer qabsaday, 20/3/1991 ayay ku guulaysteen inay damiyaan ceelkii ugu horeeyay, 13/4/1991 markay ahayd ayuu ku dhawaaqay wasiirku inay soo afjari doonaan daminta ceelashaa muda 7 bilood ah, hadalkaas markuu yiri wuxuu la kulmay hadalo badan oo lagu hanjabinaayo laguna tusaayo inuu riyoonaayo, waayo inuu 7 bilood ku damiyo ceelal ay shirkadihii waaweynaa ay ku damin waayeen 2 sano ka yar waa hadal uu ku hadlo qof aan caqlilahayn, 6 bilood iyo 21 maalmood ayuu ku soo afjaray dhamaan ceelashii holcaayay iyo khasaarihii dhamaanaayay.

Waxaa is waydiin leh sidee wasiirkan iyo shaqaalihiisu ugu guuleysteen inay damiyaan ceelashaan ay ka cududaarteen shirkadihii ugu waa weynaa ee qaabilsanaa dab damiska ? hadduu wasiirku sugilahaa labada sano ee ay u qabatay shirkadii ugu waqtiga yarayd intee khasaaro ayaa soo gaarilahaa dawlada kuweyd ? hadduu aamini lahaa inuusan ku guuleysanayn hawshaan ma bilaabilahaa shaqadaan halganka dheer u baahan maku gulaysan lahaa ? hadduu dheg u dhigilahaa hadaladii hanjabinta ku dhisnaa hawshaan maku guulaysan karilahaa ?

walaalkayga qiimaha badanoow soo ila dareemi maysid kaalinta ay ka qaadatay aaminidii uu aaminay inuu ku guulaysanaayo hawshaan waliba muda aad u yar marka loo fiiriyo hawshu inta ay le'egtahay.

Haddaba si aynoo ku caddaato waxa loola jeedo, han sare, himmad saraysa iyo ereyadaas wixii la mid ah, waxaan isku dayayaa in aan akhrista yaasha usoo gudbiyo, macna guud oo ku saabsan, hanka sare iyo himmada sareysa.

Su'aasha 1aad

Maxaa loola jeedaa han sare?

- Han sare waxay ka dhigan tahay in qofku yaraysto caqabad kasta oo ka hortimaada inta uu hiigsanaayo yoolka uu rabo inuu gaaro.
- Han sare waa shayga kugu xanbaraya in aad u istaagto oo ka mira dhaliso yoolka aad hiigsanayso.
  wuxuu yiri Cumar bin khaddaab: - Hankaaga ha yarayn, waayo maan arag qofka wax curyaamiyah (saama-jiida) oo ka daran han yarida (hankiisa oo hoos u dhaca).
  Soomaaliduna waxay ku maah maahdaa *" lax waliba shilalkay is dhigtaa lagu qalaa ''*.
  taas macanaheedu waxaa weeye, hadba adigu meeshaa is dhigto ayaad ahaan, haddii aad han sare yeelato, meel weyn ayaad gaaraysaa haddii hankaagu hoos u dhacona waligaa liidnimada ka biximaysid.

Haddaba, han sare wuxuu la mid yahay Himma saraysa.
Han hooseeyaha wuxuu la mid yahay Himmad hooseysa, himmaduna waxay la mid tahay, shayga qofku ku hamiyo oo uu niyaysto oo ku fikaro inuu sameeyo kana sal gaaro

Su'aasha 2aad

Hanka sare halkee ayuu ka soo burqadaa?

Han ka sare (himmada sare) booskeedu iyo halka ay dagan tahay waa qalbiga, xubnaha kalena waxay fuliyaan wixii himmad ah oo qalbigaas kasoo fula, qofkuna himmadiisa wuxuu ku gaaraa oo ku helaa darajo uusan ficilkiisa ku gaarin.

Bal xadiiskan dhuux: -

عن سهل بن حنيف τ أن النبي ρقال : (مَنْ سَأَلَ اللَّهَ الشَّهَادَةَ بِصِدْقٍ بَلَّغَهُ اللَّهُ مَنَازِلَ الشُّهَدَاءِ وَإِنْ مَاتَ عَلَى فِرَاشِهِ) رواه مسلم (1909)

((Qofkii Alle waydiista shahaado si dhab ahna wu weydiista, Alle waa gaarsiiyaa qofkaas darajada shuhadada, waloow gogoshiisaba haku naf baxee)).

Bal xadiiskanna aan dhuuxno, si ay inoo ku caddaato qiimaha ay leedahay inuu qofku han sare yeesho.

عن ابن عباس τ عن رسول الله ρ فيما يرويه عن ربه تبارك وتعالى قال: (إن الله كتب الحسنات والسيئات، ثم بين ذلك، فمن هم بحسنة فلم يعملها كتبها الله عنده حسنة كاملة.....) رواه البخاري و مسسلم .

((Alle wuxuu qoray xasanaadka iyo xumaanta, kadibna waa cadeeyay, qofkii ku hammiya khayr inuu sameeyo,

goortaasna aan samyn, Alle wuxu u qoraa xasano dhamays tiran) .

Labadaan xadiis waxaynu ka faa'iidaysanaynaa arimahan soocodada: -

- Qof walba hammigiisa meeshuu dhigo weeye, qofkii han sare leh, hankiisaasi wuxuu gaarsiinayaa, shay uusan ficilkiisu gaarsiin karin.
- Qofka hankiisu sareeyo Alle wuxuu ka dalbadaa wax weyn, Allena wuu siiyaa qofkaas wuxuu ka dalbaday niyadiisa ayuuna ku siiyaa.

Su'aasha 3aad

Hanka sare (himmada saraysaa) ma deeq iyo hibo Alle bixiyo miyaa mise waa shay la kasban karo?

Qofku inuu han sare yeesho waa shay qofkasta Alle ku Abuuray, markaa guud ahaan qof walba uu leeyahay han sare, laakiin qof walba meel ayay u joogtaa, hankuna waa shay qaabili kara inuu kor u kaco hoosna u dhaco, qofku markuu ku dadaalo inuu hankiisa kor uqaado hankii sare ee Alle ku Abuuray waxaa ku darsamaysaa miduu isagu kasbaday, qofkii iska fariista oo aan ka shaqayn siduu hankiisa kor ugu qaadilahaa hankiisu intii Alle siiyay ayuu ku joogayaa, dariiqa Alle jeexay noloshaan adduunyo ayaa waxay ku dhisan tahay wixii la kobciyaa

kobca oo hanaqaada, wixii la dacayo oo aan la kobcin ma'hana qaado, kor uma kaco , siyaado ku ma'darsanto, himmaduna waa saas oo kale .

Su'aasha 4aad

Hanka sare malagu kala duwan yahay?

Noolaha dhan han sare waa leeyahay wayna kukala duwan yihiin, midba meel ayay u joogtaa.

Xayawaanku sida uu ukala han sareeyo

- Caara caaradu (CankAbuutka) markay saa u dhalataba waxay bilawdaa inay samaysato gurigeeda iyo meeshay ku noolaan lahad hooyadeedna kama sugto inay u dhisto.
- Abeesada waligeed kuma noolaan god ay iyadu qodatay waxay raadsataa god bahal kale qotay oo ay ku habsataa, waayo hab dhaqankeeda ayaa wuxuu ku dhisan yahay dulmi, dhac iyo boob.
- Shinbirka loo yaqaan tukaha (Quraab) wuxuu raad sadaa neef dhintay hilibkiis oo goortaas cunaa.
- Galayrkuna wax aan noolayn hilibkiis macuno oo bakhtiga hilibkiisa macuno .

Sidaa arkaysaanba, xayawaanaadkii ayaaba kala han sareeya . mid bakhti ayuu ku qancay, midna naftiisa uma quurin inuu bakhti iyo mayd cuno, mid waxay ku talagashay inaysan cid

kale ku tiirsanaan, ee ay gurigeeda samaysato, midna waxay ku talagalashay inay cid kale xoogto oo dulmi ku noolaato.

Dadku sida ay u kala han sareeyaan: -

Dadku aad ayay ukala han sareeyaan, bal tusaalayaashaan soo socda dhuux si aad u ogaato qof walba hanku meesha uu u joogo

Tusaalaha 1aad: -

Waxaa maalin isku yimi afar nin oo kala ah, Cabdullaahi Bin Cumar, Cabdi malik Bin Marwaan, Curwa Bin zubayr, Muscab Bin Zubayr, waxay fariisteen harka kacbada markaas ayuu muscab ku yiri " maanta qof walba wuxuu rajaynaayo ha sheegto", waxay ku dhaheen adigu bilaw, wuxuu yiri: - Anigu waxaan rajaynayaa in aan gudoomiye ka noqdo wadanka Ciraaq, labada gabdhood ee kala ah Sukayna Binti Xuseen iyo Caa'isha Binti Dalxa in aan guursado. Curwaa hadalka qabsaday oo yiri: - waxaan rabaa in aan noqdo caalim weyn oo cilmiga laga barto. Cabdi malik ayaa isaguna wuxuu yiri:- Waxan rabaa in aan noqdo madax weynaha muslimiinta dhan (khliifada muslimiinta dhan) .Saxaabigii cabdullahi bin Cumar wuxuu yiri :- Anigu waxan rabaa in aan janno helo .

Raggii dhamaantood waa gaareen wixii ay ku hamiyeen ee ay hiigsanaayeen.

Haddaba, heerarka himmadu waxay ukala joogta dadka sidan :-

1) Qof hankiisu aad u hooseeyo oo ka caajisay inuu xattaa qabsado wax yaalaha noloshiisa daruuriga u ah, had iyo jeer wuxuu ku tiirsan yahay cid kale, himmad uu wax ku qabsado malahan, marxaladaan waa mida ugu liidata han yarida, qofku haduu heerkan gaaro ogaada qofkaasi waa dhintay, isaga iyo kuwa qabriga ku jiraa farqi uma dhaxeeyo, waana noocaan ka dagaalamayno in ay noqdaan dhallin yaradeenu, noocaan waxaa tusaale u noqon karaa, wiil 20 jir ah oo aan shaqaysan , shaxaad ku nool, waxbaran, noloshu u tahay, cunoo cab, markii jeebku kaa marnaadana dadka u shaxaad tag.
2) Qof hankiisu meel dhaxaad yahay, hankiisu gaarsiisan yahay inuu waajibaadka saaran kasoo baxo, reerkiisa u shaqeeysto, hankiisuna inuu intaas dhaafo diyaar uma aha, ma'aaminsana inuu shay intaas ka weyn uu samayn karo, heerkan dhallin yaro badan ayaad arkaysaa oo ku tilmaaman , taasna maahan mid aad ku farxayso markaad ku aragto wiil dhallin yaro ah oo hankiisu intaas le'egyahay, waxaynu rabnaa inuu kor uga kaco .
3) Qof han sare leh laakiin aan aqoon wadooyinkii u umarilahaa hir gelinta yoolkaas uu hiigsanaayo, waxaad ku arkaysaa

noloshiisa inuu marmarna wax aad u fiican qabanayo marna wuu caajisaayo oo hankiisu hoos u dhacaayo, qofka noocaas oo kale ah meel weyn magaaro haduusan helin qof gadaal kariixa oo hankiisa kor uqaada .

4) Qof hankiisu gaaray heer aad u sareeya, hal ku dhigna ka dhigtay " dhawr sano ku noolaw nolol dadka badan kood kugu jees jeesaan, si aad noloshaada inta ka hartay ugu noolaado nolol aysan gaari karin, dadka badankood". Qofka hankiisu halkaas gaaro waxaa lagu yaqaanaa inuu yahay, qof yoolalkiisa ka salgaara, sameeyana wax yaalo dadku u riyaaqaan oo ay la dhacaan, waa qof hankiisu kasareeyo dadka intooda badan, waa qof farta lagu fiiqo , dadku tusaale ka dhigtaan , dadkiisa, dalkiisa, diintiisa, u horseeda hormar.

Fiiro gaar ah :-

dhallin yarada soomaaliyeed, heerka aan ka rabno inay gaaraan, waa inay noqdaan dhallin yaro himmadoodu xidigaha lasiman tahay, lugahooduna dhulka yaaliin.

Astaamaha lagu yaqaan qofka hanka sare leh

Astaanta 1aad: -

Yool cad, qorshe degsan iyo aragti dheer.

Waxaa lagu yaqaanaa qofka hanka sare leh, inuu yahay qof yoolkiisu u cad yahay, qorshe ku socda, aragti dheer leh, arintaas ayaa waxay u sahlaysaa inuu sameeyo wax yaalo dadka intooda badan ay u haystaan wax aan lasamayn karin, lagaari karin, xaqiiqo aan ahayne riyo iyo maaweelo caruureed ah.

Harvard University.

Harvard University, waa jaamacada adduunka ugu qaalisan ee ugu magaca dheer waqtigan hadda aan joogno, waxay samaysay taariikhdu markay ahayd 1970, cilmi baaris ay rabtay inay ku ogaato dhallin yarada haysta qorshe degsan, argati cadd iyo yool ay hiig sanayaan mustaqbalka, cilmi baarista waxay ku samaysy 100 arday oo markaas dhamaysanayaa waxbarashadoodii, warqado ayay u qaybisay waxayna ka dalbatay inuu qof walba uu ku qoro wuxuu rabo oo hiig sanaayo berrito inuu noqdo mustaqbalka, waxay kaloo ka dalbatay inay warqada ku qoraan taleefoonadooda, meelaha lagala soo xiriiri karo, 3% ayaa qoray inay leeyihiin, qorshe u degsan, aragti cad, han sare, yool ay rabaan inay ka

salgaaraan, intii kalena waxay qoreen war iska caam ah oo aan lahayn qorshe iyo yool la hiigsanayo, markii cilmi baarista ay kasoo wareegtay 20 sano, ayay wacday 100 dhallin yaro oo iskugu yeertay, markaas ayay heshay in sadexdii qortay inay haystaan qorshe u degsan, iyo yool cad oo ay hiigsanayaan, inay noqdaan kuwa meel sare gaara, jagooyin fiican qabta, shaqooyin fiican haysta, lacag fiican haysta, 90% kalena ay ka mid noqdeen dadka iska caadiga ah, ee adduunkan iska nool waxay ku soo kor dhiyeena aysan jirin .

Cilmi baaristaa waxaan ka faa'iidaynaa in qofka leh qorshe cad, aragti dheer, yool uu hiigsanaayo, inuu gaaraayo meel aad u saraysa, qofka aan intaas haysana uu ku noolaanaayo nolol iska caadi ah oo wax hor mar ah aan lahayn.

Walaalkayga qiimaha badanoow ! mays waydiisay halkee u socotaa ? ma'ogtahay in horey ay culumadu u dhaheen aduunku wuxuu waddada u xaaraa qofka yaqaan meesha uu u socdo ? ma'ogtahay inay tahay talaabada kowaad ee ugu horeysa guushaa hiigsanayso inaad xadidid oo jaan goysid meeshaa usocoto ? haddaba yool maleedahay ? barnaamuj iyo qorshe makuu degsan yahay ? yolalkaaga ma qortay ? yoolalkaas aad jaan goysay waqtigii aad fulin lahayd ma'xaddiday ? haddii ay jawaabtu tahay " haa waan xaddiday waqtigii aan fulin lahaa ", ku bishaarayso in aad ka mid tahay 3% ay cilmi baaristaan sheegtay inay noqdeen kuwa guulaystay.

DR Ibraahiim Fiqi ayaa wuxuu inoo koobayaa shanta sababood ee 97% dadku aysan u jaan goyn yoolalka ay hiigsanayaan, wuxuuna leeyahay sida: -

a) Cabsi qofkii cabsi ku nool waligiis qof xor ah ma noqdo.

b) Sida uu qofku naftiisa u arko, waxaad ogaataa inuusan wax tarkaagu wax weyn noqonayn haddii uusan waafaqsanayn sida aad naftaada u aragto, waayo niyadjabka uu qofku dareemaayo wuxuu saamayn wayn ku yeelanayaa talaabooyinka uu horay u qaadilahaa.

c) Dib dhiga, walaal ka digtoonoow inaad caaddo ka dhigato hawl kuu taalay maanta inaad berrito u dib dhigto.

d) Fikirka ay dadku ka haystaan qorshe dajinta, dadka qaarkood waxay u arkaan waqtiga lagu bixinaayo qorshe dajinta inuu yahay waqti dayacmay oo faa'iido darro ku lumay.

e) Aqoonta qofku u leeyahay qorshe dajinta, dadka qaarkood waxaa suurtagal ah inay jecel yihiin qorshe dajinta laakiin waxaa ka maqan qaabkii ay u dajin lahaayeen.

Ugu damayntii xasuusnoow: - inuu yahay qofkii aan qorshe iyo hadaf lahayn sidii doon aan naakhuudalahayn, labadoodaba madaxa ayay dhagax ku dhufsanayaan!

Goorma ayuu qofku heli karaa hankiisa ugu sareeya?

Markii uu hiigsanayo inuu ka mira dhaliyo arin aad iyo aad u wayn ama markuu rabo inuu soo ceshado arin weyn oo laga qaatay ama ka maqan, tusaalayaasha soo socda dhuux si aad iila fahanto ula jeedkayga.

1) Haddaan fiirino Nabi Maxamed (NNKH), waxaan arkaynaa inay u suurta gashay muda aad u yar gaaraysa 23 sano, inuu diinta gaarsiiyay jaziirada carabta oo dhan, islaamkana dawlad u asaasay, magaalada barakaysan ee makka gaalada kala wareegay, arimahaas oo dhan waxaa u sahlay Alle gargaarkiisa kasokaw wuxuu hiig sanaayay hadaf weyn oo ah inuu fariinta Alle gaarsiiyo adduunka dhan, inuu dadka ku xiro Rabbigii Abuuray oo ay caabudaan Alle keligiis, inuu dadka jahliga iyo aqoon la'aanta kasaaro, wuxuu haystay qorshe cad, yool weyn, aragti dheer.
2) Markii uu Nabigu uu geeriyooday, waxaan wada ogsoonahay in dad badan diinta kalaabteen oo gaalnimadii ku noqdeen, xattaa qaarkood shegteen inay nabiyaal yihiin oo Alle soo diray sida ninkii la'oran jiray *Musaylamatu kaddaab*, dhibaatooyinkaasi markay dhacayaan muslimiintu waxay

doorteen Abuubakar alsadiiq Alle raali haka noqdee inuu noqdo khaliifada muslimiinta, masuuliyadii ayuu xanbaaray isagoo hal ku dhig ka dhigtay " ma'anigoo nool ayaa diinta islaamku nuqsaamaysaa " , muda aan sadex sano gaarin ayuu ku guulaystay inoo dabar gooyo soona afjaro kacdoonadii ka jirey jaziirada carbta, wuxuu soo afjaray dadkii diiday inay bixiyaan sakada, wuxuu soo afjaray ninkii sheegtay nabinimada ee la oran jirey (*musaylamatul kaddaab*), marlabaad ayuu dhidibada u aasay dawladii islaamka, isla markiiba wixii go'doon ku sameeyay labadii dawladood ee markaas adduunka ugu waa weynaa ee la oran jirey *(ruum iyo faaris),* haddaba waxaa is weydiin leh, mudadaa aadka u yar seebay ugu suurta gashay inuu qabto Abuubakar arimahaas oo dhan ? Abuubakar wuxuu hiig sanayay, inuu sooceliyo haybaddii dawlada islaamka, wuxuu hiig sanaayay inuu soo afjaro qalalaasaha ka aloosan dawlada islaamka dhexdeeda, wuxuu haystay han sare, aragti iyo yool cad, qorshe degan iyo rag aan isaga ka dhicin !!! .

3) Haddaan fiirino, Cumar bin cabdil casiis, waxaan arkaynaa inuu muda gaaraysa laba sano iyo bilo, ku cirib tiray dulmigii ka dhex jiray dawlada *Banii Ummaya*, cadaalada iyo garsoorka meel sare gaarsiyay, muslimiinta dhexdooda laga waayay qof faqiir ah xattaa lawaayay qof sakada qaata, qof walba baytul maalka lacag looga qoray, dhurwaagii iyo xoolohii meel wada daaqeen cadaalad wanaaga darteed, taasna wuxuu ku gaaray, wuxuu lahaa hadaf uu hiigsanaayo, qorshe u cad, aragti dheer.

4) Madax weynihii hore ee wadanka maraykanka (Bill Clinton) ayaa waxaa la weydiiyay markuu dugsiga hoose maraayay, su'aashan maxaad rabtaa inaad noqoto markaa weynaato ? wuxuu yiri waxaan rabaa in aan noqdo madax weynaha maraykanka !!, markii uu maraayay dugsiga dhexe ayaa la weydiiyay su'aashii , markaas ayuu ku jawaabay, waxaan rabaa in aan noqdo madax weynahay maraykanka, markuu marayay dugsiga sare ayaa la weydiiyay, maxaa rabtaa inaad noqoto markaad weynaato ? wuxuu yiri waxaan rabaa in aan noqdo madax weynaha maraykanka, ugu danbayntii Bill Clinton wuxu noqday madax weynaha maraykanka waliba laba jeer ayuu ku guulaystay madaxtinimada maraykanka, wiilkan haddii aad gadaal u fiirsio noloshiisa wuxuu ahaa wiil faqiir ah , reer faqiir ah ka dhashay, laakiin waxaa isweydiin leh sidee ayuu ku gaaray inuu noqdo madax weynaha maraykanka ? wuxuu lahaa han sare, yool ayaa u caddaa laga soo bilaabo waagii uu yaraa ilaa intuu kagaaraayay yoolkiisa, yoolkiisii ayuu u dajiyay qorshe, wuxuuna ku talagalay inuu ka dhabeeyo fikradiisa ah inuu noqdo madax weynaha maraykanka !! .

5) Diktoor daariq suweydaani ayaa wuxuu leeyahay, waxaan la kulmay sheekha la yiraahdo (Cabdalle Cali basfar), markaas ayaan ku iri:- Muxuu yahay hadaf kaagu ? wuxuu yiri :- hadafkaygu waa in aan soo saaro hal malyan oo muslim ah oo qur'aanka xifdisan, markaas ayaan ku iri hadda intee xifdisiisay ? wuxuu yiri :- Labaatan kun oo qof ayaan marayaa oo xifdisiisay !!! , mashaa aallah, bal ila dhuuxa

hadafkaas qiimah badan iyo dadaalka ku jira sheekh cabdalla cali basfar !!! .

6) Nin u dhashay wadanka ingiriiska oo la yiraahdo *Garahaam* muda badanna ka ahaa maamule jaamacad ka mid ah jaamacadaha wadanka ingiriiska sanaduu markuu ahaa 1978, Garahaam wuxuu gaaray lixdan sano, wuxuu galay hawlgab iyo shaqo ka fariisin, maalintii uu shaqada ka fariisanaayay ayaa jacamadii uu maamulaha ka ahaa waxay u samaysay xaflad lagu sagootinayo garhaam, xafladaas waxaa loogu yeeray maamulayaashii jaamacadaha, Macallimiintii, aqoon hayanadii, masuuliyiintii iwm, Garahaam ayaa loo yeeray si uu kelmad ugu jeediyo marti sharafta kasoo qeybgashay xaflada, Garaahaam wuxuu hadalkiisa ku bilaabay " waxaan degsaday 20 hadaf ama yool oo aan ugu talagalay in aan qabto tobanka sano ee soo socota", halkaas markuu marsinaayo Garaahaam hadalkiisii dadkii waxay u qeybsameen kuwa layaaba, ku qosla, ku jees jeesa, Garaahaam dheg uma dhigine wuxuu sii watay hadalkiisii isagoo kalsooni weyn ka muuqato ayuu yiri,

hadafka koowaad waxaa weeye in aan helo guri toban kun oo mitir oo isku weer ah ,

hadafka labaad, hadafka sadexaad ....., Garahaam dhamaan yoolalkiisii 20 shay ahaa ee uu ugu talagalay inuu sameeyo tobanka sano ee soo socda dhamaantood meesha ayuu ka akhriyay.

Taariikhdu markay ahayd 1979 ayaa waxaa ku guulaysatay inay raysal wasaraa ka noqoto wadanka ingiriiska haweenayda la yiraahdo (Margaret Thatcher), haweynaydii waxay u yeertay ninkii ahaa Garaahaam, waxayna ka codsatay inuu lataliye u noqdo kala taliyo sidii ay u hor marin lahayd jaamacadaha wadanka ingiriiska, laakiin Garaahaam wuu ka cudurdaartay wuxuuna ku yiri :- jagadaan waxay iga mashquulinaysaa qorshayaashii iyo yoolalkii aan degsaday in aan ka salgaaro tobanka sano ee soosocoto, wuxuuna ku yiri haddii aad hadafyadayda oo dhan ii samaynaysid waan qabanayaa jagadan hadii kalena may, waxay ku tiri maxay yihiin hadafyadaadu ? markaas ayu u tiri yay 20kii hadaf ee uu degsaday inuu sameeyo tobanka sano ee soo socda, waxay ku tiri waa diyaar waan kuu samaynayaa dhamaan hadaf yadaada laakiin waxaan shardi ka dhiganayaa inaad guriga usoo celiso dawlada markaad dhimato, wuxuu ku yiri waxba kama qabo waan usoo celin .....sanaddku markuu ahaa 1991 ayaa lacasilay dawladii ay hogaaminaysay Margaret Thatcher, Garahaam wuxuu ka mid ahaa dadkii lacasilay, jaamacadihii ayaa go'aansaday inay xaflad saagootin u sameeyaan

Garaahaam oo 72 sano jirsaday, kelmadii uu xaflada kulahaa markuu lawareegay ayuu yiri " 20 hadaf ayaan degsaday oo rabaa in aan xaqiijiyo tobanka sano ee soo socda" dadkii xaflada kasoo qeyb galay waxay noqdeen kuwa lafajaca odaygan de'da ah iyo hanka ku jira, kuwa ku qosla, Garahaam dheg uma dhigin hadalkiisii ayuu sii watay wuxuuna yiri :- hadafka kowaad waxaan rabaa in aan asaaso xarun isgaarsiineed oo noqon doonta xarunta adduunka ugu weyn , Garahaam dhamaan labaatankii hadaf ayuu tiriyey oo meesha ka sheegay, dhawr sano guda hood ayay u suurtagashay inuu dhidibada u aaso Garahaam xarun isgaarsiineed oo noqotay mida adduunka ugu xooga badan ee ugu weyn !!! .

Garahaam, wuxuu ahaa nin leh han sare, qorshe cad, yool uu hiigsanayo, intaasna waxaa u dheeraa wuxuu ahaa nin ku talagalay inuu qori falaarleh iskaga qabto shay kasta oo ka hor istaagi kara hir gelinta yoolalkiisa, waxaana hubaal ah qof kasta oo tilmaamahaas leh inuu gaaraayo hadafyadiisa.

Waxaa hubaal ah, dadka iyo urrurada leh qorshe degan, aragti cad, hadafyo ay hiigsanayaan, inay gaaraan miro aad u fiican, marka la barbar dhigo dadka iyo urruruda aan lahayn qorshe iyo yoolal ay hiigsanayaan.

7) Bal aynu fiirino himmada uu lahaa *Cumar bin cabdull-casiis*, wuxuu yiri Cumar :- waxaan haystaa naf

hankeedu sareeyo oo shayba shayga uu ka fiican yahay u han qaltaagta, waxaan hindisay in aan guursado *(faadumo binti cabdill-malik*), waana guursaday, kadib waxaan hindisay in aan noqdo amiir u taliya labada xaramayn, waana gaaray, kadib waxaan u han qaltaagay in aan noqdo khaliifka muslimiinta oo dhan waana gaaray, maanta waxaan u han qal taagayaa oo hiigsanayaa in aan helo jannada oo ehelu janna noqdo !!!.

Haddii aad fiiriso hammiga Cumar, waxaad dareemaysaa inuu ahaa nin ku tilmaaman han sare iyo aragti dheer, markuu faadumo ku haminaayay inuu guursado bal ila fiiriya tilmaamaha ay lahayd gabadhan uu ku haminaayo Cumar inuu guursado, waxay ahayd gabar ku tilmaaman astamahan soosocda:-

Waxay ahayd gabar aqoon leh, caqli badan, gabayga iyo suugaanta taqaana, Alle ka cabsi badan, qurux badan, awoowiheed, aabeheed, iyo afar ka mid ah walaaleheed ay ahaayeen khaliifada muslimiinta, mana jirin gabar intaas oo tilmaamood isku darsatay aan ka ahayn Fadumo Binti Cabdill-Malik, soo marka uma qalanto inay noqoto gabar uu ku hammiyo inay xaas u noqoto qof han sare leh sida Cumar bin caddull-casiis ? .

Waxaan kaloo ka faa"iidaynaa sheekada Cumar in laga rabo qofka markuu qorshe degsanaayo inuu u kala qeybiyo, qorshe dhaw, qorshe, dhexe, qorshe fog, waana inay qorsha yaashaasi midba midka kale kuu gudbinaayo, bal fiiri Cumar markii hore wuxuu tamaniyay haweenay garab ku siin karta oo la fahmi karta yoolka uu hiigsanaayo, kadib wuxuu tamaniyay inuu noqdo amiir si uu ugu diyaar garoobo kuxunka weyn ee ah inuu muslimiinta khaliifa u noqodo, kadibna wuxuu ku hamiyay inuu noqdo khaliifada muslimiinta, markuu gaaray meel aduun lagaaro meeshii ugu saraysay ayuu wuxuu u hiloobay inuu gaaro meel lagaaro meesha ugu fiican oo ah inuu noqdo ahlu janna !!! .

Sheekadii duqdii reer banii israa'iil.

8) Xili uu Nabigu ku jirey safar ayuu wuxuu soo maray nin reer baadiye ah, ninkii reer baadiyaha ahaa wuxuu aad u karaameeyay Nabiga, Nabigana sidii caadada u ahayd waxay a hayd inuu abaal mariyo qof kasta oo wanaag u sameeya, markaas ayuu ku yiri ninkii reer baadiyaha a haa haddii aad magaalada Madiina timaado noo imaw aan kuu abaal gudnee, ninkii muda yar kadib wuxuu yimi madiina wuxuna u tagay Nabiga, markaas ayaa Nabigu wuxuu ku yiri, i waydiiso waxaad rabto !!! , akhristaha qiimaha badanoow bal iska soo qaad inaad tahay ninkaas Nabiguρ ku dhahaayo i waydiiso waxaad rabtid waan ku siinayaa !!! , Nabigii Ilaahay ee ducadiiso mustajaabada tahay ayaa ku dhahaya i weydiiso waxaad rabto waan ku siinayaa !!! , hadde qof walba markaas ayay kala cadaanaysaa inta hammigiisu le'eg yahay, bal fiiriya ninkii wuxuu Nabigaρ waydiistay, wuxuu ku yiri :- Waxaan rabaa inaad isiiso Rati aan koro, markaas ayuu siisay Ratigii uu weydiistay, kadibna wuxuu ku yiri Nabiguρ, i waydiiso waxaad rabto waan ku siinayaa, markaas ayuu ku yiri :- Waxaan rabaa inaad isiiso Ri' ehelkaygu maalo !!!, cajiib , waad ila aragtaan somahan qof walba meesha ay u joogto himmadiisu iyo waxa uu hiigsanaayo inuu helo, xaaladu markay halkaas marayso ayaa Nabiguρ ku yiri asxaabtiisa isagoo uga go leh inuu kor u qaado hankooda :- Qofkiin maka caajisay inuu noqdo sidii duqdii reer Banii'israa'iil ?

Markaas ayay saxaabadu ku dheheen, maxay ahayd sheekada duqdii reer banii israa'iil ?

Markaas ayuu Nabiguρ bilaabay sheekadii haweenayda oo yiri :- Markii uu Nabi muuse ρ uu damcay inuu reer banii israa'iil ka bixiyo wadanka Masar oo uu dajiyo magaalada Qudus, ayaa waxay garan waayeen wadadii dayaw ayaa ku dhacay, markaas ayay ku dheheen Nabi Yusuf ρ ayaa wuxuu nagula dardaarmay in markaan Masar ka guurayno aan horey u sii qaadano mayd kiisa oo aanaan Masar kaga tagin haddana mawadano, marka saas ayaa laga yaabaa in aan wadadii u garan weynay, markaas ayaa Nabi muuse ρ ku yiri :- Qabrigiisii halkuu ku yaalaa ? yaa garanaaya meesha uu ku aasan yahay ? waxay ku dhaheen qof garanaaya majiro aan ka ahayn haweenay duq ah, haweenaydii ayuu u yeeray Nabi Muuse oo ku yiri natus meesha uu ku duugan yahay Nabi Yusuf ? waxay ku tiri :- kutusi maayo ilaa aad ii fuliso shardigayga !! , markaas ayuu Nabi Muuse ku yiri :- muxuu yahay shardigaagu ? waxay ku tiri :- In aan rafiiq kugula noqdo jannada !!, markaas ayaa Nabi muuse ku yiri :- Ani shardigaaga ma fulin karo waayo jannadu gacantayda kuma jirto, markaas ayay tiri :- Anna idin tusimaayo ilaa lay fuliyo shardigayga, xaaladu markay halkaas marayso ayaa malaku jibriil ku soo degay Nabi muuse ρ oo ku yiri :- shardigeeda sii oo u sheeg inay rafiiq kugula noqonayso jannada !! , markaas ayay haweenaydi tustay meesha uu ku aasan yahay

Nabu yusuf ρ goortaas ayaa meeshii la qoday oo laga soosaaray maytkii Nabiga oo ay qaateen.

Haddii aad u kuur gasho sheekada haweenaydan, waxaad dareemaysaa inay lahayd han sare, hankeeduna wuxuu istaahilay inuu Nabi Maxamed ρ asxaabta iyo dhamaan ummadiisa hankooda kor ugu qaado, sidaas awgeed waxaa ceeb weyn ah in wiil dhallin yaro ah, hankiisu ka hoos maro haweenaydaas de'da ah !!! .

Cabdi raxmaan daakhil.

9) Cabdi raxmaan Bin Mucaawiya Bin Haashim Bin Cabdi malik (*Cabdi raxmaan daakhil*), wuxuu ka mid ahaa dadkii reer Banii ummaya ee ka haray xasuuqii ay u gaysteen cabbaasiyiintu markay xukunka kala wareegeen Banii ummaya, cabdi raxmaan daakhil wuxuu usoo cararay magaalada Qayrawaan ee ka tirsan wadanka Tuunis, markuu imaanayay magaalada Qayrawaan wuxuu jirey 19 sano, wuxuuna arkay in ay ka jirto wadamada lays ku yiraahdo *(North Africa*), kacdoon lagaga soo horjeedo nin markaas ka talinaayay oo la yiraahdo *(Cabdi Raxmaan Xabiib)* wuxuuna ahaa nin cadaawad weyn u haya Banii ummaya, Cabddi Raxaman Daakhil wuxuu isku dayay inuu ka faa'iidayso kacdoonkan looga soo horjeedo ninkan ka talinayaa meesha, wuxuuna arkay inay Andalus tahay meesha ugu haboon ee uu ku xaqiijin karo himiladiisa uu hiigsanaayo oo ah inuu yagleelo marlabaad dawlad ay u talinayaan *banii ummaya*,

si haddaba ay ugu suurtagasho hir gilinta himmaladiisa wuxuu ku talaabsaday inuu sameeyo qodobadan soo socda :-

1- Wuxuu u diray wadanka Andalus nin ay safarka rafiiq ku wada ahaayeen oo la yiraahdo Badar, muhiimmadiisuna ay noqonayso inuu u soo sahmiyo xaalada Andalus soona ogaado dadka samaynta weyn ku leh bulshada ku dhaqan Andalus iyo waliba inuu soo xog ogaado dadka fikradahooda iyo waxay aaminsanyihiin .
2- Wuxuu toos ula xiriiray isagoo u sharxaaya yoolka uu hiigsanaayo, qof kasta oo jeclaa dawladii banii ummaya ee ku nool gudaha wadanka Andalus.
3- Wuxuu xiriir dhaw lasameeyay qabiilooyinka la yiraahdo Barbarka isagoo u sheegaya yoolka uu hiigsanaayo oo ah inuu dhiso dawlad Banii ummaya u taliyaan, wuxuuna ogaaday inay aad u jeclaayeen xukunkii Banii ummaya, haddana ay diyaar u yihiiin inay garab istaagaan si uu usoo celiyo xukunkaas.
4- Wuxuu la xiriiray dhamaan wixii ka haray Banii ummaya isagoo ku war gelinaya inuu Andalus ka asaasaayo xukunkii Banii

ummaya, markaas ayay iskaga yimaadeen daafaha adduunka dhan.

Markii uu hubsaday Cabdi raxmaan Daakhil in ayay diyaar u tahay inuu galo wadanka Andalus, ayuu isku diyaariyay safarkii uu ku gelilahaa Andalus, isagoo aan ciidan iyo askartoona wadan ayuu galay waxaana soo dhaw weeyay rafiiqiisii sahan ka u ahaa (Badar), wuxuu tagay magaalada Qurduba, markaas Andalus waxaa ka talinaayay in la yiraahdo Yusuf Cabdiraxmaan Fihri oo xoogag badan kasoo hor jeedaan, wuxuu ku talagalay inuu ururiyo dhamaan dadkii ka soo horjeeday xukunka yusuf isla markaasna jeclaa xukunkii Banii ummaya ee cabbaasiyintu rideen, diyaar garow weyn kadib waxaa dagaal iskaga horyimi, laba ciidan oo ay kala hogaaminayaan Cabdi raxmaan Daakhil iyo Yusuf Cabdi raxmaan Fihri, dagaal dheer kadib waxaa guushu raacday Cabdi arxmaan Daakhil, maalintaas wixii ka danbeeyay xukunkii Andalus wuxuu gacantiisa ku soo wareegay Cabdi Raxmaan Daakhil halkaasna wuxuu ku asaasay dawlad aad u xoog badan oo ay ka taliyaan Bani ummaya.

Cabdi raxmaan daakhil wuxuu ahaa nin aqoon badan, deeqsi ah, dhaqan wanaag lagu yaqaan, gabayaa ah, hogaan fiican.

Wuxu lahaa laba naanaysood oo kala ah :-

1- **Cabdiraxmaan Daakhil (Cabdiraxmaankii soo galay)**
2- **Saqru Quraysh (Gorgorkii reer quraysh)**

Mid kastoo ka mid ah labadaas naanaysood sabab ayay ugu baxeen, hadaan soo qaadano sababtii ay ugu baxday naanaysta cabdi raxmaan daakhil waxay ahayd, isagoo keligiisa ayuu yimi oo soo galay wadanka Andalus markaas ayuu ka yagleelay dawlad aad u xoog badan, saas ayaana loogu bixiyay cabdi raxmaankii soogalay, naanaysta kale ee ah Saqru Quraysh **(Gorgor**), waxaa u bixiyay amiirkii la oran jirey Abuu jacfar almansuur, isagoo maalin fadhiya Magaalada Baqdaad ayuu weydiiyay ragii la fadhiyay su'aashan, mataqaaniin gorgorka qureysheed ? markaas ayay ku dheheen waa adiga, wuxuu yiri may ani maahi, niman badan ayay sheegeen mid kasta wuxuu ku dhahaayay maahan ninkaasi, markaas ayuu u sheegay oo yiri :- waa Cabdiraxmaan bin mucaawiya bin cabdi malik, wadan uusan waligiis tagin ayuu intuu tagay ka asaasay dawlad xoog badan.

Astaanta 2aad

Waa qof hiigsada inuu meel sare ka gaaro Cibaadada Alle.

Walaalkayga qiimaha badanoow bal ila dhuux sheekadan cajiibka badan si aad u fahanto hankii ku jirey Nabigeenaρ iyo sida uu ugu dadaali jirey cibaadada Alle.

عن حذيفة بن اليمان ، τ قال : صليت مع النبي ρ ذات ليلة ، فافتتح البقرة فقلت يركع عند المائة ، ثم مضى فقلت يصلي بها في ركعة ، فمضى ، فقلت يركع بها ، ثم افتتح النساء : فقرأها ، ثم افتتح آل عمران فقرأها ، يقرأ مترسلاً ، إذا مر بآية فيها تسبيح سبح ، وإذا مر بسؤال سأل ، وإذا مر بتعوذ تعوذ ، ثم ركع فجعل يقول : (سبحان ربي العظيم (فكان ركوعه نحوا من قيامه ثم قال : (سمع الله لمن حمده ، ربنا ولك الحمد) ثم قام قياماً قريباً مما ركع ، ثم سجد فقال : (سبحان ربي الأعلى) فكان سجوده قريباً من قيامه (رواه مسلم(67)

((Wuxuu yiri xudeyfa :- Nabigaρ ayaan la tukaday habeen habeenada ka mid ah, markaas ayuu bilaabay Suuratul-Baqra, markaas ayaan is iri boqol aayadood markuu gaaro ayuu rukuuci doonaa, markaas ayuu sii waday, markaas ayaan is iri suurada oo dhan hal rakco ayuu ku tukan doonaa, markaas ayuu sii waday oo wuxuu bilawday Suuratu Nisaa, markaasuu dhameeyay oo bilaabay Suuratu Aala Cimraan, akhrintiisuna waxay hayd mid degan oo uu qur'aanka kala dhig dhigaayo, haddii uu soo maro aayad tasbiix ku jirto waa uu tasbiixsan, haddii uu soo maro mid ay ku jirto duco waa uu ducaysan, haddii uu soo maro mid Alle wax

lagaga magan gelaayo, Alle ayuu magan galyo weydiisan, markaas ayuu rukuucay oo bilaabay inuu tasbiixsado rukuucdiisii waxay ahayd mid u dhaw intuu taagnaa, kadib ayuu rukuucdii kasoo kacay oo bilaabay inuu ducaysto istaagiisii rukuucda kadib wuxuu u dhawaa rukuucdii ka horeysay, markaas ayuu sujuuday oo bilaabay inuu tasbiixsado, sujuudiisiina waxay ahayd mid u dhaw istaagiisii)) .

Haddii aan fiirino xadiiskan waxa inoo kasoo baxaysa faa'iidooyin badan waxaana ka mid ah:-

1- Nabigaρ iyo saxaabiga xudeyfa waxaa dhallin yaraysnaa saxaabiga oo Nabiga ayaa ka weynaa, waxaadna arkaysaa inuu xudeyfa daalay lana yaabanaa adkaysiga iyo dadaalka Nabigaρ.
2- Sadexdan suuro waa 106 safxo, bal intee saac ayaad ku qiyaasaysaa inuu ku akhriyay Nabigu sadexdaan suuradood? Waliba tartiib ayuu u akhrinaayay, wuu kala dhig dhigaayay??
3- Wuxuu ku dhex waday duco iyo tasbiix intuu akhrinaayay.
4- Bal ila fiiri rukuucdiisa iyo sujuudiisu intee le'ekayd?

5- Dadaalkaas oo dhan markuu samaynaayo Nabiguρ, waxaad ogaataa in Alle danbigiisii hore iyo kiisii danbeba dhaafay oo uusan lahayn wax danbi ah, dadaalkaas wuxuu

samaynayaa isagoo Alle u balan qaaday inuu jannada meesha ugu fiican geynaayo oo siinaayo !!! .

Akhristaha qiimaha badanoow, bal dib u jaleec, himmiga dhallin yarada maanta, waxaad arkaysaa wiil dhallin yaro ah oo ku dhahayaa anigu masjidkaas kuma tukado sababtuna waxaa weeye Imaamka ayaa qur'aanka dheereeya? Waxaa laga yaabaa in imaamkaas akhriyo safxo ama ka yar, waxaana loo arkaa inuu dheeraynaayo.

Walaalkayga qiimaha badanoow bal xadiiskan soo socda ila dhuux

عَنْ عَبْدِ اللَّهِ ، قَالَ : " صَلَّيْتُ لَيْلَةً مَعَ النَّبِيِّ ρ فَلَمْ يَزَلْ قَائِمًا حَتَّى هَمَمْتُ بِأَمْرِ سُوءٍ ، قَالَ : قُلْتُ : مَا هُوَ ؟ قَالَ : هَمَمْتُ أَنْ أَقْعُدَ وَأَدَعَ النَّبِيَّ ρ" رواه البخاري .

((Wuxuu yiri Cabdullaahi bin mascuud:- Nabiga ρ ayaan la tukaday, kama suulin inuu taagnaado ilaa aan ku fikriray arin xun !! , markaas ayaa lagu yiri :- Muxuu ahaa waxaad ku fikirtay ? wuxu yiri :- waxaan ku hammiyay in aan fariisto oo salaada ka baxo)) .

Xadiiska waxaa ku cad inuu awoodi waayay cabdullaahi inuu istaago intuu taagan yahay Nabiga ρ , waxaana ogaataan Nabiga ρ inuu Cabdullaahi ka waynaa.

Akhristaha qiimaha badanoow, tusaale waxaa inoo ah Nabigeena ρ, dhankasta nolosheena ayuu tusaale inoo ku

yahay, ahaato dhanka cibaadada, shaqada, hawl karnimada, dulqaadka, hanka sare, qofku inuu yeesho yool cad iyo aragti qota dheer iwm.

Tartankii cumar bin khadaab iyo Abu bakar alsadiiq.

Xiligii laysku diyaarinaayay dagaalkii (Tabuuk) ayaa Nabiguρ saxaabada ku booriyay inay sadaqo la baxaan, waxaa saxaabada dhexdooda ka bilawday tartan ay ku kala tartamayaan khayrka, Cumar bin khadaab ayaa yiri, waxaan rabaa in aan maanta ka hor maro Abuu bakar alsadiiq, Cumar xaafada intuu aaday ayuu xoolihiisii nuskood keenay, isla markiiba waxaa yimi Abuu bakar oo wada xoolihiisii oo dhan.

Himmada sare ee Abu bakar alsadiiq.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa Nabigaρ ku yiri saxaabada yaa maanta sooman ? markaas ayaa Abuu bakar yiri aniga, yaa maanta janaazo qof dhintay raacay ? Abuu bakar wuxuu yiri aniga, yaa maanta qof jiran soo booqday ? Abuu bakar wuxuu yiri aniga, yaa maanta sadaqo la baxay ? Abuu bakar wuxuu yiri aniga, markaas ayuu Nabiguρ yiri :- Qof intaasi iskuma timaado ilaa haddii ay iskugu timaado jannada ayuu galaa.

Abu dalxa alansaari iyo beertiisii (Bauruxaa).

Markay soo degtay aayadan :-

قال تعالى :- لن تنالوا البر حتى تنفقوا مما تحبون وما تنفقوا من شيء فإن الله به عليم) (92) آل عمران.

Abuu dalxa wuxu ka mid ahaa asxaabtii Nabiga, markii uu maqlay aayadaan ayuu Nabiga ρ u tagay oo ku yiri, rasuulkii Ilaahayoow xoolahayaga waxaan ugu jeclahay beerta la yiraahdo *Bayruxaa*, ilaah dartiis ayaan u sadaqaystay meeshay kuula muuqato ku bixi, markaas ayaa Nabigu ρ ku yiri Abuu dalxa kaasi waa maal ribxay ee waxaad siisaa qaraabada iyo dadka kuugu dhaw.

Bayruxaa waxay hayd beer weyn oo masjidka Nabiga ρ hortiisa ku taala, biya macaan , har macaan, Nabigu ρ uu gelijiray ku nasan jirey biyaheeda ka cabbi jirey.

Saxaabada hanka sare ee ay u hayeen cibaadada iyo u tartanka khayrka wax lasoo koobi karo maahan, tusaalayaashaas aynu sheegnay waxaa inoo kasoo baxaysa heerka ay joogeen iyo yoolka ay hiigsanayaan, inaga waxaa inala gudboon in aan waddadoodii raacno oo ku dayano .

Astaanta 3aad

Astaanta sadexaad ee lagu yaqaan qofka hanka sareeya waxaa weeye:-

Wax yaalaha liita inuu iska kor yeelo oo ka dheeraado, wixii fiicanna uu hiigsado

عن الحسين بن علي رضي الله عنهما أن رسول الله ρ قال: "إن الله تعالى يحب معالي الأمور وأشرافها .. ويكره سفسافها" (صحيح الجامع الصغير).

Xadiiskan wuxuu inoo cadaynayaa inuu Alle jecel yahay arimaha kuwooda sareeya ee sharafta badan, wuuna neceb yahay kuwooda hooseeya ee liita.

Qofka hanka sare leh isagoo ka anbaqaadaaya xadiiskan ayuu jecel yahay arimaha kuwooda sareeya wuxuuna neceb yahay kuwooda hooseeya ee liita.

Markaad aragto dhallin yaro waqtigooda kuliminaaya wax yaalo aan faa'iido badan ku soo kor dhinayn, xiliga habeenku dheeraadana waxay waqtiga ku dilayaan fadhi ku dirir laga sheekeynaayo biibitooyinka iyo in tv-ga ay dul yururaan oo ay dawanaayaan barnaamujyo aan faa'iido weyn ku jirin.

maalintiina ay ku lumiyaan hurdo, baaga muudayn, qorshe la'aan, hor mar la'aan, taasna maahan dhaqan farax gelinaya qof kasta oo han sare leh.

Sheekh Abdi sataar nuweyr ayaa wuxuu warinayaa in nin askari ah soomaray makhaayad , markaas ayuu ku arkay laba nin oo laadhuug cayaaraya, markaas ayuu ku yiri :- Goormaad bilawdeen cayaartan ?

Waxay ku dheheen :- afartii galabnimo , markaas ayuu ku yiri :- Ilaa intee cayaari doontaan ? waxay ku dheheen :- ilaa

sagaalka fiidnimo, maarkaas ayuu ku yiri :- Maxaad ka shaqaysaan ? waxay dheheen :- Macallimiin ayaan nahay, markaas ayuu ul u qaatay oo uu la dhacay kuna yiri :- maydaan shaqo lahayn ? , maydaan xirfad aad ku shaqaysataan lahayn, waxaad bulshada u qabataan miyaad weydeen ? .

Haddii aad nolosheena fiiriso intee arkaysaa dhallin yaro u fadhiya saacado badan cunida qaatka, daawashada cayaaraha iyo dhamaan wax yaalaha nafta lagu maa weeliyo ? soo wax laga naxo maahan inay waqtiga ku lumiyaan dhallin yaradii aan uga fadhinay inay naftooda iyo wadankooda hor mariyaan in xaalkoodu saas noqdo ?.

Imaamu ibnu cuqeyb iyo hanka sare.

Imaamu ibu cuqayl wuxuu yiri iima haboona in aan saacad waqtigayga ka mid ah lumiyo, marka carabkaygu noogo oo wax akhrin waayo, indhahayguna daalaan oo wax arkin waayaan, maskaxdaydaan ka shaqaysiinayaa xattaa markaan jiifo ilaa aan soo kaco iyadoo ay iigu diyaarsan tahay maskaxdayda wixii aan qorilahaa, isagoo hadalka siiwata ayaa wuxuu yiri:- maanta ma jiro qof iga cilmi jecel anigoo maraayaa sideetan sano.

Ardaygiisii Ibnujawzi oo ka sheekaynayaa wuxuu leeyahay :- wuxuu ahaa mid har iyo habeen ku mashquulsan cilmiga, kutubtiisana waxaa ugu wayn kitaabka loo yaqaan (Funuun), kitaabkaas faa'iidooyin badan ayaa ku jira sida cilmiga tafsiirka, xadiiska, luuqada carabiga, naxwaha, fiqiga iwm.

Imaamu dahabi oo ka sheekaynaaya kitaabka funuun ee uu qoray Imaamu ibnu cuqayl wuxuu yiri :- kitaab la mid ah oo ka wayn adduunka laguma qorin waana 800 Mujalad !!!!.

Imaamu Abu qaasim alhudali.

Kanna waa Imaamu abu qaasim alhudalii wuxuu leeyahay isagoo naftiisa ka sheekaynaaya :- Cilmiga qiraa'aatka (waa noocyada qur'aanka loo akhriyo) waxaan ka bartay oo kasoo qortay 365

sheekh, haddii aan maanta ogahay nin iga badiya cilmigan waan aadi lahaa meel kasta adduunka hajoogee.

Imaamu Ibnu jazari oo ka sheekayanaaya wuxu leeyahay :- adduunka dhan ayuu isku maray isagoo raadinaaya cilmiga qiraa'aatka, mana ogi qof u safray oo maray inta uu sheekhan maray oo uu culuma la kulmay.

Imaamu ibnu casaarkir iyo hanka sare.

Kanna waa Imaamu ibnu casaakir taariikhyahankii adduunka dhan, wuxuu qoray kitaabkiisa uu u bixiyay (Taariikhu Dimishiq) waana 80 mujalad .

Sheekadii afartii moxamadyo.

Afar imaam oo la yiraahdo maxamadyaashii, waayo afartoodaba waa afar maxamed oo kala ah (Maxamed Ibnu Jariir Dabari, Maxamed Bin Khuzaymah, Maxamed Bin Nasri Wal-Marwazii, Maxamed Bin Haaruun Al-Ruyaani), afartan imaam waxay joogeen wadanka Masar iyagoo arday ah, sahaydii iyo cuntadii ayaa ka dhamaatay ilaa ay aad iyo aad ugaajoodeen, habeen habeenada ka mid ah ayay isku yimaadeen oo isdhaheen aynu u qori tuurano midka inoo doonaaya cunta aan gaajada iskaga bi'ino, markii ay qori tuurteen ayaa qori tuurkii ku soobaxay Imaamu Maxamed bin khuzaymah, markaas ayu yiri bal fursad halaysiiyo aan salaatu xaajo tukadee , intuu salaada

ku jiray ayaa albaabka lasoo garaacay markii ay ka fureen mise waa nin uu soo diray boqorkii markaas katalinaayay Masar oo la oran jiray (Axmed bin duuluun) ninkan uu soo diray boqorku wuxuu yiri markii albaabka laga furay, maynu ku jiraa Maxamed bin nasri wal-maarwazi ? markaas ayay dheheen haa waakan, markaas ayuu u dhiibay kiis lacag ku jirto, kadib ayuu yiri :- Maxamed Bin Jariir mayni ku jiraa ? markaas ayay dhaheen haa waa kan, markaas ayuu u dhiibay kiis lacag ku jirto, kadib ayuu yiri :- Maxamed Bin Haaruun mayni ku jiraa ? markaas ayay dheheen haa waakan, markaas ayuu isagana kiis lacag ku jirto farta kasaaray, kadib ayuu yiri :- Maxamed Bin Khuzaymah mayni ku jiraa ? markaas ayay dhaheen haa waa kaas tukanaaya , markaas ayuu sugay markuu salaada dhamaystayna kiis lacag ah ayuu farta kasaaray, markuu lacagtii wada siiyay ayuu ku yiri :- boqorkoo shalay duhurkii qayluul sanaaya ayaa wuxuu ku riyaaday qof u yimi oo ku leh, maxamdyo aad iyo aad ayay u gaajoodeen waxay cunaana mahaystaan ee cunto iyo lacag lagaar, wuxuuna idinku yiri isagoo idin dhaarinaaya inaad u soo sheegtaan marka lacagtu ini ka go'do oo idinka dhamaato.

Astaanta 4aad

Qofka hanka sare waxaa lagu yaqaanaa inuu yahay qof ka faa'iidaysta noloshiisa isla markaasna maal gashada waqtigiisa .

Wuxuu leeyahay Imaamu cuqayli alxanbali, "lagama yaabo in aan dayaco daqiiqad ka mid ah waqtigayga, marka carrabkaygu hadli waayo, indhahaygu wax arki waayaan, maskaxdayda ayaan ka shaqaysinayaa anigoo jiifa furaashka".

Sheekh shariif Abdinuur iyo hanka sare.

Maalin ayaan waxaan la kulmay sheekh ka yimi wadanka sacuudiga, markaas ayaan waydiiyay oo ku iri :- sheekh shariif cabdi nuur iiga waran xaaladiisa ? xanuunkii seeka noqday hadda ? wuxuu igu yiri, socod ahaan guriga ma dhaafi karo, hadalkana hal daqiiqo oo xiriir ah ma wadi karo, markuu sookoco wuxuu ku bilaabaa inuu soo qabsado kitaab oo akhristo, bal walaalayaal ila fiiriya sheekh shariif cabdi nuur waxa haya xanuun socodka u diiday, hadalka u diiday, saasoo ay tahay kama tagin akhriska iyo cilmi kororsiga !!!, taasna waa astaanta lagu yaqaan dadka himilada sareysa leh.

Imaamu nawaawi.

Imaamu Nawaawi waxaa la yiraahdaa inuu maalin kasta qaadan jirey 12 dersi, inuu habeenkii wax yar ka seexan jirey ilaa la yiri " laba sano oo xiriir ah dhiniciisa dhulka ma dhigin " markii hurdo qabato indhaha ayuu biya qabaw iska marin jiray si ay hurdadu uga ba'do, markii uu faynuusku kadamo qalinka uu wax ku qoraayo ayaa u iftiimi jirey, waxaa layiri hal mar ayuu wax cuni jiray habeenkii iyo maalinba, waayo xili uu cunto badan ku cuno mahaysto hawsha u taala ayaa ka badan, wuxuu rabaa inuu muslimiinta uga tago kutubo ay berrito intifaacsadaan oo cilimiga ka bartaan, waxaa la yiraahdaa afar boqol oo jeer ayuu akhristay kitaabka loo yaqaan (Alwasiid) , wuxuu dhintay isagoo jira 45 sano, oo noqday Imaam ka mid ah culumada islaamka kuwa ugu waa weyn, kutubta uu qoray aad ayay u badan yihiin, waxaas oo dhan wuxuu ku gaaray noloshiisa iyo waqtigiisa ayuu ka faa'iidaystay.

Taabiciga la yiraahdo Caamir Bin Cabdi qaysi ayaa maalin maalmaha ka mid ah nin ku yiri:- in aan kula hadlaan rabaa !! markaas ayuu ku yiri " qoraxda jooji oo istaaji intaad ila hadlayso ", waayo waqtigu waa socdaa daqiiqadii taktaana masoo noqonayso inaad waqtigaaga khasaarisana khasaaro ka weyn majirto, waqtigana wax badal ka noqon karaa majiro.

Imaamu yaxya ibnu maciin.

Imaamka la yiraahdo Yaxya ibnu Maciin wuxuu ku dhashay magaalada Baqdaad, wuxuu ka mid ahaa culumada aadka ugu xeel dheer cilmiga xadiiska (cilmiga lagu kala garto xadiiska saxiixa ah iyo mida aan saxiixa ahayn, midka nabiga ka sugnaaday iyo midka aan ka sugnaan ee lagu been Abuurtay), wuxuu gaaray heer la yiraahdo " xadiiska uusan Yaxya aqoon xadiis maahan, haddii aad aragto nin neceb Yaxya ogaw ninkaasi waa beenaale Alle ka furtay oo ah kuwa Nabiga axaadiista beenta ah ku been Abuurta", wuxuu wax ka bartay intuu ardayga ahaa culuma waa wayn oo ay ka mid yihiin, Cabdullaahi bin mubaarak, Cabdirisaaq alsancaani, isagana waxaa wax ka bartay culumada islaamka kuwa ugu waa wayn sida imaamu Bukhaari, Imaamu muslim, imaamu Axmed bin xanbal.

Wuxuu yiri Yaxya :- Gacantayda waxaan ku qoray hal malyan oo xadiis, xadiiskana haddii aanan konton jeer qorin maba isku haysto in aan aqaano !!!.

Waxaa la yiri Yaxya wuxuu aabihiis ka dhaxlay lacag aad u fara badan oo gaaraysa hal malyan oo dirham, lacagtii oo dhan wuxuu ku bixiyay cilmiga barasahdiisa.

Maalin ayaa waxaa wada kulmay laba imaam oo lakala yiraahdo (Imaamu Xammaad bin salamah iyo Imaamu sufyaan alsawri) markaas ayaa imaam Xammaad ku yiri Imaamu sufyaan ii yeeri oo ii qor xadiiskaa ka maqashay

abii shucaraa abii shucraana uu aabihiis ka maqlay, markii uu xadiiska ka qortay ayuu Xammaad salaamay oo mucaanaqeeyay (shaf isgelin) oo is waraysteen, markaas ayaa sufyaan alsawri ku yiri :- xammaadow maxaad markii hore ii salaami weyday inta aadan xadiiska iga qoran ? markaan ayuu yiri Xammaad :- waxaan ka baqay in aan dhinto inta aanan kaa maqal xadiiska oo aanan kaa qoran .

Akhristaha qiima badanoow waxaad ila dareemaysaa sida ay culumadeenii waqtigooda ugu dadaali jireen, waxaad arkaysaa inaysan daqiiqad beer darayn jirin, khasaaraha ugu wayna waxay u arkeen inay tahay waqtigooda oo macna daro kaga lumo, soo inaan ku dayano maahan sidaas oo kale waqtigeena uga faa'iidaysano ?

Imaamu maxamed bin sheybaani.

Imaamka la yiraahdo Maxamed bin xasan alshaybaani waqtigiisa wuxuu u qaybiyay sadex qaybood oo kala ah xili uu seexanaayo , xili uu tukanaayo oo cibaadaysanaayo , xili uu waxbaranaayo, waxaa la yiraahdaa dadaalka uu waxbarashada iyo cilmiga ku dadaalaayo waxay ka gaartay inuu waayo waqti xattaa uu dharkiisa ku dhaaqdo isagoo ahaa nin aad u xarago badan, waxaa la yiraahdaa habeenkii wax yar ayuu ka seexan jiray markii la waydiiyay oo lagu yiri maxaa u seexan wayday ? wuxuu ku jawaabi jirey sidee u seexdaa iyadoo ummada dhan isugayso, dadkii waa seexdeen waxayna isku haleeyeen aniga oo waxay is dhaheen wixii aad

diinta uga baahataan Maxamed Bin Xasan ayaan waydiinaynaa.

Hore ayaa waxaa loo yiri " nin lagu seexdow ha seexan " nin dadka oo dhan sugayaan ma hurdaa u muuqata ? nin ummadiisu isku halaynayso miyaa hurdo qabataa ? nin dadku fiirsanayaan oo tusaale u ah miyaa siduurabo iskaga seexda ?.

Imaamu maxamed bin salaam albiikandii.

Imaamka layiraahdo Maxamed bin salaam albiikandii wuxuun ahaa sheekhii imaamu bukhaari, ayaa maalin isagoo fadhiya gole cilmiga lagu yeersanaayo ayaa waxaa ka jabay qalinkiisii, markaas ayuu dhawaaqay oo yiri " yaa hal diinaar qalin igaga iibsanaaya " markaas ayaa dad badan qalimadoodii kusoo tuureen iyagoo ka rajaqaba inay hal qalin ku helaan hal Diinaar !!! hadde halka diinaar wuxuu u dhigmaa hal Garaam oo dahab ah .

Imaamkan wuxuu yiri isagoo naftiisa ka sheekaynaaya :- 400 oo sheekh ayaan xadiiska ka bartay, cilmiga dalabkiisana waxaan ku bixiyay 40 kun oo diinaar, fidintiisa iyo gaarsiinta ummadana waxaan ku bixiyay 40 kun diinaar, waxaan xifdisanahay shankun oo xadiis.

Allaahu akbar bal ila fiirsha imaankan hanka ku jira iyo sida uu cilmiga raadintiisa iyo baridiisaba ugu hagarbaxay !!!.

Marka aad waqtiga qiimihiisa dareento wax kasta rakhiis ayay kula noqonayaan aan ka ahayn waqtigaaga iyo ka faa"daysigiisa .

Imaamu ibnu xaatim.

Imaamka la yiraahdo Ibnu abii xaatim, ayaa waxaa la waydiiyay waxaas oo cilmi ah sidee aabbahaa uga dhaxashay ? markaas ayuu yiri :- markuu cuntada cunaayo waan soo akfariistaa oo ka yeersadaa cilmiga, markuu soconaayo waan la socdaa oo ka yeersanayaa cilmiga, markuu musqusha ku jiro codka kor ayaan u qaadayaa si uu ii maqlo oo hadhaw iiga saxo khaladka.

Bal ila fiirsha wiilkan hanka ku jira iyo sida uu waqtigiisa uga faa'iidaysanaayo, ma ogola inay daqiiqad dhaafto, kuma tala gelin inuu waqtigiisa ku lumiyo madadaalo aan qiima lahayn , madadaaladiisu waa inuu wax akhrisanaayo ama wax qoraayo .

Imaamu bukhaari.

Imaamu bukhaari markii da'diisu maraysay 15 sano, wuxuu xifdisanaa70 kun oo xadiis, markuu maraayay 16 sano wuxuu xifdiyay kutubtii Cabdullaahi ibnu mubaarak iyo Imaamu wakiic ibnu jarraax, isagoo maalin fadhiya darsi uu bixinaayo imaamkii waynaa ee la oran jiray Isxaaq bin raahawayhi ayaa imaamku wuxuu yiri isagoo hadalka u jeedinaaya ardaydiisa " haddii aad halkitaab ku ururin lahaydeen axaadiista Nabiga ee saxiixa ah " , ereyadii imaamka ayaa waxay si toos ah ugu dhaceen dhigihii Bukhaari, markaas ayuu naftiisa ku yiri " Maxaad u noqon wayday qofka u istaagaaya muhiimadaas wayniga badan oo aad u noqon wayday qofka axaadiista Nabigaρ ee saxiixa ah halkitaab ku soo ururiya".

Bukhaari waa ogaa in lagarabo qofka u istaagaaya muhiimadaan inuu adduunka daafihiisa safar kuwada tago, waayo axaadistii halmeel kumawada ursana sheekhba inbuu hayaa oo yaqaan, waxaa lagarabaa inuu isku maro Makka, Madiina, Shaam, Masar, Baqdaad, Basra iyo magaalooyinka la mid ah ee culumadu fadhiyaan.

Maadaama uu bukhaari han sare lahaa arintii wuu ubabac dhigay dhabarkuuna u tuurtay, wuxuuna ku talagalay inuu ka salgaaro, waliba waxaa sii dhiiri geliyay riya uu ku riyooday oo ahayd" isagoo hurda ayuu wuxuu ku riyooday isagoo Nabiga ρ ku babinaaya marwaxad kagana celinaaya cayayaanka iyo wax kasta oo dhibaaya", riyadii ayuu

waydiiyay dadka fasira riyooyinka markaas ayay waxay ku fasireen in bukhaari Nabiga ρ ka difaacaayo oo ka celinaayo in lagu been Abuurto oo laga wariyo axaadiis uusan dhihin.

Bukhaari isagoo jira 16 sano ayuu safarkiisii ugu horeeyay galay wuxuuna aaday magaalada barakaysan ee Makka isagoo raacay hooyadiis iyo walaalkiis ka wayn, markii ay xajka guteen bukhaari masoo noqon wuxuu ku haray Makka si uu culumada joogta cilmiga uga barto, muda kadib wuxuu soo aaday magaalada Madiina ee Nabigu ρ ku aasan yahay, halkaas ayuuna kitaabkiisii kowaad ku alifay oo ku qoray isagoo da'diisu marayso 18 sano, wuxuu leeyahay isagoo ka sheekaynaaya noloshiisa " markaan kitaabka taariikhda qoraayay waxaan qoray anigoo fadhiya Nabiga ρ qabrigiisa iyo rawdal-shariifah inta u dhaxaysa, maadaama aanan haysan iftiin waxaan ku qori jiray dayaxa iftiinkiisa !!! , kitaabkan wuxuu bukhaari ku qoray madiina wuxuu taariikhdooda kaga sheekeeyay in ka badan 40 kun oo qof taariikhdood, wuxuuna yiri :- Markii aan qof tarjumadiisa iyo taariikhdiisa bilaabaayo laba rakco ayaan tukadaa oo sunna ah .

Waxaa is waydiin leh intee racko tukaday Imaamu bukhaari intuu kitaabkan qoraayay ? intee habeen u soo jeeday si uu dayaxa

iftiinkiisa uga faa'iidaysto ? intee hurda la'aan ku dhacday ? .

Markuu muhiimadiisa iyo dantiisii magaalada Madiina uu ka dhamaystay wuxuu aaday magaalada Basra ee ku taal wadanka Ciraaq, markuu soo galay bukhaari magaalada Basra wuxuu arkay inay magac wanaagiisu kasoo hormaray, wuxuu leeyahay bukhaari :- Markaan soogalay Basra ayaan waxaan u tagay imaamkii waynaa ee la oran jiray (Imaamu Maxamed bin bashaar) markaasuu igu yiri :- Halkee u dhalatay ? markaas ayaan ku iri, magaalada bukhaara, markaas ayaa wuxuu igu yiri :- Iiga waran Abuu cabdullaahi albukhaari ? markaas ayaan aamusay goortaas ayaa asxaabtiisii ku dhaheen " yaa Imaam waa Abuu cabdullaahi albukhaari " !!!, markaas ayuu gacanta iqabtay oo igu yiri :- soo dhowoow wiilkii aan mudada badan ku faani jirnayoow!!!.

Adeegihiisii ayaa maalin waydiiyay bukhaari oo ku yiri :- ma jirtaa dawo qofku isticmaalaayo si xifdigu ugu fududaado ? markaas ayaa bukhaari ku yiri :- magaranaayo daawo uga nafac badan dhanka xifdiga laba shay oo kala ah (hanka qofka iyo akhriska badan). Mashaa allaah imaamu bukhaari waa inoo sheegay daawada xifdiga waxayna tahay in qofku yeesho han sare akhriskana badiyaa, labadaas shey qofkii sameeyaa meel wayn ayuu cilmiga kagaarayaa.

Imaamu bukhaari oo ka sheekaynaaya sidii uu u qoray kitaabkiisa (saxiixul bukhaari) wuxuu yiri :- 1080 kun oo qof ayaan axaadiista kasoo qoray, qofka markaan ka qoraayo xadiiska waxaan waydiinayay magiciisa, kunyadiisa , naanaystiisa iyo sida uu xadiiskan ku soogaaray, kitaabkan axaadiista aan ku qoray waxaan kasoo xulay ilaa 600 kun oo xadiis waxaana qoraayay 16 sano.

Markuu dhameeyay qorida kitaabka wuxuu u bandhigay culumadii waa waynayd ee markaas joogtay Sida Imaamu Axmed Bin Xanbal, Imaamu Yaxya Ibnu Maciin, Imaamu Cali Ibnul-Madiini, markuu u soo bandhigayna way u bogeen oo la dhaceen waxayna uga markhaanti kaceen in axaadiista ku qoran aytahay saxiix marka lagareebo afar axaadiis, afarta axaadiisna hadii lasii dabagalay waxaa cadaatay inay saxiix yihiin.

Imaamu bukhaari kuma ekayn inuu qoro kitaabkiisa ee wuxuu ku daray inuu faafiyo oo ummada gaarsiiyo, waxaa la yiraahdaa waxaa ka bartay bukhaari kitaabkiisa aryday gaaraysa ilaa 90 kun oo arday oo ka kala yimi adduunka daafihiisa.

Imaamu bukhaari hankiisu aad iyo aad ayuu u sareeyay, naftiisa wuxuu u huray inuu xifdiyo axaadiista Nabiga ρ isla markaasna uu ka ilaaliyo in axaadiis been ah lagu daro axaadiista saxiixa ah.

Maadaama ay bukhaari u cadayd yoolka iyo hadafka uu hiigsanaayo, waxaa u suurtagashay inuu waqtigiisa sifiican uga faa'iidaysto, isagoo naftiisa ka sheekaynaaya wuxuu yiri :- waxaan xifdisanahay boqol kun oo xadiis oo saxiix ah iyo laba boqol oo kun oo aan saxiix ahayn (daciif ah), intaas waxaa u dheerayd inuu yaqaanay qof kasta oo ku jira silsilada xadiiska, wuxuu yaqaanaa meeshuu u dhashay, meeshuu wax ku bartay, inuu run law yahay iyo in kale, inuu xifdigiisu fiican yahay iyo inuu liito.

Bukhaari wuxuu ku tilmaamnaa inuu yahay nin hadal kiisu yaryahay, dadku waxay haystaan ee adduunyo ah aan u hanqal taagin, dadka ceebahooda aan isku mashquulin, wuxuu waqtiga ku bixin jiray sidii cilmiga xadiiska meel weyn uga gaari lahaa, wuxuu ahaa nin xalaal meerato ah.

Bukhaari taariikhdiisa halkaan kuma tala gelin in aan ku soo koobo, laakiin waxaan ugu talagalay in aan ka qaadano qeyb ka mid ah hankiisii sare iyo siduu waqtigiisa uga faa'iidaysan jiray.

Imaamu saclab alnaxwi.

Imaamkii caanka ahaa ee la oran jiray (saclaba alnaxwii) waxaa la yiraahdaa maalin jimca ah ayuu masaajidka kasoo baxay isagoo ay la socdaan koox ka mid ah ardaydiisii , Imaamku wuxuu gacanta kuwataa kitaab uu akhrisanaayo isagoo soconaaya, Imaamkii wuxuu ku mashquulay akhrintii kitaabka, isagoo marka akhrinaaya oo kitaabka u jeeda ayuu

wuxuu ku dhacay god kadibna dhaawac halis ah ayaa madaxa ka gaaray, sababtaas buuna ku dhintay.

Waxaa kaloo lasoo wariyaa in haddii qof u yeero ama uu casumaad u sameeyo inuu ku dhihi jiray " waan imanayaa haddii boos aan wax ku qorto lay banaynaayo".

Bal akhristaha qiimaha badanoow, intee waqti inakaga luma inagoo wax sugaynaa ? intee meel taagnaanaa ama fariisanaa inagoo hawl sugayna ? goorma ayaynu gaarayna inaynu kitaaba gacanta kuqaadano oo bilawno in aan akhrisano xiligii aan firaaqo u helnaba ?? .

Imaamu ibnu jariir aldabari.

Bal ila akhriso sheekada Imaamu Maxamed bin jariir, waxaa la yiraahdaa imaamka ayaa maalin ardaydiisii ku yiri waxaan rabaa inaan idiin yeeriyo oo aad qortaan tafsiirka qur'aanka, markaas ayay ku dhaheen intee bog ayuu noqonayaa tafsiirkaa yeerinayso ? wuxuu ku yiri :- sodonkun oo warqadood !!, markaas ayay ku dhaheen, kaas intaa naan dhamayn ayaaba cumriganagu dhamanayaa, markaas ayaa

imaamkii ku soo koobay tafsiirkiisii sadex kun oo warqadood wuxuuna waday yeerintiisa ilaa todoba sano.

Maalin kale ayuu jeclaystay inuu taariikhda aduunk qoro, markaas ayuu ku yiri ardaydiisii :- waxaan rabaa inaan idiin yeeriyo ee qora, markaas ayay dhaheen intee bog ayuu noqonayaa ? markaas ayuu u sheegay intii tafsirak in le'eg iyaguna waxay ugu jawaabeen sidii aya tafsiirak ugu jawaabeen, markaas ayuu yiri " himmadii waa dhimatay ", ugu danbayntii taariikhdii ayuu u yeeriyay isagoo ku soo koobay ilaa sadex kun oo xaanshiyood.

Waxaa la yirahadaa Imaamu maxamed bin jariir inuu afartan sano gudahood uu qoraayay maalin kasta afartan warqadood (40 warqadood) .

Haddii laysku geeyo inta uu qoray imaamkan waxay noqonaysaa (358 kun oo warqadood), imaamkuna wuxuu dhashay taariikhdu markay ahayd (224 hijriga wuxuuna geeriyooday 310 hijriga) da'diisu waxay gaartay 86 sano.

Haddii aynu marka dhahno cumrigii uu noolaa iyo inta uu wax qoray halaysku qaybiyo waxaa inoo soo baxaysa inuu maalin walba qori jiray 14 warqadood, marka laga reebo 14 sanoo oo uu yaraa .

Akhristaha qiimaha badanoow imaamkan wuxuu kutub qoray wax lasoo koobi karo maahan, wuxuuna noqday imaamka looga dammeeyo cilmiga tafsiirka qur'aanka,

ummada dhaxal weyn oo kuwada filnaaday ayuu uga tagay oo cilmi ah, waxaana ogaataa in xiligiisii aysan jirin adeegan aad maanta haysato ee wax kasta kuu sahlan yihiin, iftiin iyo qalab casri ah mahaysan, qalimo iyo waraaqo casri ah mahaysan, cumputer mahaysan, inaguna inagoo waxaas oo dhan haysana hadana waxaan ka wahsanaynaa in aan samayno sidii imaamkaas oo kale oo aan ka tagno dhaxal gaaraya adduunka dhan .

Imaamu Baqawi.

Imaamka la yiraahdo :- Abuu qaasim albaqawii ayaa waxaa ka sheekaynaaya arday ka mid ah ardaydiisii wuxuuna yiri, anigoo imaamka la jooga oo uu barkaday lugtayda anna aan ku dul akhrinaayo dersi muda markaan waday akhrintii ayaan ku iri imaamka :- intee kugu dul akhriyay yaa imaam ? markuu ii jawaabi waayay ayaan fiiriyo oo dhaqdhaqaajiyay mise naftiiba waa ka baxday !!!!.

Allaahu akbar, asxaabta qiimaha badan ila fiirsha hanka ku jiray culumadeenii hore ee diinta ina so gaarsiisay, bal is barbar dhiga himmadeena iyo himmadoodii ? bal fiiriya meesha aan kala joogno ? .

Astaanta 5aad

Bulshadiisa ayuu wax ka badalaa

Waxaa lagu yaqaanaa qofka hanka sare leh inuu yahay mid isku daya inuu nolosha bulshadiisa wax ka badalo, hormarna u horseedo.

Laakiin qofku goorma ayuu wadankiisa wax ka badali karaa oo uu hormar u horseedi karaa ?

Sheekadan ila dhuux iyadaa jawaab u noqonaysaa su'aashaas

Waxaa jiray wiil dhallin yaro ah markuu gaaray 20 sano ayuu wuxuu ku talagalay inuu hadafkiisu noqdo sidii uu adduunka dhan wax uga badalilahaa, 10 sano kadib wuxuu arkay inuusan adduunka waxba ka badali karin wax lataaban karona ku soo kor dhin karin, wuxuu go'aansaday inuu wadankiisa wax ka badalo oo uu hormar u horseedo, 10 sano kadib wuxuu arkay inuusan dalkiisa waxba u qaban karin hormarna u horseedi karin, kadib wuxuu go'aansaday inuu magaaladuu degan yahay inuu wax ka badalo, 10 sano kadib wuxuu arkay inuusan waxba ka badali karin xaafadiisa, kadib wuxuu go'aansaday inuu xaafada uu degan yahay wax ka badalo laakiin 10 sano

kadib waxaa u soo baxday inuusan waxba ka badali karin, kadib wuxuu go'aansaday inuu qoyskiisa iyo caruurtiisaba wax ka badalo laakiin 10 sano kadib waxaa usoo baxday inuusan waxba ka badali karin caruurtiisuna aysan diyaar u ahayn inay qaataan fikradihiisa, markii uu gogosha geerida jiifsaday ayuu go'aaday inuu wax ka bilaabay meel uusan wax ka bilaabin qof raba inuu dalkiisa wax kabadalo, waxaa usoo baxday inay ku haboonayd inuu naftiisa ka bilaabo, reerkiisa ku xejiyo, xaafadiisa ku xejiyo, magaaladiisa, dalkiisa, adduunka .....

Maxaan ka faa'iidnay sheekadaan ?

- Haddii aad rabto inaad adduunkan wax ka badasho waxna aad ku soo kor dhiso fadlan marka hore naftaada ka bilaw.
- Haddii aad rabto inaad qayrkaa saamayn ku yeelato fiican noloshoodana aad rabto inaad wax ka badasho fadlan marka hore baro sidii aad naftaada aad wax uga badalilahayd una fahmilahayd.
- Haddii aad rabto inaad ka mid noqoto dadka nolshaan adduunyo guul wayn ka gaaray fadlan marka hore fiiri oo dhuux ficilada aysameeyaan dadkaas guulaystay (Naajixiinta ah).
- Ogaw guul darradu waa shay ku dhex jira nafta dadka caajislooyaasha ah ee aan ku haminayn inay helaan ayaan fiican iyo isbadal wax ku ool ah .

Hadaba ila dhuux sheekooyinkan soo socda ee ka hadlaaya, dad noloshooda, dalkooda iyo adduunkaba wax ka badalay.

Taariikhda Urrurka gobanimodoonka Somaliyeed ee SYL

SYL sidee ku aasaasantey ?

Horaantii sanadkii 1943-kii ayaa waxaa sheekaystey C/qaadir Sheekh Sakhaawadiin iyo Yaasiin Xaaji Cusmaan Sharmarke oo rag saaxiibo ah oo si weyn isugu xirnaa, islana socon jirey mar kasta, waxay kawada hadleen sidii ummada Soomaaliyeed uga bixi laheyd nidaamkii guumaysiga.

Labadaas nin ee dhallinyarada ahaa waxay midba uu jirey 24 iyo 26 sano waxay mudo ka sheekaysanayeen sidii bal gumaystaha looga xoroobi lahaa, waxaana C/qadir Sheekh Sakhaawadiin uu soo jeediyey fikir ahaa in la aasaaso xisbi Islaami ah oo dadka mideeya, isla markaana ka saara gumaysiga, laakin Yaasin Xaaji Cismaan ayaa wuxuu soo jeediyey fikir kale oo ahaa in xisbiga laga dhigo mid siyaasi ah oo shacabka oo dhan matala.

Ka dib wadahaladii labada nin ee dhallinyarada ah waxaa ku soo biirey dhallinyaro kale waxaana la isku raacay in la dhiso golle ama naadi dhallinyaro oo ay isku bartaan dhallinyarada, islamarkaana dhallinyaradu wax

isku baraan, iyadoo la baranayo Luuqada Ingiriiska oo xiligaasi aheyd mid ku cusbeyd gobolada Koonfureed. Kulankaasi dhallinyaradu waxay isla garteen in la dhiso golle dhallinyaro inta laga gaarayo waqti ku haboon in la dhiso xisbi siyaasi ah, waxaana la dhisey golaha dhallinyarada Soomaaliyeed SYC (Somali Youth Club), waxaana xiligaasi ay aheyd 15-kii May 1943-kii. Kulankii ugu dambeeyay ee ay yeesheen aasaasayaasha xisbigaas waxay isku raaceen 3 Qodob oo kala ah:-

* In xukuumadda Ingriiska ee dalka heysata loo qoro codsi ay ku doonayaa in ay furtaan Naadi la yiraahdo SYC (Somali Youth Club) oo dhallinyarada ku kulanto.
* In la kireeyo Guri u qalma howlaha dhallinyarada ee lagama maarmaanka u ah soona jiidan kara dhallinyarada.
* In la dejiyo barnaamij ku meel gaar ah oo dabooli kara qorshaha shaqo ee loo baahanyahay lagama-maarmaana u ah howlaha dhaliyarada.

Markii ay qoreen codsigii ayay 13 kii dhallinyaro waxay tageen xafiiskii xaakimkii isticmaarka ee Ingriiska u fadhiyay Muqdisho waxayna u gudbiyeen codsigoodii, iyagoo qaar ka mid ah dhallintaas ay qabeen in fekerkooda guuleysan doono halka qaarna ay qabeen

in ay xarig muteysan doonaan iskaba daa in codsigoodu u hirgalo,laakiin wuxuu ugu jawaabay oraahdii caanka baxday ee aheyd:-

"Waxaad ka koobantihiin dhallinyardiina qabiilo kala duwan waxaana hubaal ah inaydaan kuwa hishiin Karin feker iyo ra'yi toona, aniga waxaan idiin arkaa dhurwaayo iyo ari xero lagu wada xareeyay, sideed naadi ugu hishiin kartaan khilaaf la'aan.."

Hase yeeshee, dhallintii 13ka aheyd oo aan hadal kulul ku celin karin madaxa mustacmaradda ayaa ugu jawaabay "Hadalkaaga waxaan ka dhiganeynaa cashar aan ka faa'iideysano,waxaana barbaarin doonnaa Dhurwaayada, si aysan ariga u cunin,mana fogaan doonto in aad aragto anagoo ku wada nool Naadiga oo aan wax muran iyo khilaaf uusan ka dhex jirin".

Maalmo ayay jawaab ka sugayeen ka dibna waxaa la soo gaarsiiyay warqad lagu xusay in Ingriisku uu hadda ku jiro dagaal uusanna u baahneyn in siyaasadda la farageliyo, balse loo ogolaaday in ay furtaan naadi dhallinta ay ku kulmaan waxna ku bartaan.

Kulankii ugu horeeyayba waxay iska dhex doorteen madaxdii hoggamin laheyd naadiga C/qaadir Sheekh Sakhaawadiin ayay guddoomiye u doorteen halka Xaaji

Maxamed Xuseen iyo Maxamed Xirsi Nuur(Siidii) loo doortay ku xigeeno iyadoo Yaasiin Xaaji Cusmaana loo doortay Xoghaye.

Xisbiga oo ujeedadiisa fog ay aheyd ka xoreynta dalka gumeystaha ku soo duulay ayaa wuxuu ka dhigtay talabadiisii ugu horeysay ee uu qaado la dagaalanka qabyaaladaa iyo midab kala sooca.

Laga soo bilaabo sanadkii 1943-kii waxaa Xisbiga SYL laga furay gobollada dalka Soomaaliya oo idil, waxaana sii kordhay taageerada uu helayo taasi oo aheyd mid ay u dhan yihiin Ummada Soomaaliyeed sida qaybaha Odayaasha, Culima'udiinka, dhallinyarada, Haweenka, & Ganacsatada.

Bishii Maayo 1947 ayaa waxaa la go'aansaday in isbeddel lagu sameeyo magaca Xisbiga, lana muujiyo awoodiisa, sababahaan soo socda awgood:

1. Xisbiga oo xidideeystey oo shacabka dhexdiisa ka kasbaday kalsooni aan la loodin Karin.
2. Damaca gumeeystayaasha Ingiriiska oo ka dhawaajiyey inuu rabo in Soomaaliya oo idil loo dhiibo iyo Talyaaniga oo u xusulduubayey in la soo celiyo maamulkiisii.
3. Axsaab Soomaali ah oo ku saleeysan hab qabiil,

gacansaarna la leh quwadaha shisheeyaha oo Xisbiga laga horkeenay.

Goor dambe oo xisbigii uu meel fiican gaarsiiyey halgankiisii gobanimo doonka ayaa waxaa geeriyoodey xoghayihii xisbiga Yaasin Xaaji Cusmaan Sharma'arke waxaana uu ku dardaarmey in jagadiisii loo magacaabo Halgame Cabdulaahi Ciise Max'uud oo xiligaasi ahaa wakiilkii SYL ee magaalada Baladweyne. halkaasi ayaa laga soo wadey Cabdulaahi Ciise waxaana uu qabtey jagada xoghayaha guud ee SYL, isagoo hayey xilkaasi ilaa iyo ay SYL ay keentey guusha xoriyada ummada Soomaaliyeed, waxaana Cabdulaahi Ciise loo magacaabey Ra'isalwasaarihii xukuumada daakhilga aheyd ee Soomaaliya intii aan xoriyada si buuxda loo qaadan.

Dhaliyaradii aasaastay xisbiga SYC oo markii dambe isu beddelay SYL (Somali Youth Lego) waxay ahaayeen 13 dhallinyaro oo da'doodu aad u yareyd aqoontooduna aad u xaddidneyd. Waxaan halkaan idinku soo gudbineynaa magacyadooda iyo da'dooda iyo weliba sidii xubin nimada ay ugu kala horeeyeen:-

1. C/qaadir Sheekh Saqaawadiin. Waxa uu ku dhashay Degmada Tiyeeglow ee ka tirsan Gobolka Bakool sanadku markuu ahaa 1919kii. (xiligaasi wuxu jitey 24 sano.
2. Max'ed Xirsi Nuur (Siidii), waxa uu ku dhashay Magaalaa Mareeg oo ka tirsan Gobolka Galguduud sanadku markuu ahaa 1915kii, xiligaasi wuxuu jirey 28 sano.
3. Yaasiin Xaaji Cismaan Sharma'arke , waxa uu ku dhashay Degmada Hobyo oo ka tirsan Gobolka Mudug sanadkii 1917kii (xiligaasi wuxuu jirey 26 sano
4. Xaaji Maxamed Xuseen Max'ed waxa uu ku dhashay Muqdisho, Gobolka Banaadir sanadkii 1917kii (xiligaasi wuxuu jirey 26 sano)
5. Cismaan Geedi Raage, waxa uu ku dhashay Muqdisho, Gobolka Banaadir sanadkii 1925kii (xiligaasi wuxuu jirey 18 sano)
6. Dheere Xaaji Dheere. Waxa uu ku dhashay Muqdisho, Gobolka Banaadir sanadkii 1926kii Xiligaasi wuxuu jirey 17 sano
7. Daahir Xaaji Cusmaan. Waxa uu ku dhashay Degmada Hobyo ee Gobolka Mudug sanadkii 1925kii (xiligaasi wuxuu jirey 18 sano ah)

8. Cali Xasan Maslax waxa uu ku dhashay Degmada Hobyo ee Gobolka Mudug sanadkii 1927kii (xiligaasi wuxuu jirey 16 sano)
9. Maxamed Cali Nuur, waxa uu ku dhashay Degmada Shangaani oo ka tirsan Gobolka Banaadir, sanadkii 1927kii (xiligaas wuxuu jirey 16 sano)
10. Maxamed Faarax Hilowle waxa uu ku dhashay Mareeg oo ka tirsan Gobolka Galgaduud sanadkii 1925kii xiligaasi wuxuu jirey 18 sano.
11. Xaaji Maxamed C/llaahi (Xayeesi), Waxa uu ku dhashay Muqdisho, Gobolka Banaadir sanadkii 1918kii(xiligaasi wuxuu jirey 25 sano)
12. Huudoow Macallin Cabdulle waxa uu ku dhashay Mareerey oo ka tirsan Gobolka Sh/Hoose sanadkii 1926kii (xiligaasi wuxuu jirey 17 sano)
13. Maxamed Cusmaan Baarbe waxa uu ku dhashay Baardheere oo ka tirsan Gobolka Gedo sanadkii 1910kii(xiligaasi wuxuu jirey 33 sano)
Ururrka SYL wuxuu shaaca ka qaadey qorshihihiisii siyaasadeed waxaana uu sheegay inuu u taagan yahay xornimo gaarsiinta Ummada Soomaaliyeed, iyadoo xiligaasi Soomaaliya ay u qaybsaneyd 5 gobol oo gacanta ay ku hayeen gumaystayaashii reer Yurub.

SYL waxay shidey iftiin gobanimo doon ah waxaana hoosta ay ka xariiqdey in ummada Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogto inay hesho gobanimo taam ah, isla markaana la helaa Soomaali weyn.

Dhallinyaradaasi SYL waxaa xiligaas u suurtagashey in ay mideeyaan shacabka Soomaaliyeed si looga hor tago gumeysiga , iyaga oo aaminsanaa haddii la helo midnimo laga guuleysan doono gumeysiga isla markaana waxaa quluubtooddii ku weyneyd waddaniyadda oo ay wax walba ay ka hormarsiin jireen si ay u gaaraan ujeeddooyinkoodda ku xusnaa dastuurka xisbiga SYL oo ahayd in shacabka Soomaaliyeed la gaarsiyo xornimo dhamaystiran iyo in la helo Soomaali weyn.

Xisbigii SYL waxaa la soo gudboonaadey turaanturooyin badan iyo hagardaamooyin badan oo la doonayey in lagu wiiqo ujeedooyinkooda gobanimo doon, waxaana ay taasi kaga gudbeen isku duubni, hal adeyg, aqoon, iyo dadaal kasta oo ay ku gaari karaan inay ku mideeyaan shacabka Soomaaliyeed.

Inkastoo badi dadkii Soomaaliyeed ay xiligaasi si weyn ugu bisleyn qiimaha xornimada, laakin waxaa quluubtooda arintaasi ku shubey xisbigii SYL oo si weyn

ugu dadaalay in Soomaalida laga dhaadhiciyo qiimaha xornimada.

Intii uu socdey halgankii SYL ee ay hormoodka ka ahaayeen baadi goobta xornimada ummada Soomaaliyeed waxaa jirey dad tiro yar oo Soomaali ah oo la dhacsanaa ku hoos jirka heeryada guumaystaha, waxaana dadkaasi ay ku xirnaayeen nidaamkii guumaystaha Talyaaniga.

Dadkaasi guumaysi kalkaalka ahaa waxay qaarkood ku biireen xisbigii SYL si ay u kala dhantaalaan orodkii ama ruclihii loogu jirey xornimo gaarsiinta ummada Soomaaliyeed.

Cali Xuseen oo ahaa ninkii Xisbigii SYL u qaabilsanaa dhanka suugaanta wuxuu gabayadii uu tiriyey ku muujin jirey inay SYL ay ka mid yihiin dad doonaya in ay jilbaha qabtaan dadaalka xisbiga. waana halka uu abwaan Soomaaliyeed ka yiri "Baadida nin baa kula day dayi daalna kaa badane :: oo doonayn inaad hesho daa'in abidkaaye".

Sidoo kale Axmed Xaaji Suleymaan oo dhanka qoraalada u qaabilsanaa xisbiga ayaa mar uu ka hadley shir ay lahaayeen golihii xisbigii SYL wuxuu ku sheegay in

xisbiga ay ka mid yihiin dad diidan in xisbiga ku guuleysto ujeedooyinkiisa.

Si kastaba ha ahaatee waxaan shaki ku jirin in xisbigii SYL uu kaalinta ugu balaaran ku lahaa hanashadii xornimada ummada Soomaaliyeed ee la hantey sanadkii 1960-kii, inkastoo ujeedooyinkii dhallinyaradii 13-ka ahaa ee SYL aan wali la gaarin 50 sano ka dib, tiiyoo waliba ay meesha ku jirto in labadii gobol ee Koonfur iyo Waqooyi ee xornimada qaatey 1960-kii ay hada Goboladii waqooyi sheeganayaan inay yihiin dawlad madaxbanaan.

Halka gobolkii Koonfureed uu yahay mid ay la degeen dagaalo mudo 20 sano ka badan ka aloosnaa gobolada dalka, tiiyoo ay u sii dheer tahay in maanta ay halis ku jirto midnimadii guud ee gobolkaasi, maadama ay soo baxeen maamulo u muuqanaya kuwa aan u hiilineyn riyadii SYL.

Intaas ayay ku dhamaatay taariikdii koobnayd ee ururkii SYL, meela kala duwana waan kasoo xigtay kumana talagelin in aan dhamaan taariikhdoodii meesha ku qoro, laakiin waxaan rabaa in aan faa'iidooyin kala dhex baxno taariikhda halgamayaashaan .

Dhallin yaradii SYL soo ma'aysan ahayn kuwa wax weyn wadankooda u qabtay ? soo uma aysan horseedin wadankooda inuu xoriyad qaato ? so ma'aysan ahayn wiilal dhallin yaro ah oo wadaninimadu ku weyn tahay kuna talagalay inay wadankooda wax u qabtaan ? soo ma istaahilaan dhallinyaradaasi in ay tusaale u noqdaan dhallin yarada maanta joogta ? xaqii ay inoo soo dhiciyeen wiilashaasi soo ceeb maahan in aan maanta dayacno ama aynu ilaashan wayno ? soo ma quruxbadna inay dhallin yarada maanta joogtaa yagleelato ururSYL oo kale ah si ay wadankooda u hormariyaan ? akhristaha qiimaha badanoow wiilashan asaasay SYL soo ma'aysan noqon wiilal ka faa'idaysta hadalkii uu ku yiri gumaystuhu isagoo tilmaamaaya inay soomalidu yihiin dhurwaayo iyo Ari meel lays kugu keenay inay iscunaan maahane aan heshiin karin ? waxaan dhallin yarada maanta joogta aan ugu baaqayaa inay tusaale weyn ka dhigtaan dhallin yaradii SYL.

Sheekadii Takeo Awsahira.

Sheekadii Takeo Awsahira ee u dhashay wadanka japaan ahaana midkii japaan u horseeday horumarka ay maanta haysato :- Wuxuu yiri takeo dawladayda ayaa waxay ii dirtay in aan wax ka soo barto wadanka jarrmalka, gaar ahaan jaamacada layiraahdo (*University of Hamburg*), waxaana laydiray in aan soo barto makaaniknimada iyo sida matoorada loo sameeyo, jarmalka ayaan aaday anigoo xanbaarsan himmiladaydii ii gaarka ahayd, ee ku milantay jirkayga dhuuxana iga gashay ee aan har iyo habeen ku hamminaayay saan ku gaarilahaa, himmiladaas oo ahayd in aan sameeyo matoor !! .

Waxaan aqaanay inay farsama kasta ay leedahay shay sir ah oo farsamadaas u ah udub dhexaad (*Model Motors*), haddii aad barato sida moodeelkaas loosameeyo gacanta waxaad ku dhigtay sirta farsamadaas ay ku dhisan tahay.

Macallimiintii wax i baraysay meeshay iga barilahaayeen sida loo sameeyo matoorada, ayay waxay isiiyeen kutub badan oo igu dhaheen xifdi ilaa aan xifdiyay wixii ku qornaa walina aanan lahayn aqoon aan ku samayn karo matoor, waayo farsamo hadal laxifdiyo uma baahnee waxay u baahan tahay in gacanta wax lagaa baro oo lagu tababaro laguna tuso sida wax lays kugu rakibaayo oo lays kugu xiraayo.

Markii aan arko matoor shaqaynayaa wuxuu ilayahay sidii hal xiraale aan la furi karin, layma barin sida loo fur furo, sida

loo cabbiro bir kasta oo ku jirta matoorka, hadal uun ayaa lay baraa farsamo gacan layma baro.

Waxaan u hilawsanahay sidii aan ku gaarilahaa in aan matoorkaas gacantayda ku furfuro kuna xirxiro bir kastana aan u aqoon lahaa qaabka loo sameeyo looguna rakibo meesha ay ku jirto, saan ku baran lahaa bir kasta, bool kasta, silig kasta iyo shaqada ay qabanayaan, waxaan u hilawsanahay in aan matoorka habsiiyo sidii waalid ilmihiisii muda ka maqnaa oo kale, in aan is arko anigoo qaba dhar ay ka buuxdo olyo iyo naafto, gacmahaygana aan ku daliigo olyada matoorka, in aan gacmahayga iyo dharkaygaba ay kasoo carafto urka olyada.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaan waxaan arkay shirkad xayaysiinaysa oo rabta inay soo bandhigto matooro lagu sameeyay wadanka talyaaniga, markaas waxay ahayd bisha awalkeeda waxaana soo qaatay biilkii laysoo diray, shirkadii ayaan u tagay waxaana ku arkay matoor awoodiisu le'egtahay laba faras oo kale qiimihiisuna uu dhan yahay lacagta bisha laysoo diray ee aan haysto, waxaan is iri haddaad lacagta kugadato matoorka bishan waxaad cunto ma helaysid, hadadaan gadanina matoorka waligaa magaaraysid in aad ka salgaarto himmadada ah in aad matoor samayso, muda hadaan fikriray waxaa ila xoog badatay in aan gaajoodo oo matoorka iibsado, matoorkii ayaan iibsaday guriga ayaan u soo qaatay, markaan guriga u soo socday lugihii ayaa i cuslaaday farxad darteed waxaan aaminay in aan maanta

garabka kuwato wixii adduunka ugu qaalisanaa, saan u soo socday markaan soogaaray guriga ayaan matoorkii dhigay miis halkan yaala, markaas ayaan fariistay anigoo aaminsan in aan guriga soogashaday shaygii adduunka ugu qaalisanaa, marna matoorkaan fiiriyaa marna farxadaa igabadata oo aad ayaan u farxaa, naftayda ayaan ugu sheekaynayaa oo ku dhahayaa " matoorkan waa sirta ay ku hormareen reer yurub", " haddii aan sameeyo matoor waxaa hubaal ah in aan taariikhda iyo nolosha japaan wax weyn ka badali doono.

Waxaan naftayda ku iri matoorkan wuxu ka kooban yahay boolal, biro yaryar ah iyo kuwa waaweyn, sida loo rakibay waxay ku dhisan tahay aqoon iyo isku dheelitir, haddii marka aan ku guulaysto in aan fufuro isla markaasna aan markale rakibo oo uu shaqeeyo waa talaabo weyn oo aan horey u qaaday saan uga salgaaro sirta ay yurub ku hormartay.

Waxaan soo diyaarsaday waraaqo iyo qalimaan waxan bilaabay in aan guud ahaan sawiro matoorka, waxaan ku xejiyay in aan bir kasta iyo bool kastaba aan sawiro meesha uu ku jiro, sida ugu jiro iyo in aan tiro siiyo bir kasta iyo meesha ay ku jirto, dadaal dheer oo ay waheliso daal, rafaad, hurdo la'aan, waxaan ku guulaystay in aan furfuro matoorkii, waxaan guda galay in aan xirxiro oo rakibo matoorka, markaan dhameeyay rakibaadii iyo xirxiridii ayaan istaaray oo daaray, markaan maqlay codkii matoorka oo shidmay jirkayga dhan waxaa buuxiyay farxad, farxadii aan maalintaas farxay waxaan ku qiyaaso magaranaayo, furfurida iyo

xirxirada matoorka waxay igu qaadatay sadex maalmood oo aan hal mar wax cunaayay hurda aad u yar aan seexanaayay.

Gudoomiyihii ardayda japaanka ee wax ka barta wadanka jarmalka ayaan u tagay oo u sheegay in aan ku guulaystay in aan furfuro oo xirxiro matoor, markaas ayuu yiri, waa talaabo fiican, waxaan hayaa matoor kharaabsan waxaan rabaa inaad hagaajiso oo soosaarto cilada keentay inuu kharaabo oo aad ka dhigto matoorkan mid shaqaynaaya.

Toban maalmood oo aan nasniin lahayn ayay iga qaadatay in aan ogaado cilada matoorkan haysata, waxaan ogaaday inay jirto sadex birood oo gubtay isla markaasna dhamaaday, waxaan isku dayay in aan sadexdaas birood aan gacantayda ku sameeyo oo aanan kasoo gadan tukaanka, dadaal dheer kadib waxaa ii suurtagashay in aan sameeyo sadexdaas birood oo aan ku rakibo matoorka, markii aan ku xiray birihii matoorka oo aan daaray codkii matoorkana aan maqlay waxaan dareemay raaxo iyo farxad aad u weyn iyadoo waliba isagoo uu ihayo daal farabadan, gaajo, hurdo la'aan, waxaas oo dhan in aan u dulqaato waxaa ii sahlay shaqadaan hayo ayaa wax kasta igala weyn.

Markii uu ogaaday gudoomiyihii in aan ku guulaystay inaan hagaajiyay matoorkii kharaabsanaa, wuxuu igu yiri maanta waxaa lagaarabaa inaad adigu matoor gacantaada ku samayso.

Haddaba si ay iigu suurtagasho in aan sameeyo matoor, waxaan qaatay go'aan ah in aan ka shaqeeyo meelaha

geyrashyada eelagu hagajiyo matoorada, waxaan xirtay dhargii olyada badnaa ee ay xirtaan dadka ka sheqeeya gayrashyada, waxaan ku talagalay in aan noqdo shaqaale dhega nugul, karti badan, aan noogin, daal aqoon, shaqadiisa u heelan, iyado ay jirto in aan ka dhashay reer ahaan qoyska kataliya wadanka japaan, reer boqor ayaad tahay iima diidin in aan ka shaqeeyo garaash, reer boqor ayaad tahay iima diidin in aan meel kasta u maro sidii aan japaan u hormarin lahaa.

Shaqadaan waxay igu qaadatay sideed sano oo aan shaqaynaayo shan iyo toban saac, markii shaqadu dhamaatana waxaan ku dhihi jirey ninka meesha haysta waardiyaha igu qor mushaharna kaama rabo, waxaas oo dhan waxaan uga goleeyahay in aan habeenkii ku soo jeedo in aan u dhabagalo bir kasta sida ay u shaqayso iyo sida loosameeyo.

Boqorkii japaan katalinaayay ayaa maqlay sheekadayda, markaas ayuu lacag ii soo diray aan ku iibsado dhamaan qalabka lagasameeyo matoorada, qalabkii ayaan soo dhoofsaday waxaana la imi wadanka japaan, boqorkii ayaa codsaday in aan u imaado si uu ii arko qadasharafna iisiiyo, markaas ayaan ku iri ilaa aan toban matoor oo ay ku qorantahay japaan ayaa lagu sameeyay aan sameeyo, ma istaahilo in aan boqorka qaabilo ama qado sharaf laysameeyo.

Sagaal sano kadib waxaan ku guulaystay in aan sameeyo warshad lagu sameeyo matoorada, maalintii aan sameeyay toban matoor oo aan dusha kaga qoray " waxaa lagu sameeyay japaan" (made in japan), waxaan u qaaday oo geeyay matooradii guriga madaxtooyada , markii ladaaray matooradii ayaa waxaa soo galay boqorkii isagoo dhoolacadaynaaya markaas ayuu yiri " codkii ugu macaanaa ayaan maanta maqlayaa, matooro japaan lagu sameeyay ayaan codkooda maqlayaa" .

Markii aan indhahayga ku arkay in aan sirtii ay ku horumareen reer yurub aan japaan usoo raray, ayaan seexday 10 saac oo xiriir ah, mana seexan 10 saac oo xiriir ah 15 sano gudahood.

Walaalaha qiimah badanoow aynu is waydiino, maxaa sababay inuu ninkaan dadaalka intaas le'eg ku bixiyo horumarka wadankiisa? Maxaa keenay inuu noqdo mid rafaad kasta u mara sidii uu wadankiisa u hormarin lahaa ?

Walaalaha qiimaha badanoow, ninkan wuxuu ahaa wiil loo diray inuu jarmalka wax ku soo barto, waxaa is weydiin leh intee soomaali loo diray inay jarmalka wax ku soo bartaan, malaga helay wiil ninkan oo kale ah ? intee wiil soomaaliyeed wax barasho loogu diray wadamada reer yurub malaga helay wiil lamid ah ninkan oo kale ? intee wiil soomaaliyeed wax barasho loogu diray wadanka maraykanka ma'aragnay wiil noqday sida wiilkan oo kale?

Intee wiilal deeq waxbarasho loogu diray adduunka daafihiisa ma'aragnay hal wiil oo hankii takeo kujiro?.

Intee wiil soomaaliyeed naftiisa ku haligay isagoo u tahriibaaya wadamada reer galbeedka? Mays waydiinay wiilashaasi maxay naftooda u haligaayeen ? maxay badda u dhaxaysa liibiya iyo talyaaniga iskugu biimaynaayeen ? maxay barafka u dhaxeeya ruushka iyo yurub iskugu biimaynaayeen ? maxaa ka maqnaa oo ay raadinaayeen ? ma lacag raadis ayay ahaayeen ? ma sharaf raadis ayay ahaayeen ? ma aqoon raadis ayay ahaayeen ? maxay tahay sababta ugu weyn ee ay naftooda ugu biimaynayaan dhibaatooyinkaas oo dhan ? hankoodu magarsiisanaa inay soo min guuriyaan horumarka iyo ilbaxnimada ka jirta wadamadaas ay u qaxeen oo ay keenaan wadankooda ? haddii aad weydiiso dhallin yaro tahriibaysa oo aad ku dhahdo maxaa yurub ugu socotaan ? jawaabta ugu badan ay ku siinayaan waxaa weeye, shaqo raadis ayaan nahay, basaboor raadis ayaan nahay, caruurta ayaan u soo xamaalanaynaa iwm, waxaa is weydiin leh dhallin yaradii soomaaliyeed hankoodii ma'intaas ayuu noqday shaqo, basaboor , xamaali !!! .

Waxaa layaableh, inaad aragto wiilashii, odoyaashii, gabdhihii, hooyooyinkii, u qaxay wadamada reer galbeedka iyagoo lacag lagarab taagan nin dagaal ooga ah oo sabab u ahaa inay wadankooda kasoo qaxaan,

warmaynu garan weynay xattaa inaynaan taageerin dagaal oogihii shalay wadanka inaka soo qixiyay ? warmaynu garan waynay inay ceebtahay in aan fadhi ku diriryada ku taageerno dagaal oogayaashii wadankeena hoos u dhigay ee maanta inaan qaxooti noqono sababta u ahaa ?

Nacaybka aan wadankeena hooyo u qabnaa waynaa !! inaynu ka qaxno isla markaasna kii sababta u ahaa in qarankeenii dumo, adduunka daafihiisa ku firxano, qaxooti noqono aynu lagarab istaagno hiil iyo hoo, hadal iyo lacag, soo cajiib maahan ? dhamaan dadka soomaliya buburka kawada waxaa taageera qurba joogta soomaaliyeed, taasna waa shay laga naxo, meeshaad ka shaqayn lahayd horumarka wadankaaga inaad ka shaqayso burburka wadankaaga, meeshaa horumarka galbeedka yaala soo rari lahayd inaad ku mashquusho qabyaalad iyo dhammaan wixii wadankeena hoosu dhac ku keenaya soo shay laga naxo maahan ?

Mahaatiir Maxamed.

Mahaatiir Maxamed waxa uu xukunka malaysiya qabtay intii u dhaxaysay (1981-2003), waxaa lagu tilmaamaa inuu ka mid yahay hogaamiyaasha qaarada aasiya ugu saamaynta badan, intuu xukunka hayay wuxuu ku guulaystay inuu wadankiisa hormar lagu tilmaami karo mucjiso gaarsiiyay, wuxuu wadankiisa ka hor mariyay dhinacyo badan sida dhanka dhaqaalaha, waxbarashada, adeega bulshda iwm.

Mahaatiir maxamed wuxuu magiciiso soo caan baxay markii uu qoray kitaab uu ubixiyay (THE MAlAY dilEMMA), aad iyo aad ayuu u dhaleeceeyay shacabka reer malaayo isagoo ku eedeeyay inay yihiin shacab raali ko noqday inay adduunka kale gacmaha u hoorsadaan, inay ahaadaan dad dib uga dhacay horumarka adduunka kale gaaray, in dawladoodu ahaato mid aan lajaanqaadi karin wadamada horumaray, ururkii markaas ka talinaayay wadanka malaysiya oo uu xubin ka ahaa mahaatiir ayaa aad iyo aad u dhaleeceeyay kitaabka uu qoray mahaatiir, waxayna soo saareen go'aan ay ku mamnuucayaan iibka iyo daabicda kitaabkaas, laakiin mahaatiir wuxuu ku guulaystay inuu hogaamiyaashii Ururrka ka dhaadhiciyo wuxuu sheegaayo inay tahay wax jira loona baahan yahay in aan meesha ka kacno wadankeenana aan horumar u horseedno.

Markii ay u suurtagashay inuu mahaatiir talada wadanka lawareego wuxuu ku talagalay inu fikradihii uu xanbaarsanaa u badalo ficil, wuxuu adduunka daafihiisa kabaadi goobay wadan uu ka dhigan karo tusaale uu ku dayan karo, waxaa u soo baxday in wadanka japaan uu yahay wadanka ugu haboon inuu tusaale ka dhigto si uu wadankiisa u hormariyo, sababtuu ku doortay japaana waxay ahayd, wuxuu arkay inay yihiin dad xooga saaray dhanka waxbarashada iyo kobcinta qofka bini'aadanka ah, wuxuu kaloo ku doortay inay japaan soo saarto alaab tayadeedu fiicantahay qiimaaheeduna jaban yahay taasna ay u suurtagelisay inay ka hormarto wadamada

reer galbeedka ee alaabtoodu qaaliga tahay, wuxuu arkay inay japaan lawareegtay suuqada qaaradaha kala duwan taasna ay keentay alaab tayo leh qiimaheedun jaban yahay.

Mahaatiir wuxuu udub dhexaad uga dhigay horumarkuu hiigsanaayo sadex arimood oo kala ah (u dub dhexaadka aqoonta, udub dhexaadka warshadaha iyo wax soosaarka, udub dhexaadka adeega bulshada).

Mahaatiir markuu horumariyay wadankisii ayuu go'aansaday inuu xilka iskaga dago kuna wareejiyo jiil cusub oo xanbaarsan fikrado cusub oo lagu hormarin karo, wuxu xilka ku wareejiyay jiil haysta hansare iyo inay dhamaystiraan horumarkii uu bilaabay mahaatiir iyagoo ka anbaqaadaaya xeerkii uu dajiyay mahaatiir ee ahaa (20-20) oo macnaheedu yahay labaatan sanaba in malaysiya ay heer joogto ilaa ay noqoto marka lamaraayo (2020) dawlada afraad ee adduunka ugu dhaqaalaha badan, ugu hormarsan.

Mahaatiir waa nin ku faana diintiisa islaamka wuxuuna dhihi jirey horumarkaan waxaanu u cuskanay diinteena islaamka, runtii waxaan dhagaysanaayay maalin lawaraysanaayay oo uu yiri, hogaamiyaasha islaamka wax weyn ayey qaban karaan laakiin waxaa ka maqan doonitaan iyo inay diyaar u yihiin inay wax u qabtaan bulshadooda.

Astaanta 6aad

Qofka hanka sare leh dheg uma dhigo hadalada ku dhisan han jabinta .

Tomas Edison.

Tomas edison wuxuu dhashay taariikhdu markay ahayd (1847 miilaadiga), wuxuu ku dhashay magaalada la yiraahdo Milano ee gobaolka Ohio ee wadanka maraykanka, wiilkan iskuulka hoose markuu dhiganaayay ayaa Macallinkiisii ku yiri, adi damiin ayaad tahay waxba mabaran kartid, waxaad tahay ilma aan dhamaystirneyn iskuulkiina waa ka eryay, isla markiiba waxaa iskuulkii timi hooyadii dhashay Tomas, markaas ayay ku tiri Macallinkii " ilmahaygu damiin maahan caqligiisuna waa dhamays tiran yahay" kadibna gacanta ayay qabsatay xaafadeeda ayayna la'aaday, hoyadaasi waxay ku talagashay inay ilmaheeda guriga wax ku barto isla markaasna niyada u dhisto oo ku dhahdo damiin ma tihid iyo doqontoona matihid !!!.

Wiilkaas Macallinkiisu ku tilmaamay inuu yahay doqon aan waxba baran karin waa wiilka sameeyay layrka adduunka dhan maanta ifsado, waa wiilka hal-Abuurkiisu uu gaaray 1093 oo hal Abuur, ma jirin wiilkan qof ka hal-Abuurbadnaa oo ka horeeyay walina lamahayo qof kale oo layimi intii uu layimi wiilkaasi.

Bal akhristaha qiimaha badanoow is waydii, maanta qof ka maarmi kara miyaa jira layrka iyo korantada ? Tomaas haddii uu dhagaysanlahaa hadalkii Macallinkiisa intaas oo hal Abuur masamaynlahaa ? ma ogtahay inay ka mid ahayd halAbuuradiisa raadiyaha aad wararka ka dhagaysato ? soo ma'ogid inay halAbuurkiisii uu ka mid ahaa teebka waraaqaha lagu qoro ? qiimaha badanaa markaad hesho hooyo aqoonta kugu garab istaagta niyadana kuu dhista markii lagu dhaho damiin ayaad tahay kugu dhahda damiin matihid ee xariif ayaad tahay, bal ila qiyaasa masuuliyada ay dusha u tuuratay hooyadii dhashay Tomas ?.

Tomaas edison ayaa waxaa la waydiiyay sidii uu ku gaaray aqoontaa intaas le'eg markaas ayuu yiri :- 99% waa dadaal, 1% waa mawhibo iyo ilhaan.

Tomaas tariikhdiisu waa dheertay laakiin ula jeedkaygu wuxuu ahaa inaan kuu bidhaamiyo in qofkii hanka sare leh uusan ahayn qof dheg u dhiga hadalada hanjabinta iyo niyad jabinta ku dhisan .

Walaalkayaga qiimaha badanoow iska ilaali inay dadku hanka iyo himmada kaa jabiyaan, intaad yoolkaaga hiigsanayso waxaad la kulamysaa dad raba inay niyada kaa jabiyaan, inay ku curyaamiyaan, inay kugu qoslaan marna kugu jees jeesaan, waxaad arkaysaa dad aaminsan in hididiiladaadu tahay shay fog oo aan lagaari karin qofkii ku fikaraana uu yahay qof

waalan ama iska riyoonaaya, bal sheekadan soo socota dhuux adigaa dareemaaya sida dadku kuu curyaaminaayaan hankana kaaga jabinayaan.

Monty Roberts.

Ninka la yiraahdo "Monty Roberts," markuu dhiganaayay dugsiga sare ayaa maalin maalmaha ka mid ah Macallin ka codsaday inay ardaydu qoraan qof walba wuxuu rabo inuu noqdo mustaqbalka, MONTY wuxuu qoray inuu rabo inuu helo dhul aad u ballaaran oo uu ku xanaaneeyo fardaha lagu tartamo adduunka, markii uu Macallinkii eegay waxa uu ku haminaayo Monty wuxuu siiyay darajo aad u liidata, wuxuuna marmarsiinyo ka dhigay in Monty qortay shay caqliga ka fog isla markaasna fikradiisu aysan ahayn wax soconaaya, waayo wuxuu yiri Macallinkii wiil faqiir ah ayaad tahay meeluu seexdo aan haysan halkee ka keenaysaa lacagta intaas dhan ee aad dhulka intaas dhan ku gadanayso kadibna fardaha adduunka ugu qaalisan ku soo gadanayso ? haddii xattaa aad riyoonayso wax macquul ah ayaa lagu riyoodaa, Macallinkii wuxuu sameeyay

marlabaad ayuu warqadii siiyay oo ku yiri :- wax macquul ah qoro fikradaan doqonimada ahna nagadaa ?

Monty warqada wuxuu ku qoray, "Macallin adiguna darajadaada fiican hayso anna riyadayda waalida kuula muuqata ayaan haysanayaa ".

Maanta Monty wuxuu ka dhabeeyay riyadiisii wuxuuna haystaa dhul aad u ballaaran boqolaal fardood ayuuna haystaa, wuxuuna ku tababaraa boqolaal dadka daneeya fardaha adduunka.

Haddii aad magiciisa geliso Google.com waxaa kuu so baxaaya sawirkiisa iyo isagoo fardihiisa dhex jooga.

Saas awgeed walalakayga qiimaha badanoow, waxaad ogaataa :-

- In Caqliga bini aadanka uu yahay sidii beer oo kale fikrad kasta oo aan ku fikirayno muda dheer ay la mid tahay waraabinta beertaas, ugu damayntana ma guranayno wixii aan qalbigeena ku beernay oo fikrado ahaa mooyee.

- Waxaad ogaataa in fashilaadu tahay inaad isku daydo inaad raali geliso qof kasta .
- Waxaad ogaataa inay guusho tahay inaad jeceshahay inaad ku guulaysato shay kasta, ee maahan inaad ku guulaysato shay kasta.
- Shay kasta oo aan u aragno inuu yahay shay wayn, ogaw wuxuu ka bilawday fikrad aad u yaroo qof maskaxdiis ku dhalatay, diyaaradaa hawada duulaysaa waxay ahayd qof fikradiis, maraakiibtaas bada dhex mushaaxaaya waxay ahayd fikrad qof maskaxdiis ku dhalatay.
- Horumar weyn magaaraysid haddii aadan tijaabin shay ay dadku u arkaan inuusan ahayn shay caadi ah.
- Qofkuna hididiiladisa magaaro hadii uusan rafaad iyo daal u marin, *raaxo raaxo laguma gaaro*.
- Qofka ugu damaynta guulaysanayaa waa qofka leh awood dulqaad iyo adkaysi.
- Haddii aad rabto inaad guulaysato waa inaad aaminto inaad awoodi kartid guusha oo aad gaari kartid yoolkaaga.

Maxamed Bin Abii Caamir

Maxamed Bin Abii Caamir dhawr iyo labaatan jir ayuu ahaa markuu ku fikiray inuu gudoomiye ka noqdo magaalada Qurduba, fikradaas markuu saaxiibadiis ula yimid waa ku qosleen oo ku dhaheen " *waad riyoonaysaa"*, dhawr sano kadib Maxamed Bin Abii Caamir wuxuu amiir ka noqday dawladii Andalus oo dhan ee ay Qurduba caasumada u ahayd wuxuuna asaasay dawladii loo aqoon jiray " Dawla Alcaamiriya " .

Walaalkayga qiimaha badanoow wax badan ayaad arkaysaa dad isku dayaaya inay ku curyaamiyaan hankaagana hoos u dhigaan kalsoonida aad naftaada ku qabtana ay wiiqaan oo ay kuu tusaan inaad tahay qof aan ka salgaari karin yoolka uu hiigsanaayo, dheg haw dhigin dadka noocaas oo kale ah dantaada ka raac.

Walaalkayga qiimaha badanoow waligaa ma maqashay xeerkan oranaaya (18 – 40 – 60) ? .

Xeerkan wuxuu ka dhigan yahay qofku markuu jiro 18 sano wuxuu ku mashquulaa dadku maxay ku dhihi doonaan, armaa lagula yaabaa, wuxuu ka walwalsan yahay dadku waxay ku dhahayaan oo ka aaminsan yihiin.

Markuu gaaro 40 sano wuxuu noqonayaa qof aan dan ka gelin dadka hadaladooda, aan ku mashquulsanayn dadku maxay ku dhihi doonaan, dadku maxay kaa aaminsan yihiin iwm .

Markuu gaaro 60 sano wuxuu ogaanayaa inuusan jirin qof ihtimaam kuu siinaaya inta aad adigu malaynaysay markaad jirtay 18 sano.

Marmarka qaarkood waxaa lagayaaba inuu qofku walwal iyo walbahaar uu siiyo dadka iyo waxay ka aaminsan yihiin in ka badan inta ay istaahisho arintaasi.

Nabigeena ρ waxaa lagu yiri hadal kasta oo qof bini aadan ah han jabin kara, laakiin waxaa is waydiin leh Nabigu dheg maw dhigay oo aflagaadadaas hankiisii ma jabisay ? markii lagu yiri waxaad tahay nin waalan ! mayska daayay fidintii diinta iyo fariintii Alle u soo dhiibay isagoo ka cararaaya in lagu dhaho waad waalan yahay ? markii lagu yiri waa sixiroole faalalaw ah masaamaysay oo waajibkiisii maka tagay ? waxaa hubaal ah intii erey Nabi Maxamedρ lagu yiri

in aan lagugu dhaheyn ee fadlan dheg haw dhigin dantaada ka raac yoolkaagana xaqiiji.

Waxaadna ogaataa walaalkayga qiimaha badanoow guushu maahan shay hibo iyo hadiyad lays ku siiyo ee waa shay qofku faro cidiyahood kula soo baxo oo ku helo !!! .

Waxaad kaloo ogaataa haddii ay guushu ahaan lahayd shay bilaash lagu helo, waxaa u han qaltaagilahaa oo raadin lahaa caajisoole kasta . dhamaan dadka hanka sare leh ee guusha baadigoobaa waxay ku leeyihiin guusha waxaa ka horeeya inaad qiimaheeda bixisid inta aadan helin guusha, qofkii qiimahaas qaaliga ah bixiyaa guusha gaara.

Wuxuu leeyahay Cabdulaahi al mudaawic habka ugu fiican ee aad uga aargoosan kartid qofka ku xumeeya ama ku han jabiyaa waa inaadan noqon sidiisa oo kale, waa inaad ka dheeraataa dariiqaas khaldan ee uu raacay.

Faa'iido:-

Dr Caa'id Alqarnii ayaa kitabkiisa layirahado (Ha murugoon) wuxuu ku qoray ereyadan cajiibka badan ee bal ila akhriya:-

Qof fadhiyaa kuma dul dhaco dhulka uu fadhiyo, dadkuna Ey bakhtiyay oo dhintay kuma dul cayaaraan, waxay kuu caroonayaan dadku markaad kaga saramarto cilmi, cibaado, lacag, hadii aad noqoto qof han sare leh oo dadka ka horumaray waxaad noqon qof danbiile ah oo aan toobad lahayn ilaa uu ka noqdo horumarkaas iyo nimcooyinka Alle siiyay, oo uu ka xuubsiibto dhamaan ereyada uu xanbaarsan yahay ee amaanta ah, tawbad aktooda kama leh ilaa uu noqdo damiin, doqon, maan gaab aan tirada ku jirin.

Saas darteed u dulqaado dadkaas hadalkooda, u dulqaado dhaleecayntooda, u dulqaado jees jeeskooda.

Haddii aad dhegta u dhigto hadaladooda oo aad la falgasho, dantoodii waa kaa gaareen ee ahayd inay noloshaada kaa ciideeyaan, hankaaga jabiyaan ee iska ogaw.

Waxaad ogaataa haddii aadan wax ahayn laguma dhaleeceeyeen, qofkii wax ah ayaa dadku dheleeceeyaan oo duraan .

Abuu jacfar al-daxaawii

Markii uu ku yiri Imaamu muzani wiilkii uu abtiga u ahaa ee la oran jiray *(Abuu jacfar al-daxaawii*) wiilyahaw faa'iido kaama soo socoto, Abuu jacfar waa ka xanaaqay ereygaas mana uusan rumaysan inuu yahay qof aan faa'iido ka soo socon, isla markiiba wuxuu aaday culuma kale oo wuxuu bilaabay inuu cilmiga barto ilaa uu gaaray heer uu noqdo Imaamka dariiqada (madhabka) imaamu Abuu xaniifa ee Masar, wuxuu gaaray heer loogu yeero Imaamkii, xaafidkii waynaa, muxadiskii reer Masar, faqiihii reer Masar.

Maxamed ismaaciil khayaad.

Maxamed ismaaciil khayaad wuxuu ahaa nin cilmiga jecel, culumada jecel, laakiin aan aqoon badan lahayn, wuxuu ku dadaali jirey inuu ka qayb galo fadhiyada cilmiha laga barto, xalaqaadka cilmiga ayuu ka qayb geli jirey, wuxuu aad iyo aad ugu dadaali jirey inuusan dersina dhaafin bal safka hore ayuu ku dadaali jirey inuu fariisto, sheekhii dersiga bixinaayay ayaa aad iyo aad ugu riyaaqay wuxuuna u bogay dadaalka ku jiraa ninkan, Maaxamed Ismaaciil markuu arkay in sheekhu la dhacay hankiisa ayaa kor u kacay wuxuuna bilaabay inuu kutub soo gato

si'uu habeenkii u akhristo waayo maalintii reerkiisa ayuu u xamaalaa oo biilka usoo dhiciyaa, wuxuu bilaabay inuu habeenkii nakhtiimo casharadii uu subaxdii soo dhagaystay isagoo kaashanaaya ardayda casharada sida fiican u fahma ee ugu celin kara , muda dheer ayuu saas kuwaday ilaa uu cilmi badan bartay meel sare ka gaaray cilmiga Fiqiga iyo usuulu Fiqiga, Maxamed wuxuu heer kaas gaaray isagoo wali siiwata shaqadiisii ahayd dhartolida, dadkii ayaa bilaabay inay meheradiisa ugu yimaadaan iyagoo raba inay su'aalo waydiiyaan ku saabsan diinta si uu ugu fatyoodo markaas ayuu uga jawaabayaa su'aalo badan oo ay garan waayeen culumadii markaas joogtay, wuxuu gaaray in dadkii oo dhan ku soo jabaan oo iska dhaafaan muftigii markaas magaaladaas muftiga ka ahaa, ninkii muftiga ahaa iyo qoyskiisii ayaa cadaawad iyo cuqdad u qaaday Maxamed waxayna arkeen inuu kala wareegay shaqadoodii, maalin maalmaha ka mid ah ayu soo maray Maxamed gurigii uu daganaa muftigii hore, wuxuu kula kulmay rag fadhiya guriga hortiisa markaas ayuu salaamay, salaantii markay karadiyeen ayay ku dheheen iyagoo ku jees jeesaaya " sheekh mawaxaad usocotaa Istanbuul (waa caasumada muslimaanta markaas) si laguugu soo magcaabo muftiga magaalada ? " hadalkaas markay ku dhahaayeen waxay sii raacsiiyeen qosol iyo jees jees, sheekhii hadal kale kuma dhihin ee wuxuu yiri " haddii Alle idmo ", Maxamed markuu gaaray gurigiisa ayuu go'aansaday inuu istanbuul aado oo

ka salgaaro hadalkaas ay jees jeeska u dhaheen, isla markiiba wuxuu macasalaameeyeey reerkiisii biilkii ku bixilahaana intuu maqan yahayna waa uu u diyaariyay, dameerkisii ayuu diyaarsaday wuxuuna u safray caasumadii muslimiinta ee Istanbuul, maadaama uusan qofna ka aqoon magaalada wuxuu kiraystay oo degay hoteel u dhaw meesha lagamaamulo arimaha diinta, wuxu bilaabay Maxamed inuu hoteelka hortiisa fariisto subax kasta isagoo akhrisanaaya kutubtuu watay, dadku markay arkaan ninkan wata labiska carabta aad iyo aad ayay u tixgeliyaan, mudo haduu saas ku jirey Maxamed dhawr qof ayay isku barteen asxaabtaas ay isbarteen ayaa u imaan jirtey oo la sheekaysan jirtay, maalin maalmaha ka mid ah ayaa nin la fadhiyaa ku yiri " waxaa jirta masalo suldaanku culumada waydiiyay oo ilaa hada qof garta aan lahayn suldaaankuna si dhakhso ah ayuu jawaabta urabaa culumadiina waa ku wareersan yihiin ee sheekh malagayaabaa inaad jawaab u hesho masaladaas ? markaas ayuu Maxamed yiri haa waan u hayaa jawaab, markaas ayaa ninkii ku yiri hadaba inakeen aan aadnee xafiiska arimaha diinta, Maxamed iyo ninkii oo isla socda ayaa ugalay xoghaya xafiiska arimaha diinta, markuu ugalay ayuu Maxamed waydiiyay masaladii xalkeeda lagu wareeray, xoghayihii ayaa fiiriyay Maxamed isagoo layaaban ayuu masaladii oo warqad ku qoran u dhiibay sheekh Maxamed, sheekh Maxamed masalaadii ayuu akhriyay kadib qalin ayuu jeebka kalasoo baxay oo wuxuu

bilaabay inuu jawaabtii qoro, sheekhu wuxuu jawaabtii qoraalkeeda waddoba wuxuu garasiiyay ilaa 10 safxo isagoo aan halkitaabna u laaban, markuu dhameeyay ayuu xoghayihii u dhiibay jawaabtii, xoghayihii ayaa jawaabtii ka qaaday sheekha isagoo layaaban, xoghayihii wuxuu jawaabtii u geeyay sheekhii gudoomiyaha u ahaa xafiiska arimaha diinta, markuu arkay jawaabtii ayuu aad iyo aad ula fajacay oo ula yaabay wuxuuna xoghayihii ku yirii " war jawaabtaan yaa qoray? ", markaas ayuu ku yiri sheekh reer Shaam ah, wuxuu ku yiri sheekhii qoray jawaabtan ii keen, sheekh Maxamed ayaa loo yeeray oo lagu yiri " sheekhul islaam ayaa ku baahan oo raba inuu kula kulmo", sheekh Maxamed wuxuu usoo galay sheekhul islaam markuu salaantii islaamka ku salaamay ayuu dhiniciisa fariistay, sheekhul islaam ayaa bilaabay inuu arimo badan oo diinta islaamka ku saabsan waydiiyo sheekh Maxamed, muda dheer kadib sheekhul islaam wuxuu ku yiri sheekh Maxamed i waydiiso maxaa u baahan tahay oo kuu qaban karaa ? markaas ayuu yiri waxaan rabaa inaad Shaam mufti iiga dhigto !!!, hade Shaam waxaa lays ku yiraahdaa wadamada kala ah Suuriya, Falasdiin, Lubnaan, jordan, waana meesha uu degenaa, sheekhul islaam wuxuu yiri waan kuu magcaabay inaad mufti ka noqoto Shaam kadibna wuxuu u qoray warqad cadaynaysaa in sheekh Maxamed loo soo magcaabay inuu mufti ka noqdo Shaam.

Sheekh Maxamed wuxuu ku soo noqday magaalada Dimishiq ee caasumada suuriya wuxuu soo maray gurigii uu deganaa muftigii hore ee hadalka jees jeeska ah ku yiri isagoo wata warqadii loogu soo magcaabay inuu mufti ka noqdo, ilaahay amarkiis wuxuu la kulmay muftigii oo guriga hortiisa fadhiga markaas ayuu ku yiri isagoo ku jees jeesaaya " sheekh Maxamed halkee ka timi ? markaas ayuu ku yiri waxaan ka imi caasumada muslimiinta ee Istanbuul waxaana soo qaatay warqadii laygu soo magcaabay in aan mufti ka noqdo Dimishiq sidii aad i amartay, kadib sheekh Maxamed wuxuu u sii gudbay xafiiskii wakiilkii Dimishiq u fadhiyay dawlada cusmaaniyiinta markaas ayuu farta ka saaray warqadii lagu soo magcaabay, wakiilkii markuu akhriyay warqadii ayuu sheekh Maxamed ku wareejiyay muftinimada magaalada isagoo u sameeyay xaflad wayn oo loogu dhiibaaya muftinimada.

Sheekh khaalid alazhari.

Sheekha la yiraahdo khaalid alazhari wuxuu ka shaqayn jirey masjidka wayn ee (Masjidu alazhar), shaqadiisu waxay ahayd inuu layrarka masjidka daaro oo shido, isagoo maalin sida naaftadii uu ku shidi jirey faynuuska masjidka ayuu wuxuu ku turanturooday nin jiifa masjidka dhexdiisa markaas ayaa waxaa ku daatay ninkii naaftadii, ninkii ayaa intuu xanaaqay wuxuu ku yiri sheekhii isagoo ku jees jeesaaya " Yaa sheekhal-azhar ", ninku hadalkaas jees jees

ayuu u yiri laakiin sheekh khaalid wuu ku farxay magacaas uu ugu yeeray ninku wuxuuna naftiisa ku yiri *" way xaqiiqoobi doontaa in aan noqdo sheekhul-azhar "* dhawr sano kadib khaalid wuxuu noqday Sheekhul-azhar.

Colonel Harland Sanders.

Colonel Harland Sanders waa ninka iska leh sawirka caanka ah ee ku dhegan baakadda ay cunta ku iibiso makhaayada layiraahdo kintaakii (Kentucky), qof kasta oo makhaayadaas cunta ka iibsaday wuu arkay sawirka ninkan, laakiin waxaa si waydiin leh muxuu yahay Colonel Harland Sanders ? sidee ku soo caanbaxay ? muxuu caan ku yahay ?.

Walaalkayga qiimaha badanoow ii ogolaw in aan sheekada ninkaan kuu bilaabo Colonel Harland Sanders wuxuu ku dhashay magaalada la yiraahdo Henrivel ee ka mid ah gobolka Indiana ee wadanka maraykanka, wuxuu soo maray nolol rafaad badan markuu yaraa, markuu 10 sano jirey wuxuu ka shaqayn jirey meel beer ah wuxuuna mushahar u qaadan jirey labada doolar 2$, kadib shaqadaas wuu ka tagay oo wuxuu ka shaqeeyay inuu tikityada u jaro basaska waa wayn, kadib wuxuu ku biiray ciidanka maraykanka, muda yar kadib waa ka tagay oo wuxuu shaqo ka bilaabay gadiidka tareenada ee oo ukala goosha gobolada maraykanka, siduu marba shaqo u tijaabinaayay markuu gaaray 40 sano ayaa wuxuu

bilaabay inuu makhaayad yar ka samaysto boosteejo ka mid ah boosteejooyinka uu maro tareenku ee gobolka Kentucky , makhaayadaas wuxuu ku bilaabay inuu ku iibiyo digaag uu usameeyay hab isaga u gaar ah, hab kaaas wuxuu u bixiyay (Secret chicken mixture), ninkii markaas gudoomiyaha ka ahaa gobolka Kentucky ayaa wuxuu u bixiyay (Colonel) halkaas ayuuna korneelnimada ku qaatay ee maahan inuu darajo ciidan oo uu gaaray ay tahay Harland Sanders, muda dheer markuu ku shaqaysanaayay makhaayadiisa ayaa waxaa loo soo ban dhigay in laga iibsado makhaayadiisa waxaana loo gaaray lacag gaaraysa 164 kun oo doolar, taariikhduna markaas waxay ahayd 1953 laakiin Harland Sanders uu diiday inuu makhaayadiisa iska iibiyo, laakiin dhawr sano kadib nasiib daro waxaa labadalay wadadii uu tareenku mari jirey taasna waxay keentay in Harland Sanders wuu waayo macaamiishii cuntada ka gadan jirtey taasoo keentay in makhaayadii is xirto, wuxuu ku iibiyay makhaayadii lacag gaaraysa 75 kun oo doolar, lacagtan iska daa inay ku filaanto ee xattaa daynta lagu leeyahay kama gudi karto, Harland Sanders khasaarahaas soo gaaray kadib wuxu go'aan saday inuu hawl gab galo, bishii ugu horeysay ee hawl gabka uu galay lacagtii loo soo diray waxay noqotay 105 $, da'diisu markaas waxay maraysaa 63 sano, wuxuu yaqiinsaday in lacagtaan hawl gabka lagu siinaayo aysan isaga iyo xaaskiisaba ku filnayn waxna u qaban karin, Harland Sanders isma dhiibin bal dadaalkiisii ayuu sii

waday wuxuu bilaabay inuu dadka makhaayadaha leh ku qanciyo inay maalgashadaan habkaan uu digaaga u samaynaayo, wuxuu bilaabay inuu gobolada wadanka maraykanka ku wareego makhaayadaha ku yaal, intee makhaayadood ayaad u malaynaysaan inuu tagay oo ka codsaday inay maal gashadaan dareeqan uu u samaynaayo digaaga ? 1008 makhaayadood markuu maraayo oo mid walba ay diiday bal qaarkood ku jees jeeseen ayaa midii 1009 ka yeeshay iyagoo kula heshiiyay inay digaag kasta oo la iibsado oo habkaas u samaysay ay ka siiyaan lacag aad u yar .

Taariikhdu markay maraysay 1964 Sanders waxaa u suurtagashay in digaagiisii ay iibiyaan 600 oo makhaayadood oo ku kala yaala Maraykanka iyo Canada, markii uu duqoobay oo da'diisii gaartay 77 sano Harland Sanders wuxuu ku talagalay inuu iibiyo calaamadiisii ganacsiga, wuxuu ka iibiyay laba nin oo lakala yiraahdo (Junior Brown , Jack Massey) wuxuuna ka siiyay hal malyan oo doolar (1, 000,000 $) iyo mushahar lasiinaayo inta uu nool yahay oo u dhigma afartan kun oo doolar (40,000 $) , taariikhdu markay ahayd 1971 waxay gaareen dadka ku shaqaysta magiciisa 3500.

Sanders wuxuu dhintay taariikhdu markay ahayd 1980, makhaayadihii KFC waxay ka mid noqdeen shirkada

layiraahdo (Pepsi- cola) waxayna kula wareegtay lacag gaaraysa 840 malyan oo doolar iyadaana magaca KFC u bixisay .

Taariikhdu markay ahayd 1987 ayaa KFC kowaad laga furay wadanka China, taariikhdu markay maraysay 2004 waxay gaartay tirada makhaayadaha KFC ee adduunka dhan ku yaal 11000 oo makhaayadood.

Haddii aan is waydiino Colonel Harland Sanders haduu markuu 64 sano gaaray ku qancilahaa 105$ ee dawladu hawlgabka u siisay adduunka dhan maagiciisa maanta malaga aqoon lahaa ? haduusan han sare lahayn 1008 makhaayadood maku wareegilahaa si ay u aqbalaan habkaan cusub ee uu digaaga u samaynaayo ? haduu is dhihilahaa 64 sano ayaad gaartay cimri kuuma harin ee gurigaaga geerida ku sug magiciisa malagu iibsan lahaa (1, 000,000 $) ? haduu dheg u dhigilahaa ereyada niyad jabka ah ee dhegihiisa ku soo dhacaaya maanta magiciisu saas caan maw noqon lahaa ? haduusan ahayn nin han sare leh (Secret chicken mixture) adduunka dhan magarasiin lahaa oo ma noqon lahayd qaabkan cusub ee uu u samaynaayo digaaga midka maanta adduunka loogu jecel yahay ilaa uu gaaray qofkii maanta aad u iibiso digaagiisa inuu isku arko inaad wax wayn u iibisay oo aad ku casuntay ? .

Waxaan filayaa inaynu aad iyo aad u dareemi karno ninkaan hanka ku jirey iyo inuu ku talagalay inuu magiciisu jiro tusaalena u noqdo qof kasta oo raba inuu caajis iyo wahsi meel iskaga xiro .

Henry Ford.

Henry Ford wuxuu ahaa wiil dhallin yaro ah oo u shaqeeya shirkad wuxuuna ka shaqayn jiray makaanikada, 10 saac ayuu shaqayn jirey wuxuuna qaadan jirey 11$, markuu galabtii ku soolaabto gurigiisa ayuu wuxuu aadi jirey beer ku taalay gurigiisa gadaashiisa halkaas oo uu rabay inuu ku xaqiijiyo fikiradiisii ahayd inuu sameeyo " matoor cusub ama gaari matoor ku shaqeeya oo aan farda jiidayn ", wiilkan Aabihiis wuxuu u arkaa shaqadaan uu wiilkiisu qabanaayo inay tahay waqti kulumis wax faa'iido ahna inay kasoo socoto uma arkayn, derisku markay arkaan way ku qoslayaan, qof kastoo arkaa wuu ku jees jeesaa wuxuuna u arkaa wiil khafiifay ama wax u dhiman yihiin, qofka kaliyah ee garab istaagay waxay a hayd xaaskiisa taas oo har iyo habeen lagarab taagnaan jirtay hiil iyo hoo, markii qoraxdu dhacdo ayay u shidi jirtay faynuuska oo u ifin jirtay, saddex sano kadib deriskii ayaa waxay maqleen cod layaab leh, waxay arkeen gaari

soconaaya oo ay fuushan yihiin henry ford iyo xaaskiisii gaarigaasoo aysan jiiday fardo bal soconaaya codna bixinaaya .

Maalintaas ayaa waxaa adduunka ku soo biiray farsamo raad wayn ku reebtay hormarkan aduunku maanta gaaray, farsamadaa waxaa aabeheed ahaa Henry Ford, hooyana waxaa u ahaa haweenaydii uu qabay ninkaasi, waa markii ugu horeysay ee dadku arkaan gaari matoor ku shaqaynaaya, waa markii ugu horeysay oo ay arkaan gaari aysan fardo jiidayn.

Waxaa is waydiin leh haddii uu niyad jabilahaa Henry Ford baaburka ford maynoo samayn lahaa ? hadduu derbiyada lugaha kalulilahaa dadka mashaqaystayaasha ahna uu shaaha lacabilahaa magiciisu adduunka daafihiisa magaarilahaa ? hadduu waqtiga iskaga luminlahaa wax aan nafac usoo jiidayn maanta ma istaahililahaa in aan tusaale usoo qaadano aan isku dhiiri gelinayno ?.

Walaalkayga qiimaha badanoow dadku waa laba nooc, nooc haddii aad ku xirato oo lasaaxiibto baroosinka kuu aasaaya, waa nooc aan ku tilmaamay inay yihiin sidii qof aan dabaasha aqoon oo bad waynta tagay kadibna nin saaxiibkiisa uu isku dayay inuu soo badbaadiyo goortaasna saaxiibkii badbaadin lahaa ku dhagay hoosna ula dagay halkaasna ay badii wada laqday kii aan dabaasha aqoon iyo kii yaqaanayba, waa nooc

aan kuu ogolayn inaad horey talaabo u qaado, waa nooc hadalka ka yaqaan intiisa hanjabinta ku dhisan, waa nooc aan lahayn hidiilo iyo han sare.

Nooca labaad ee dadku u qaybsamaan waa nooc markaad aragtaba aad dhiiri gelin ka helaysid, sheekadiisa ayaad ka helaysaa shidaalkii aad ku socon lahayd, ficilkiisa ayaad ka helaysaa tabartii iyo awood aad go'anta kaga gudbilahayd.

Hadaba waxaa la gudboon qof kasta inuu xusho dadka uu lasaaxiibaayo, nolosha la wadaagaayo. Fadlan walaal kala xulo dadka .

Ugu damayntii wuxuu dhihi jiray " haddii uu maanta noolaanlahaa Imaamu muzani dhaartiisii waa uu ka kafaara gudan lahaa.

Astaanta 7aad:-

Qofka hanka sare waxaa lagu yaqaanaa inuu yahay qof aan noogin, adkaysi badan.

Baqiya Bin Makhlad .

Baqiya Bin Makhlad wuxuu ka sheekaynaya safarkiisii dheeraa wuxuuna yiri :- waxaan kasoo safray wadanka Andalus(hada Spain ayaa looyaqaan), waxaana u safray wadanka Ciraaq gaar ahaan magaalada Baqdaad, mahaysan gaadiid aan fuulo sida Faras, Rati, Dameer iwm, sidaas darteed lug ayaan ku imi magaalada Baqdaad !!! walaalkayga qiimaha badanoow bal intee lugaynaayay baqiya ilaa uu ka yimi Baqdaad ? diyaarada ayaa lix saac u kala socota qof lugaynayaa imisa bilood ama sanooyin ayay ku qaadan inuu iskaga safro Spain iyo Ciraaq ? muxuu ahaa himmiladaa weyn ee ku xanbaartay inuu Baqiya rafaadkaas u dulqaato ? muxuu ahaa hanka sare ee siiyay Baqiya inuu safarka intaas le'eg lug kumaro ?.

Baqiya himmadiisu waxay ahayd inuu la kulmo imaamkii waynaa Axmed Bin Xanbal, wuxuu dhibtaasoo dhan usoo maray si uu ula kulmo Imaamu Axmed.

Wuxuu leeyahay Baqiya markaan imi Baqdaad waxaan maqlay in imaamku xiran yahay loo diiday inuu qof la kulmo, xabsi guri ku jiro, qof utagi kara ama wax ka baran kara uusan jirin.

Wuxuu kaloo yiri Baqiya aad ayaan u murugooday waayo ninkii dhamaa ee aan intaasoo dhan u soomaray ayaa la yiri lama kulmi kartid, uma tagi kartid, waxba kama baran kartid.

Walaalkayga qiimaha badanoow maxaad u malaynaysaa inu sameeyay Baqiya ? ma wuxuu yiri haddii sheekhaan u socday laydiiday halkaas ayaan kaga harayaa yoolkaan hiigsanaayay ?

Baqiya oo sheekada sii wadaa wuxuu yiri, waxaan raadiyay gurigii uu ku xirnaa imaamku markaan u tagay ayaan ku iri:- waxaan ahay nin qariib ah oo magaalada ku cusub meel dheerna ka yimi adi dartaana u yimid, markaas ayuu igu yiri imaamkii halkee katimid ? waxaan ku iri Andalus ayaan ka imi, wuxuu igu yiri meel fog ayaad ka timid, aadna waxaan u jeclahay in aan ku garab galo laakiin dawlada ayaa i xirtay oo xabsi guri ayaan ku jiraa laymana ogola in an la kulmo dadka ama wax u akhriyo, waxaan ku iri anigaa garanaaya sidii aan wax kaaga baran lahaa ee may ogolaanaysaa in aan wax kaa barto ? wuxuu igu yiri sidee wax iiga baranaysaa ? waxaan ku iri :- waxaan iska soo dhigayaa qof faqiir ah oo wax tuuksanaaya dhar wasakh ahna waan soo xiranayaa, go' weyna waan soo huwanayaa, ul dheer waan soo qadanayaa, albaabkaan soo istagayaa markaas ayaan dhahayaa " yaa Alle wax siiyay" , goortaas ayaad albaabka iga furaysaa waxaad iska dhigaysaa qof wax isiinayaa markaas ayaan kaa yeersanayaa axaadiista Nabigaρ, imaamkii wuxuu ku yiri waa yahay waan ogolaanayaan laakiin shardi waxaan ka dhiganayaa inaadan qofna ku dhihin axaadiistan Axmed Bin

Xanbal ayaan kasoo qortay ama ibaray, waxaan ku iri waa yahay qofna ku dhihi maayo Axmed ayaan kasoo qortay axadiistan.

Baqiya oo hadalkii siiwata ayaa yiri :- Sidaas ayaan wax uga baranaayay ilaa uu dhintay khaliifadii sheekha xirtay (waasiq) oo uu yimi Mutawakil oo ahaa nin jecel culumada ahlu sunnada ah sheekhiina xabsiga kasoo saaray una ogolaaday inuu dadka diinta iyo sunnada Nabiga uu baro.

Waxaa layiraahdaa Baqiya inuu laba safar ku tagay wadamada kala ah Masar, Shaam, Xijaaz, Ciraaq, safarkii hore wuxuu qaatay 15 sano kii danbena wuxuu qaatay 23 sano, dhamaan safaradiisa laba lugood ayuu ahaa oo mahaysan wuxuu raaco oo gaadiid ah .

Sidee ku helay Baqiya awooda u sahashay inuu u dul qaato intaas oo sano inuu lugeeyo si uu uga salgaaro yoolka uu hiigsanaayo ?

Hore ayaa waxaa loo yiri " qofka mar walba raadsada wadooyinka sahlan ee aan dhibta lahayn waligiis mayeesho han sare " .

Taasna waa shay run ah waayo shay kasta oo qaali ah ama muhiim ah raaxo laguma gaaro, fadhi laguma gaaro, hurdo iyo jiif laguma gaaro, in biibito la fariisto ama derbi lugaha

laga lulo laguma gaaro, inhabeenkiina Tvga daawashadiis lagu lumiyo maalintiina jiif lagu lumiyo laguma gaaro, hormarka waxaa lagu gaaraa dadaal iyo inaad haysato naf aan noogin daalna aqoon .

Mount Everest.

Buurta (Mount Everest) :- buurtaan waa buurta adduunka ugu dheer, waxayna dhereerkeedu le'eg yahay 8850m, waxay ku taalaa xuduuda u dhaxeeya wadanka China iyo Nepal, waxayna ku caanbaxday magicii ninkii ugu horeeyay ee cabira inta uu dherer le'egayhay oo la oron jiray (chorge everest 1790 - 1866) , laga soo bilaabo taariikhdu markay ahayd 1953 waxaa korey dad tiradoodu le'egtahay 1335 qof 168 ka mid ah waa dhinteen iyagoo aan gaarin fiida ugu saraysaa ee buurta, dadkii isku dayay inay fuulaan waxay da'doodu u dhaxaysay 11 sano jir ilaa 64 sano jir, rag iyo dumarba ay isku dayeen.

Edmund Hillary oo u dhashay wadanka New Zealand iyo Tenzing Norgay oo u dhashay wadanka Nepal, waxay ahaayeen labadii nin ee ugu horeeyay oo kora buurtan, ninka la yiraahdo Edmund Hillary markiii ugu horeysay ee uu isku dayo inuu koro buurta kuma uusan guulaysan inuu gaaro fiida ugu sareysa laakiin dawladii markaas ka talinaysay boqortooyadii englishka ayaa go'aansatay inay

abaal mariso Edmund Hillary oo ay siiso bilad sharafta ugu qaalisan wadanka englishka iyadoo sabab uga dhigtay abaal gudkaan dadaalka iyo hanka sare ee ku jira Edmund Hillary, iskudaygii labaad ayuu ku guulaystay Edmund Hillary inuu fiida ugu sareysa uga baxo buurta isagoo uu la socdo saaxiibkiisii u dhashay wadanka Nepal ee la oran jiray Tenzing Norgay.

Cumar samurah waa nin u dhashay wadanka Masar wuxuu ka mid ahaa dadkii koray buurtaas, mar lawaydiiyay sida ay ugu suurtagashay inuu koro oo fiida uga baxo buurtaas wuxuu yiri :- laba asbuuc ayay igu qaadatay in aan buurta dhaladeeda istaago, laakiin diyaar garawgeeda waxaan ku jiray afar sano oo xiriir ah ! wuxuu yiri arintii iigu yaabka badnayd waxay ahayd markaan arkay dadkii buurta ila koraayay oo midkood dhintay rafaadka lamaraayo awgiis, wuxuu intaas raaciyay marna niyadayda kuma soo dhicin in aan noqdo ama joojiyo koritaankan koraayo buurtan ee korintaan keedu halista yahay, sidee u noqdaa afar sano ayaan u soo diyaar garoobaayay hadana dhaladeeda wax yar ayaa iiga dhiman in aan gaaro.

Qof kasta oo u malaynaaya inuu asaagiis ka saramaraayo isagoo aan bixin qiimihii iyo dadaalkii uu kaga saramari lahaa waa qof kedsoon oo mala awaal ku nool laf cadna toobin ku haya.

Sidaas awgeed guushu maahan wax bilaash iyo deeq lagu helo, waa inuu qofku huraa canshuurteeda horu mariska ah ee aan lagaa sugayn inta bishu ka dhamaanayso, qof walba inta uu dadaalkiisu le'eg yahay ayay guushiisuna le'ekaanaysaa.

Walaalkayga qiimaha badanoow mataqaanaa qofka faashilka ah ee la oran karo qofkaasi wuu ku fashilmay inuu gaaro dantuu hiigsanaayay ?

Tomas edison ayaa kuu sheegaaya qofka faashilka ah wuxuuna yiri :- dadka faashiliinta ah badankood waxay is dhiibaan iyagoo u dhaw inay gaaraan yoolkoodii ay hiigsanaayeen.

Taasina waa run waayo intee aragnay dad muda u halgamaayay inay gaaraan yoolkooda markii ay wax yar u jireena is dhiibay oo ka istaagay inay sii wadaan halkankooda, horey ayaa waxaa loo yiri sabraa guul gaara.

Taymuur linki.

Taymuur linki wuxuu ahaa hogaamiye ka tirsan ciidamadii maquuliyiinta ee ku soo duulay wadamada islaamka, Taymuur waxaa lagu jabiyay dagaal dagaalada ka mid ah, isagoo ay iskugu darsantahay dhaawac, gaajo, jab iyo leeleel kasoo gaaray dagaalkii, ciidankiisii oo kala yaacay oo kala firxaday, ayuu niyadjab wuxuu lagalay meel god ah, markaas ayuu arkay quraanjo larafanaysa inay qaadato hal xabbo galay ah, wuxuu u fiirsaday inta jeer ay galaydaas ka dhacday quraanjaduna ay isku dayday wuxuu arkay inaysan

quraanjadu daalayn , noogayn, quusanayn, waxay larafataba ugu danbaynii quraanjadii xabbadii galayda ahayd wey la kortay oo waa ay qaadatay, tarmuur intuu naftiisa la hadlay ayuu ku yiri :- ma quraanjadan ayaa kaa xoog badan, kaa dulqaad badan, quraanjaduba ma quusane maxaan u quusanayaa isla markiiba intuu fadhiga ka kacay ayuu gudagalay siduu u ururinlahaa ciidamadiisii oo uu dagaalka ugu rogaal celinlahaa, dadaal dheer kadib taymuur dagaalkii ayuu ku noqday waana ku guulaystay.

Imaamu Kisaa'ii.

Imaamu Kisaa'ii, wuxuu imaam ku ahaa naxwaha iyo akhrinta qur'aanka (qiraa'aatka), waxaa la yiraahdaa naxwaha ayaa aad ugu adkaaday, markuu isku arkay inuusan baran karin naxwaha ayuu ka tagay meeshu ka baran jiray isagoo iska dhaadhiciyay naxwe ma baran kartid, mar'uu dhexda siimaraayo ayuu wuxuu arkay quraanjo la rafanaysa inay xabad masango ah, quraanjadii ayuu u fiirsaday markaas ayuu arkay inaysan quusanayn oo aysan noogayn waxay la rafataba xabadeedii waa qaadatay derbigana waa la kortay, markaas ayuu naftiisa ku yiri ma quraanjaa kaliidataa, waa in aan ku rogaal celiyaa barashadii naxwaha, maliintii uu go'aankaas qaatay intii ka danbaysay imaam looga danbeeyo naxwaha ayuu noqday.

Faaiido :- waxaana jirta xikmad tiraahda saddex Quraan jada kaga dayda (1) joogtaynta shaqada (2) ku celcelinta isku dayga(3) sixida khaladka. Faa'iidadaan waxaa ii faa'iidayeeyay saaxiibkayga qaaliga ah CUMAR NUUR CALI.

Sheekha la yiraahdo imaamu Sarkhasi ayaa jeelka la dhigay oo la xiray intuu xabsiga ku jirey ayuu wuxuu ku qoray kitaabkiisa layiraahdo (Almabsuud) oo ka kooban 30 mujalad, sidoo kale imaamka la yiraahdo Ibnu asiir markuu jeex qalalku ku dhacay wuxuu alifay oo qoray intuu xanuunsanaa kitabakiisa la yiraahdo (Jaamic al-usuul wannihaayah) oo ka kooban 30 mujalad, imaamu Ibnu Taymiyah markii la xiray xabsiga dhexdiisa ayuu wuxuu ku qoray kitaabkiisa la yiraahdo (Alfataawaa) oo ka kooban 30 mujalad.

Soo ilama aragtaan iimaamyadaas inay ka dhigeen dhibtii ku dhacday shay ay ka faa'iidaystaan oo uusan ku dhallin niyad jab hankoodiina hoos u dhigin ?

Helen Adams Keller.

Helen Adams Keller waxay ahayd gabar indhala, dhegala , aan hadli karin !! laga soo bilaabo markay jirtay laba sano, intaasoo ciladood iyadoo qabta ayay waxay dhamaysay jaamacad, waxay baratay luuqada englishka, jarmalka, faransiiska, laatiiniga, waxay qortay tobanaan kitaab, maqaalo aad u fara badan ayay qortay, waxay noqotay macallimad jaamacadaha ugu waaweyn wadanka maraykanka ka khudbaysa, waxay la kulantay dhamaan madax waynayaashii maraykanka xiligii ay noolayd !!!.

Laakiin waxaa kasii yaab badan waxa weeye Macallimadii wax soo bartay (Helen Adams Keller) oo la oran jiray (aan suulfaan), Macallimadaan imisa ayay dadaal ku bixasay inay gabadhaan wax barto ? dulqaad intee le'eg ayay latimi si ay wax u fahansiiso gabadhaan ? Macallimadaan waxaas oo dadaal ah maxay ugu bixinaysaa waxbarida ? rajada ka haysa waynaa gabadhaan aan haysan xubnihii wax lagu baran jiray haysan ? su'aalahaas oo dhan jawaabtoodu waxay noqonaysaa kalmadahaan soo socda ee bal ila dhuuxa " aan suulfaan waxay aaminsanayd arday kasta oo dadaal lagu bixiyo inuu meel weyn gaari karo, fikrada ay ka haysatay waxbarashada iyo waxbarida ayaa u sahashay inay dadaal dheeraada ku bixiso si ay gabadhaas wax u barto, waxay aaminsanayd in ardaygu ku gaaro meel weyn markuu Macallinkiisa ka helo dhiiri gelin, hadal macaan, hankiisa oo kor looqaado, Macallinkoo qalbiga ardayda hanta oo kasbada,

inuu ardaygu u arko in Macallinkan horseed u yahay mustaqbalkiisa".

waxaa hubaal ah haddii aysan helin Helen Adams Keller Macallimadeeda (aan suulfaan), inaynaan maqaleen magaca Helen.

Badanaa inta wiil ama gabar soomaaliyeed waxbarashadoodii uga tageen hadal niyad jab ku dhisan oo Macallinkoodii yiri ! badanaa inta ilma han sare haysta ay hankiisa jabisay kalmad uu Macallinkiisii ku yiri ! badanaa inta ardaydeenu maqlayaan erey kastoo hanka ilmaha dhaawacaaya ! waxaase intaas oo dhan ka yaab badan in Macallimad ku guulaystay inay wax barto gabar dhegala, afla, indhala, Macallimiinta qaarkoodna ay ku guulaysan waayeen inay baraan ilma intaas oo dhan haysta lixdiisii lixaadna u dhantahay.

Sidaas darteed waxaan leeyahay, Macallinka qiimaha badanoow inta aadan shaqada Macallinimo ka shaqayn baro qiimaha ay leedahay shaqadaan, ogaw masuuliyadaan inta ay le'egtahay, ogaw inaad u tahay ardaydaas oo dhan tusaalihii ay ku dayanaayeen, hadalkaaga xakamay waayo ardaydu waa kugu dayanayaan, isku day inaad xulato ereyba ereyga uu ka fiican yahay, ku dadaal inaad ereyada ka xulato inta ugu fiican amaanta, dhiiri gelinta, ka dheerow inaad arday ku dhahdo erey hankiisa jabinaaya, iska ilaali inaad ku

dhahdo arday erey lagayaabo inuu sabab ugu noqdo inuu waxbarashada naco.

Wuxuu leeyahya DR Bashiir Rushdii :- waxaan soogalay fasalka labaad ee dugsiga hoose, markaas ayaan ku iri ardaydii fadhiday yaa fasalka ugu damiinsan ? markaas ayaa saddex arday gacanta taageen isla markiiba arday kale ayaa dhinacaas ka qayliyay oo yiri Macallin kanna waa damiin markaas ayuu ardaygii gacanta taagay !!! markaas ayaan weydiiyay oo ku iri damiin miyaad tahay ? markaas ayuu yiri haa damiin ayaan ahay !!! Subaxaanallaah.

Waxaa is weydiin leh ilmahaas todoba jirka ah yaa u sheegay inuu damiin yahay ? yaa ka dhaadhiciyay inuu ku biiray safka daminimada ? yaa ku daray ilmahaas safka dadka nolosha ka dhacay ee aan qiimaha lahyn ? yaa u horseeday in ilmahaasi noqdo mid aan hiigsan hididiilo fiican ee ku talagala inuu ka mid noqdo kuwa maandooriyaasha, tuugnimada, iwm isticmaala ? su'aalahaas jawaabtoodu waxaa weeye" waxaa nolosha ka riday, hankoodii jabiyay, kudaray safka damiiniinta Macallimiin aan u qalmin inay ka shaqeeyaan shaqada Macallinimada, Macallimiin aan dareemayn qiihama weyn ee ay ku fadhido shaqaday hayaan.

Faa'iidooyin muhiim ah

Siyaabaha loo kobcin karo hanka sare

Haddii aad ogaatay hanka sare wuxuu yahay iyo qiimha weyn ee uu ku fadhiyo, waxaa aad u haboonaan badan inaad ogaato asluubkii ama wadooyinkii aad u marilahayd sidaad kor ugu qaadilayad hankaaga.

Haddaba waxaan isku dayayaa in aan kuu soo gudbiyo walaalgayga qiimaha badanoow talooyinka ay culumadu ku tilmaameen inay yihiin kuwa kor u qaada himmada (hanka sare).

1) Dadaal aan noogid aqoon, waayo dadaal la'aantii waxba kuuma hirgalayaan yoolna kuuma xaqiiqoobaayo.

قال تعالى :- (وَالَّذِينَ جَاهَدُوا فِينَا لَنَهْدِيَنَّهُمْ سُبُلَنَا.) (العنكبوت: 69)

Qofkii ku talagala inuu hankiisa kor uqaado ha agaado in dariiqa loo marayaa uusan ubax iyo roog gaduud ku goglanayn ee uu yahay dariiq ay ka sokayso daal, rafaad, hurdo yari, naftoo lagu layliyo in laga xakameeyo waxay jeceshahay.

Dariiqan waa midkii Nabi Aadam ku daalay sidii u hayay, waa midkii Nabi Ibraahiim dartiis naarta loogu tuuray, waa midkii Nabi Yusuf sabatiisa lacag rakhiis ah loogu iibiyay kadibna loo adoonsaday oo xabsiga loo dhigay, waa midkii sababtii Nabi Maxamed sadex sano go'doonka loo geliyay ilaa ay waayeen isaga iyo intii la socotay waxay cunaan oo cabbaan, waa midkii uu ku huray Abu bakar Sadiiq inuu quuro bixinta maalkiisa dhan, waa midkii keenay inuu bilaal u dulqaato cadaabkii ay ku hayeen gaaladii reer Quraysh, waa midkii jirkiisa lagu goo gooyay Khubayb bin cadiyi, waa midkii sababtiisa loo

daldalay halgamaagii reer Liibiya Cumar al mukhtaar, waa midkii sababtiisa coomaadi duulaaya hawada lagaga rusheeyay sayid Cabdullaahi Xasan.

Dariiqan xeer ayuu leeyahay oranaaya " Qofkii dhibtoodaa dheefsada ".

Wuxuu leeyahay Imaamu ibul-qayyim :- waxaan garanayaa qof madaxu xanuunaayo kitaabkuna madixiisa u yaal markasta uu helo nafis iyo xoogaa caafimaad ah kitaabka ayuu qaadanayaa oo akhrinaya.

Waad aragtaan xanuunkiisu uma diidin inuu wax akhriyo, soo foolxuma maahan inaad aragto dhallin yaro aan ku hanbaasayn inay kala furo kitaabba , inay hankooda kobciyaan, inay asaagood la tartamaan !!!.

2) Asluubka labaad :- Rabbi bariga iyo inaad Alle Waydiisanaysato inuu himmadada kor uqaado yoolkaagana uu ku gaarsiiyo.

Ducadu waxay imaanaysaa markaad dadasho ayaad dhahaysaa ilaahayoow ila qabo, ii fududay laakiin adigoo iska fadhiya oo aan dadaalayn waxna qabsanayn inaad dhahdo ilaahayoow ii fududay waxaan u arkaa inay tahay xad gudub aad u gaysatay ducada boos aysan lahayna aad dhigtay.

3) Waa inaad qirsan tahay in hankaagu hooseeyo, waayo taas waxay kuu sahlaysaa inaad dawayso meelaha aad dareemayso inaad ku hoosayso, laakiin waxaa adduunka ugu xun qof hankiisuna hooseeyo isla markaasna aan qirsanayn ama ogayn in hankiisu hooseeyo.
4) Inaad akhrido taariikhdii iyo sheekooyinkii dadkii kaa horeeyay ee aduun iyo aakhriba meel weyn

kaaray, dhuux sheekooyinkooda, hakuu noqdeen sheekooyinkoodu meel aad ka dabqaadato, maktabadaada kutubta noocaas oo kale ah waa inay kaaga buuxaan si'aad marba ugu laabato oo u akhrisato.

5) Lasaaxiib dadka hankoodu sareeyo, ka dheeraw inaad lasaaxiibto qof hankiisu hooseeyo, waayo saaxiibku saamayn ayuu kugu yeelan, marka ka fiirso qofkaa lasaaxiibayso .
6) Inaad ka dheeraato wax kasta oo hankaaga hoos u dhigi kara, aad iyo aad ayayna u badan yihiin waxaana ka mid ah

- Intaad waqti badan ku dhumiso la joogitaanka ama la sheekaysiga iyo lacawaynta saaxiibada.
- Booqashada badan ee ay asxaabtu guriga kuugi imaanayaan ama aad adigu u tagayso .
- Daawashada badan ee tvga iyo inuu qofku isku ilaawo inuu har iyo habeen dul fadhiyo tv, internet, iwm.
- Inaad waqtigaaga dhan geliso shaqo oo aad waydo xili aad wax faa'iidaysato, aad iyo aad ayay u fiican tahay inaad waqti laharto aad wax faa'iidaysato .
- Inaad caado ka dhigato inaad dib dhigto shaqada maanta kuu taala oo aad istiraahdo berri ayaad qaban doontaa, berri ayaad samayn doontaa, iwm .
- Caajiska iyo wahsiga badan, waayo waa labo shay oo aad uxun qofkii caadaystaana uu duloobaayo asaagiisna ka haraayo

Walaalkayga qiimaha badanoow haa ilaawin in sirta ka damaysa dadka noloshaan ku guulaystay inay tahay " waxay isku dayeen inay dhaqan geliyaan ficilada

aysameeyaan dadka Naajixiinta ah, ku dayashaadaasi waxay noqon kartaa kelmad aad maqashay, sheeko aad akhrisay iwm.

Nin caalim ah ayaa wuxuu yiri :- kelmad aan maqlay ayaa Alle igu anfacay 30 sano.

Halkaas ayuu ku dhamaaday kitaabkii aan u diyaariyay dhallinyarada soomaaliyeed, kitaabkaas oo aan ugu talagalay inuu u noqdo mid ay sahay ka dhigtaan inta ay hiigsanayaan yolalkooda .

Waxaanna gunaanad uga dhigayaa kitaabkan, maqaal uu diyaariyay Dr Saadiq Enaw, maqaalkaas oo uu ku qoray website-ka somalitalk.com, sababta aan maqaalkan u doortay waxaa weeye inuu Dr Saaqdiq sifiican uga hadlay marxalada dhalin yaradnimda iyo inay dhalin yaradu yihiin udub dhexaadka ummad kasta oo hormar gaarta.

Haddaba waakan maqaalkii oo bilawday :-

Facii is-Beddelka

Qof walba wuxuu nolosha ku lee-yahay sad u gaar ah. Cimrigu waa midka ugu milgaha culus oo lagu dheefsado nolosha. Calafka cimriga, xumaantiisa iyo samaantiisa waxaa qofka la wadaaga dadka la faca ah ee xilli-dhalashadooda ay isku dhowdahay. Waxaa kaloo ku weheliya faco ka yar-yar iyo faco ka waaweyn. In-kasta oo ay yihiin saddex fac oo isa-soo gaaraya, misana wadar u-jooggoodu si siman uma muddeysna. Faca dhallinyarada ah oo iyagu leh xilliga, ayaa waxay yihiin tamarta jaheysa bulshada. Faca ka yar-yar waxay yihiin magan u dabran wixii sooryo-gal ah oo ay helaan. Faca ka waaweyn ayaa iyaguna waxay matalayaan bakhaaro ay ku keydsan yihiin khibrad iyo waayo-aragnimo laga doonayo inteeda wanaagsan in ay u gudbiyaan faca dhallinyarada ah.

Nolosha waxay aadamiga bartey, aabihii aanan caruurtiisa u diyaarin in ay isaga ka wanaagsanaadaan, caruurtaasi mooryaan ayay noqonayaan oo iyaga ayaa silcinaya waalidkood. Waxaa lamid ah macallinkii aanan ardeydiisa u diyaarin in ay ka wanaagsanaadaan, ardeydaasi mooryaan ayay noqonayaan oo iyaga ayaa silcinaya kuwii wax barey. Sidaas oo kale waxaa ah faca waaweyn ee dhallinyaradooda aanan diyaarin u diyaarin in ay ka wanaagsanaadaan, facaasi dhallinyarada ah mooryaan ayay noqonayaan oo iyaga ayaa silcinaya facii ka waaweynaa.

Facaadda dhallinyarada ah, waa xilli qofka aadamiga ahi uu ku sugan yahay heerkii noloshiisa ay ugu wacnaansho badan-tahay. Waa xilliga uu qofku ugu xooggan yahay, ugu fir-fircoon yahay, ugu waxbarasho badan yahay uguna wax-qabad badan yahay. Waa xilli uu yahay gaashaan-qaad oo noloshu ay u kala-guureyso. Wuxuu ka soo gudbayaa xaalad caruurnimo oo uusan lahayn faham nolosha uu ku qiimeeyo. Wuxuu u tallaabayaa muqdarnimo garaad uu ku fahmo qiimeynta nolosha. Xilligaas kala-guurka ah, waxaa lagu xisaabiyaa xilliyada qofka soo mara xilliga ugu milgaha culus. Sababtu waxay tahay waa xilliga uu qofku si buuxda u hana-qaadayo oo ay ku bilaabaneyso dareenka ah in uu nolosha wax ku lee-yahay. Wuxuu bilaabayaa in uu dibadda soo dhigo qaabkii uu ku midabeyn lahaa khibradihii yaraa iyo aqoontii uu nolosha ku kasbadey, isla-markaas uu raadinayo aqoon dheeri ah. Wuxuu markaas adeegsanayaa awoodda caqliga ee curdanka ah iyo awoodda jirka ee xooggan, isaga oo marka hore baadi-goobaya kororsi waaya-aragnimo,

marka xigana fayiigsi iyo ficil wada-jira ku tiigsanaya timaaddada.

Isla-xilligaas qofka dhallinyarada ah wuxuu bilaabayaa guda-galka dhisid qoys si uu uga qeyb-qaato tallaalka abuurkii uu kaga qeyb-geli lahaa nolosha bulshadiisa.

Xilligaas hore, gudaha jirka qofka dhallinyarada ah waxaa ku dhacaya is-beddello xooggan. Waxay ka muuqanayaan naqshadda xubnaha iyo qaabka uu jirku u shaqeynayo (physical & physiological changes). Meesha u horeysa ee laga dheehanayo waa kala duwanaanshaha jinsiga lab iyo dheddig, kuwaas oo maraya laba marxaladood (primary & secondry). Dhecaanada (hormons) jirka gudihiisa ku qubanaya ee ku howlan is-beddelka la xiriira koritaanka xubnihiisa, waxay raad ku yeelanayaan qaab-dhaqanka iyo fekerka qofka dhallinta-yar. Dhallinyaradu waxay la gaar yihiin, faca ka waaweyn in ay ka tira badan yihiin, ka xoog weyn yihiin, kana dadaal badan yihiin. Waxaa intaas u dheer, baxsadka uu sabab u yahay ka carar ciilkii caruurnimo oo ay tagtadooda ka soo mareen. Iyo u fara-baxsiga timaaddada oo ay sabab u tahay dheygag leh fayiigsi xooggan iyo dheehasho damac weyn oo xiiso iyo xaraka miiran ah si ay joogtadooda uga yeelaan sahaydii timaaddadadooda.

Nolosha qiimaheeda waa xilliga dhallinyarada la yahay. Macna weyn ma ayan lahaateen haddii uusan xilligaas jireen. Waa xilli ayan riyada noloshu ka dhamaan, noloshuna xushmad dheeri ah ayay u heysaa qofka dhallinyarada ah. Waa ay soo dhoweysaa hadba inta uu isaguna soo dhoweeyo nolosha. Taasi waxay ku abuurtaa dhallinyarada, iyaga oo dhiirran in ay mar-walba doonaan

guul. Meel-kasta waa ay u maraan iyaga oo u huraya qaali iyo raqiis. Guushuna waxay saaxiib la tahay oo ay soo dhoweysaa kuwa iyada raadinaya. Marka ay dhallinyaradu caafimaad qabaan, waa ay u hunguri dheer-yihiin nolosha. Hal-abuurka wanaagsan iyo hanqal-taagga miisaaman ee dhallinyarada waxaa ka faa´iideysta bulshada. Awooddaas ayaa bulshadu waxay kaga gudubtaa nolol harraad, halamash iyo hagardaamo badan oo ay hamuunyona u dheer-tahay. Waxay u gudbaan nolol leh hiraal wacan iyo hillaac hal-dhisyo lagu doogsado. Ooraah ayaa jirta:

" Noloshu waxay isu kaa tusineysaa sida aad adigu u dooneyso iney kuugu muuqato ee isu kaa tusi-meyso sida ay iyada u dooneyso in ay kuugu muuqato ".

Qosolka iyo farxaddu waa ay ku badan tahay nolosha dhallinyarada, maxaa yeeley nolosha ayaa waxay ka doonayaan in ay ka helaan qosol iyo farxad. Sidaa darteed, iyaga waxaa u muuqata fursadaha nolosha. Haddii ay gartaan in fursadahaasi ay iyagu lee-yihiin, markaas waxay ku dadaalaan sidii ay u laaci lahaayeen. Haddii ay dhallinyaradu yihiin kuwo ka badbaada-qaba aragtida cunsuriyadda ah (fir-sooc) iyo midda curyaannimada ah (saama-jiid) waxay jecleystaan in ay magac hagaagsan sameystaan, intii magac loo sameyn lahaa ama ay dhaxli lahaayeen magac fac ka horeeyey ay ka tageen. Faca dhallinyarada ah waxaa mar-walba ku tallaalan doonis in ay dhanka wanaagsan u midab-beddelaan nolosha facii ka horeeyey, intii ay dhex-fadhiyi lahaayeen nolol ah soo-

arag ku-joog. Waxay jecel yihiin in ay fir-fircooni muujiyaan, intii ay noqon lahaayeen xan iyo xin u-joog. Dhallinta caafimaadka qabta waxaa ku yar tilmaamaha guracan oo bulshada ka dila han-tiigsiga nolosha, kuwaas oo damaca khariban iyo fuleynimada ay ugu horeeyaan. Xasuusta dhallinyaradu waa ka maran-tahay dhacdooyinkii lurka badnaa ee xilligii caruurnimada. Indhahooduna maahan kuwo qabanaya xaaladda lahanka badan ee xilliga waayeelnimada. Noloshooda waxaa u badan dareen la xiriira timaaddada, kaas oo ay uga dhex-muuqdaan nolol ku asqeysan nayaayiro iyo naallood. Maxaa yeeley waa faca ay noloshu u qosleyso ayna soo dhoweeneyso. Iyagu waxay lee-yihiin awood ay ku gaaraan har-gal nololeed iyo qurux walba oo ay jantaan. Shidaalka xooggan oo korkoodu uu sahayda u wato wuxuu sabab u yahay, in dhallinyaradu ay yihiin kuwa libta u keena bulshadooda. Aamusnaantooda waxaa ku naaxa gafanayaal aanan arxan lahayn ee bulshada gaarsiiya nabarro xanuun badan. Guuxa dhallinyaradu waxaa ku nasta maatada ku liidata nolosha. Dhallinyaradu waa matoorkii nolosha iyo tamartii dhismaha bulshada. Xooggoodu wuxuu lamid yahay tamarta korontada ee gidaarrada qolalka lagu diyaariyo. Tamartaas ayaa waxay tahay mid ka shaqeysiisa firinjiteer (qaboojiye) iyo kaawiyad (kululeyso) hadba kii la-doono. Waxay ka shaqeysiisaa idaacad (maqal-tebiye) iyo telefishan (muuqaal-tebiye) hadba kii la-doono. Waxay ka shaqeysiisaa taleefan (hadal-tebiye) iyo kombyuter (maqal- iyo muuqaal-tebiye) hadba kii la-doono. Waxay

ka shaqeysiisaa marwaxad (bankad) iyo saacad (gooreyso) hadba kii la-doono.

Waxaa jirta ooraah oraneysa:-

" Kala-garo in noloshu ay tahay qaddar jaan-go´an iyo dhacdooyin leh sababo. Qaddartana aamin, dhacdooyinkana wax iska-weydii "

Tamarta korontada ah, awood mid ah ayay ku sahleysaa adeegsiga dhamaan agabkaas kala duwan in si kala duwan, oo nafac kala duwan leh loogu intifaacsado dhacdooyin kala duwan. Dad sababaha dhacdooyinka is-weydiiyey ayaa hal-abuurey. Xoogga dhallinyarada waa ceynkaas oo kale. Waa tamar bulshadu lee-dahay oo meel u yaal. Marka qaddarta la rumeeyo, sababaha dhacdooyinkana leys-weydiiyo, xoogga dhallinyarada, bulshadu waxay uga faa´iideysan kartaa qaab walba oo maslaxaddeeda ah.

Bulshadu markii ay aragti haboon curiso, dhallinyaradu waa xoogga waaqica u beddela. Markii ay bulshadu dagaal curiso, dhallinyaradu waa kuwa gulufka hor-kaca. Markii ay bulshadu nabad curiso, dhallinyaradu waa kuwa hubka dhiga. Markii ay bulshadu hiraal curiso, dhallinyaradu waa kuwa suragal ka dhiga. Waxaa xeerarka nolosha kamid ah in xilli qof lee-yahay uusan gooreysan-karin qof kale. Sidaas si lamid ah ayaa facna uusan u bililiqeysan karin xilli uu lee-yahay fac kale. Haddeyse dhacdo waxaa u sabab ah nabarro ay la curyaameen ee weheliya faca la bililiqeystey.

Waxaa hubaal ah in faca howl-gabka ah ay lamid yihiin qorrax ka soo baxdey cirifyada adduunka, xilli qaboobe ah

iyada oo dhulku uu baraf ceegaago. Qorraxdaasi waa suuragal in laga helo kaahii maalinnimo. Laakiin waxaan laga helynin tamartii iyo kuleylkii socod-siin lahaa nolosha dhulka oogadiisa ah. Dhallinyaradu waa rajo ku-nool iyo timaaddo-sugayaal ah. Waayeelkuse waa xusuus iyo tagto ku-nool, rajaduna ka madowdahay. Haddaba bulshadii ay dhallinyaradeedu ku wareeraan aragti ma-dhaleys ah ee aan waaqic ahayn, wakhtigaa ka dayacma. Bulshadii dhallinyaradeedu ay guul-wadayaal u noqdaan kuwo daneystayaal ah, waa ay halaagsantaa. Bulshadii dhallinyaradeedu ay is kooxeeyaan, dabadeedna koox waliba ay dhankeeda ka raadiso in ay kooxda kale ka guuleysato, waxaa ka baaba´a awooddii ay kula tartami lahayd dhiggooda.

Xilligii dhallinyarada Soomaaliyeed ay caafimaadka qabeen waxaa ereyadoodii kamid ahaa :-

1. **Aboorkuba alleylkuu dhisaa aqallo waaweyne**
2. **Markuu ururey daartuu ebyaa la ashqaraaraaye**
3. **Ilkuhuba wada-jirkey hilbaha adag ku gooyaane**
4. **Haddii iniba meel taagan tahay adhax ma fiinteene**
5. **Itifaaq la´aan laguma helo lib iyo iimaane**
6. **Indhahaad isku arkeysaan cadaawaha isaga eega**
7. **Ha ordina´e xaajada sidii aydinta u raaca**
8. **Ha ekaanina´e talo ninkii odhan karow dhiibta**
9. **Abtirsiimo reer hebel iyo odey ku faan daaya**
10. **Indho-fura hurdada waa waxaad ku ibtilowdeene**

(Xaaji Aadan Af-qallooc)

Halkaas ayuu ku dhamaaday maqaalkii Dr Saadiq. Taariikhdii aan dhameeyay kitaabkan waxay ahayd 1/10/2013.

المراجع

1- كيف أصبحوا عظماء د. سعد سعود الكريباتي .
2- صفحات من صبر العلماء . عبد الفتاح أبو غدة .
3- قيمة الزمن عند العلماء . عبد الفتاح أبو غدة .
4- ما لم يخبراني أبي به عن حياتي . كريم الشادلي.
5- الطريق الى الهمة العالية . محمد بن حسن بن عقيل بن موسى.
6- علو الهمة د. محمد إسماعيل مقدم .
7- صلاح الأمة في علو الهمة د. سيد العفاني .
8- هكذا هزموا اليأس . سلوى العضيدان .
9- كيف تصنع طفلاً ميدعاً في عام .تأليف . عبدالله محمد عبد المعطي.
10-إدرس بذكاء و ليس بجهد . كيفن بول.
11-المفاتيح العشرة للنجاح . إبراهيم الفقي .
12-قوة العقل الباطن . أرثر توني .
13-أسرار قادة التميز – د. إبراهيم الفقي .